@SOMALIBOOKS

AAN OOYEE ALBAABKA II XIDHA
Daabacaaddii 1aad
Maxamed Xirsi Guuleed (Cabdi-Bashiir)

NALA SOO XIDHIIDH
Qofkii dalbanaya buuggan ama haya wax talo ama tusaale ah oo ku saabsan, wuxuu nagala soo xidhiidhi karaa cinwaanada hoos ku qoran:
abdibashir@hotmail.com
www.somalibooks.org

Xuquuqda buuggan oo dhan waxay u dhawran tahay qoraaga, lama daabacan karo idan la'aan.

©Abdibashir
Stockholm, Sweden
2012
somalibooks.org publications

ISBN: 978-91-976661-5-7

TUSMADA BUUGGA
GOGOLDHIG
MAHADNAQ
AFEEF
MUSIIBADII GUMAYSIGA SIDEE LOO MAAREEYEY
DEECAAMINTA BUUGGA
SHEEKH AXMED WACDIYOW (GABYOW)
Raajulka kaafur ah
Soomali ayaan u dagaallamaynaa
MAWQIFKII SAYIDKA IYO MEESHII UU KU DAMBEEYEY (1898-1920)
Nin Aqdaamo Faranji ah (Masafo)
Wallee Saamax Baan Jirin (Gabay)
Hoga-tusaalayntii bulsho ee Sayidka
DARDAARANKII SAYIDKA (GABAY)
Muxuu Rabay Sayidku?
MURUGTEY LAABTIIYE (Faarax Cismaan Kowte)
WAA DUNI LA KALA IIBSADAY (Faarax Nuur 1920-naadkii)
HABAAR TALYAANI (Guuleed Jucfe Warsame 1920-nadii)
QOONSADA HALKAA (Xad-beenaadka)
DALKAYAGA ILAAH KAA KEXEE (Talyaani 1940)
MAR KU ROGA (Cabdi-Dhukane)
MAXAA IIGA GIDHIISH AH (M. Nuur-Laangadhe)
RAQDII SHEEKH BASHIIR (X. A. Afqallooc 1948)
SULDAD XABASHIYEED (Ma Hadho)
GUUBAABADII
YUUSUF XAAJI AADAN QABILLE
Dagaal nimuu haysto meel halisa
Hub samayso Soomaaliyeey
Gobannimo intay laalan tahay

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

WAAN IRDHAYS-NAHAY (Gabaygii Fiinta)
TAA MIYAAN LA ARKAYN? (Cali Xuseen Xirsi)
MAANYARIDU SOOMAALI WAA ISTAAGEERID LAGA WAA (Keenadiid)
AAN OOYEE ALBAABKA II XIDHA (Barkhadcas)
AFGARAN-WAAGU WAA GUMAYSIGA
Geesiga Madow (Timacadde)
Nidarray Xaylow (Timacadde)
INGIRIIS RAGGUU LAAYEY (Ibraahim-Gadhle)
GALANGAL (Hadraawi)
GABADH MADOW (Hadraawi)
YABOOHIN HALYEY IYO HIMILOOYIN FOG
QAYBSHEYAAL IYO MIDEEYEYAAL
TIXRAACYO

GOGOLDHIG

Inta aanan u gudagelin nuxurka buugga aan ka hor mariyo dhowr hadal oo lagama maarmaan ah.

MAHAD NAQ

Mahad dhammaanteed waxay u sugnaatay, una suubbatay Allaha Weyn. Alle dabadii waxan u mahadnaqayaa cid kasta oo gacan ka geysatay buuggan aad akhriyeyso hadda. Waxa ka mid ah dadkaas: kuwa qoray buugaagta aan tixraacay, kuwa duubay cajaladaha aan wax ka soo guuriyey, kuwa qoray bogagga internetka ee aan wax badan ka faa'iday iyo dabcan dad badan oo siyaabo kala geddisan gacan ii siiyey, ha noqdo qof igu taageeray suugaan, mid iga saxay higgaad, mid ila macneeyey ereyo adag iyo mid i siiyey talo kale oo ku saabsan hirgelinta buuggan. Waxaan si gaar ah u xusayaa Dktr Saadiq Enow, Maxamed Baashe Xaaji Xasan iyo Abwaan Axmed Aw Geeddi.

AFEEF

Waxan ka afeefanayaa in aanan halkan ku soo wada gudbin suugaantii laga tiriyey gumaysiga, xilligii gumaystayaashu joogeen. Waxan rumaysnahay oo aan hubaa in ay marar badan ku laba jibbaarmayso suugaanta iga maqani, tan aan halkan ku ururiyey. Intani waa iga dadaal oo waxba iskama aan hagran. Laakiin haddii aad taqaanno ama wax suugaan ah ka hayso abwaan aanan halkan ku xusin oo kula diriray suugaantiisa gumaystayaashii, waxan kaa codsanayaa in aad i soo gaadhsiiso.

Waxa kale oo aan ka afeefanayaa in aanan halkan ku wada xusi karin dadkii si uun gacan ii siiyey ee faraha badnaa. Waxan leeyahay Alle ha idinka abaal mariyo wixii aad samo i tarteen.

Maxamed Xirsi Guuleed (Cabdi-Bashiir)

HORDHAC

Akhristaha sharafta lehow, waxad gacanta ku haysa buugyare isugu jira taariikh, suugaan, luqad iyo siyaasad. Kolba sidii aad u akhrido ayuu kuu noqon karaa. Xagga suugaanta waa buug lagu ururiyey maansooyin la tiriyey wakhtiyo kala duwan, oo ay kala tiriyeen abwaanno kala duwan oo ka soo kala jeeday deegaanno kala duwan. Ka soo bilow Sheekh Axmed Gabyow (Wacdiyow) oo dhammaadkii 1800-ladii ku noolaa gobolka Shabeellada Dhexe ee Soomaaliya, ilaa aad ka soo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

gaadhayso Maxamed Ismaaciil Baasarce (Barkhadcas) oo 1960kii wax yar ka hor ciil la hoos fadhiyey dhirta caleenta badan ee magaalada Hargeysa. Labadaa dhexdoodana waxa quban magacyo ku xeeldheeraa farshaxanka suugaanta oo haddii aan laga wada aqoon geyiga dhan, si weyn looga yaqaannay deegaannada qaarkood. Tusaale waxa inoo noqon kara Sayid Maxamed Cabdille Xasan oo ka caansan in laguu tilmaamo, Xaaji Aadan Afqallooc, Muxumed Aw Cabdi Xaashi, Cali Xuseen Xirsi, Faarax Cismaan Kowte, Cismaan Yuusuf Keenadiid, Yuusuf Xaaji Aadan, Cabdi-Dhukane, Cali-Tuur, Cabdillaahi Suldaan Timacadde, Guuleed Jucfe, Maxamed Nuur-Laangadhe, Ibraahin Gadhle iyo qaar kale oo badan.

Xagga taariikh ahaanta haddii la fiiriyo, wuxu buuggu isku koobayaa wakhti cayiman duruufihii jiray iyo wixii suugaanyahanku ka yidhaahdeen. Waa muddadii reer-Yurub iyo xulafadoodu ay gumaysanayeen umadda Soomaaliyeed ee Ilaahay dhulka u waasiciyey. Ka soo bilow markii la qabsaday bogcaddii ugu horraysay oo ku beegnayd dhammaadkii 1880 iyo markii ay xorowday meeshii xorriyad qaadata ee ugu dambaysay oo Jabuuti ah 1977. Waa muddo 90 sano ah qiyaastii. Dabcan qaybo badan oo dhulkii Soomaalida ah ayaan weli helin xorriyad buuxda oo aan looga sarrayn aayo ka talintooda.

Gumaystayaashu waxay Soomaalida u kala qaybsadeen shan qaybood oo kala ahaa Jabbuuti (French Somaliland), Soomaalilaan (British Somaliland), Koonfur (Italian Somaliland), En.Ef.Dhii (Kenyan Somaliland oo Ingiriis gumaysanayey) iyo Soomaali Galbeed (Hawdka, Reserved Area iyo Ogaadeen). Sida kuu muuqata waxa kala qaybsaday saddex dal oo reer-Yurub ah iyo Itoobiya oo la siiyey qaybtii ugu ballaadhnayd dhulka Soomaalida. Dhulka Soomaali Galbeed qaybtiisa Ogaadeen, waxay Ingiriiska iyo Itoobiya kala saxeexdeen 1897. Waxayna jeexeen xuduudka 1931. Laakiin heshiisyo badan oo dhacay wixii ka dambeeyey 1941 ilaa 1954 ayaa xitaa Hawd iyo Reserved Area loogu wareejiyey Itoobiya. Qaybtii Faransiisku waxa ay xorowday 1977, qaybtii Waqooyi Galbeed ee uu Ingiriisku haystayna waxay xorowday 26 Juun 1960, qaybtii Talyaanigu haystay waxay xorowday 1 Luulyo 1960, qaybtii Itoobiya weli waxay ku hoos jirtaa xukunka Itoobiya, qaybtii En.Ef.Dhii-na waxaa la hoos geeyey dawladda Keenya oo adduunka ku soo biirtay isticmaarkii kadib.

Taas macneheedu waxa weeye in shantii qaybood ee dhulka Soomaalida loo qaybiyey ay xorriyad heleen saddex qaybood halka labo ay weli ku hoos jiraan xukun shisheeye oo aanay weli ikhtiyaar buuxa u lahayn aayo ka talintooda qusaysa wixii aanay rabin umadaha ay ku hoos jiraan.

Saddexdii qaybood ee xoroobay, laba ayaa bilowgiiba midoobay oo la baxay magaca Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana saldhig u ahaa midnimadaas in saddexda qaybood ee kalena la xoreeyo oo lagu soo biiriyo midnimo Soomaaliyeed oo buuxda. Laakiin iska daa in la gaadho riyadii midnimada Soomaali Weyn ee, labadii is raacday ayaa markiiba kala booday. Qaybtii saddexaad ee Jabuuti ayadu gaar ayey isu taagtay ayada oo aan waddan magac Soomaalinimo balse ah, dal madax bannaan oo aan u gaar ahayn Soomaali ee ah mid jinsiyado badan oo lagaga hadlo ilaa afar luqadood oo siman.

Haddaba wuxuu buuggu xoogga saarayaa wixii ka dambeeyey muddada gumaysigu yimid, dhibkii yimid iyo sida abwaannadu u cabbireen dhibkaas iyo weliba sidii ay xalka u arkayeen. Waxa si weyn loo xusayaa dadkii ka gilgilshay gumaysiga iyo kuwii jaalka la noqday si ay manaafacaad yar u helaan. Dhammaan abwaannada aan xusi doonaa waxay u soo joogeen Soomaali idilkeed oo la gumaysto, waanay wada dhinteen. Laakiin hal abwaan oo ka mid ah ayaa intii gumaysigu tegay,

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

suugaantiisu hana qaadday ilaa haddana weli nool. Laakiin qiimo gaar ah oo ay suugaantiisu leedahay darteed ayaan ugu daray suugaanyahankii hore. Abwaankaasi waa Maxamed Ibraahin Warsame (Hadraawi) oo aan u aqoonsanahay shakhsi dadkii hore qiimaha badnaa inagala jooga.
Xagga luqad ahaanta, waxa halkan ku ursursan maansooyin kala nooc ah, gabayo, geeraarro, heello, masafo iyo jiiftooyin kala duwan. Maansadu waa marjaca ama tixraaca ugu muhiimsan ee luqadda Soomaaliga. Maansooyinkan waxa la tiriyey xilli aannu weli fasaqmin afka Soomaaligu. Markaa waxa buuggan loo isticmaali karaa tixraac xagga ereyada ah iyo aqoon-afeedka noocyadiisa kaleba.
Xagga siyaasad ahaanta, waxa la odhan karaa maansooyinku dhammaantood waxay ku saabsan yihiin siyaasad ka turjumaysa madaxbannaani u-dood, gumaysi-diid, guubaabo iyo tusaalaynta jidka toosan, ka-digidda shirqoollada shisheeyaha, ceebaynta dabadhilifka iyo dabadhilifnimada.

MUSIIBADII GUMAYSIGA SIDEE LOO MAAREEYEY
Gumaysashadii Soomaalida iyo kala-qaybsigii dhulkoodu ma ahayn mid ayaga lagala tashaday iyo mid lagu saleeyey danahooda toona. Dabcan taas waxaa la qabay dhammaan waddamada Afrika oo loogu tashaday shir ka dhacay magaalada Barliin ee carriga Jarmalka 1884-1885, halkaas oo lagu sameeyey xuduudaha Afrika oo sida xaqiiqda ah ahaa xuduudo ay kala dhigteen waddamadii reer-Yurub ee qaybsanayey qaaradda Afrika.

Markii aan garaaddaha
taariikhda kala guray
illaa gogol-dhiggiinnii
galabtaad is-wacateen
taladana in lay galo
Baarliin ku goyseen
Ilaa gooshkan maanta ah
hadimada i gaadhiyo
waxaad geysateen baan
gocashada xasuustee
maxaan reer-Galbeedow
godobkaa tirsanayaa?
– Hadraawi

Waxba yaan lala tashan Soomaalida laakiin gumaystayaashu waxay iska soo hor mariyeen sahan ay ku ogaanayaan dhaqanka Soomaalida, meelaha ay ka jilicsan yihiin, baahidooda, meelaha ay isku khilaafsan yihiin iyo waxyaalaha midayn kara. Markii ay fahmeen goljilicdii umadda Soomaaliyeed ayey soo galeen. Gumaystayaashu waxa ay ka sinnaayeen in ay kala xadaan dadka. Waxay adeegsan jireen dad ay u madax-buuxiyaan oo badiyaaba ah kuwa bulshadu qaddariso sida oday-dhaqameedyo iyo culimaa'udiin. Waxa kale oo ay aad u adeegsan jireen farsamada loo yaqaan "qaybi oo xukun."
Oday-dhaqameedyada waxay dadku ku aamminsanaayeen dhinaca masaalixda adduunyo, halka culimada lagu aamminay masaalixdii dhinaca aakhiro. Arrintaas waa ay fahmeen gumaystayaashu, mana ay la hadli jirin cid ilaa ay iska horraysiiyaan culimo iyo odayaal. Taasi bilawgii iyo mar dambeba wax weyn ayey u sahashay gumaystayaasha. Hase ahaatee bulsho weynta marna kamay dhaadhicin

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

inay gumaystayaashu maslaxo Soomaaliyeed iyo mid Islaam toona wadi karaan. Waatii uu Faarax Nuur lahaa isaga oo abhinaya odayaasha u dan qumminaya gumaystaha:

Nimanyahow bal daya xaajada, lala aguugaayo
Odayaashan loo yeedhay ee, la anfac siinaayo
Asaxaabihii bayna yidhi, gaal ha aaminine
Haddaad niman Islaamiyo tihiin, Aadan faraciisa
Oo aydaan llaahay ka go'in, hayna oodina'e
– Faarax Nuur

Sidoo kale waxa culimadii leexatay la hadlay abwaanno badan, sida Sayid Maxamed Cabdille Xasan oo yidhi:

Awgii Siyaarada lahaa, selel hadduu qaaday
Oo ay sahwiday culimadii, saxal-mariikhowday
Saxariirka aakhiro hadday sax u ogaan wayday
Saqiir iyo kabiir waxa la geyn, Saqara naareede

Xaaji Aadan Afqalloocna waatii uu lahaa:

Af-dalleela iyo baad shubtaan diin la iibsado.

Dhinaca kale Muxumed Aw Cabdi Xaashi ayaa meel fog ka saadaalinayey cawaaqib xumada ka dhalan karta falalka gumaystaha. Waxa aan caad yari ka saarnayn haddii laba cadow ka tashadaan aayahaaga in aanay nasteexo ka soo socon. Wuxuu yidhi isaga oo ka qiiraysan markii xuduudka la samaynayey:

Qoof weeye laba gaal hadday, talo qorsheeyaane
Qoonsada halkaa waxa ku jira, qabar laxaad weyne
– Muxumed Aw Cabdi Xaashi

Waxa sidaa si la mid ah u hadlay Faarax Nuur oo la yaabbanaa siday shisheeyuhu isugu dirirsan yihiin kala qaybsiga dhulka Soomaalida iyo sida qaarkeen ugu kala beretamayaan u hawl-fududaynta cadowga, ayaga oo u xilanaya dheefo yaryar. Wuxuu yidhi:

Ingiriis Axmaariyo Talyaani, wey akeekimiye
Arligaa la kala boobayaa, nin u itaal roone
Anse ila ah aakhiru sabaan, iligyadiisiiye
– Faarax Nuur

Dib aynu u yara noqonno ee, waxa judhii horeba bilaabmay kacdoono gumaysi-diid ah oo midabo diineed lahaa. Dhammaan gobolladii gumaystayaashu ximaaddeen waa lagula diriray. Waxaana loola diriray hab diini ah oo jihaad ku sifaysnaa. Wax iska caabbintii Jubbada Hoose, culimadii beesha Biyamaal, xertii Sheekh Axmed Gabyow (Wacdiyow), Daraawiishtii Sayidka, Kacdoonkii Sheekh Xasan Barsame iyo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

jihaadkii Sheekh Bashiir ee beryo dambe oogmay ayaa la xusi karaa.
Laakiin dhammaan kacdoonadii diiniga ahaa ee umadda Soomaaliyeed ka dhex abaabulmay si xun ayaa loo burburiyey. Maxaa yeelay ujeedooyinka gumaysigu u yimid waxa ka mid ahaa in la curyaamiyo diinta Islaamka. Waxa beryahaas dardar ku socday qorshihii lagu burburinayey Khilaafadii Islaamka ee gabaabsiga sii ahayd. Qorshayaasha gumaystayaasha ee burburinta Islaamka waxa ka mid ahaa:
1. In aan la aqbalin adduunkana laga ilaaliyo nadaam meel ka jira oo shareecada Islaamka ku shaqeeya
2. In aan la aqbalin, adduunkana laga ilaaliyo ciidan leh hab-dhaqan iyo yoolal Islaami ah
3. In la kala qaybqaybiyo Muslimiinta oo inay midoobaan iska daaye lagu dadaalo sii qurbidda kuwa kala qaybsan
4. In dharabta lagu khaarajiyo cid kasta oo u dhaqdhaqaaqda soo-noolaynta Khilaafadii Islaamka, kuwaasi ha ahaadeen ashkhaas ama ururo ee.

Qorshayaashaas oo jiray ayey wadaaddo Soomaaliyeed oo aan isku xidhnayni ka abaabuleen meelo badan dagaallo lagaga hortagayey gumaystayaasha. Dabadeed si arxan darro ah ayaa meel walba loogula dagaallamay, ilaa kacdoon walba la dhiciseeyey. Kacdoonka ugu cimriga dheeraa wuxu ahaa kii Daraawiishta ee uu hoggaaminayey Sayid Maxamed Cabdille Xasan oo 25 sano socday. Isagiina si aan naxariis lahayn ayaa looga adkaaday, ayada oo loo adeegsaday dayaarado dagaal oo ah kuwii ugu horreeyey ee lagu duqeeyo meel Afrika ka mid ah. Malleeshiyaad Soomaali ah oo siyaabo kala geddisan lagu dagaal geliyey laakiin garab iyo gaashanba u ahaa gumaystayaasha, ayaa iyaguna dhabarka ka wareemay. Culimo iyo oday-dhaqameedyo gumaystuhu xannaanayn jiray ayaa iyaguna ka caawinayey dhinaca diyaacadda iyo sumcad dilka. Taas macneheedu ma aha in aan leeyahay Sayidka iyo Daraawiishtu waxay ahaayeen ceeb ka saliim aan khaladaad lahayn. Jabkaa Daraawiishta gaadhay, waxa ka horreeyey jab ruuxeed oo Soomaali oo dhan gaadhay. Soomaalidu waa ay is wada nacday waagaas. Arrintaasna waxa ka shaqeeyey gumaysteyaasha. Jabkii Sayidka badiyaaba lagama nixin, maxaa yeelay dadka waxa la gaadhsiiyay heer loo tusay in cadowgooda koowaad yahay nin Soomaali ah. Waxay dad badani nasteex u arkayeen gumaystayaashii.

Laakiin markii Daraawiishtu jabtay ee la waayey wax Soomaali ah oo cadowga cabsi geliya, ayuu cadaadiskii ugu badnaa ku bilawday Soomaali oo dhan, xitaa kuwii la shaqayn jiray gumaysteyaasha. Kadeedkii waa la xammili waayey laakiin waxa wadno loo waayey laba arrimood oo kala ah: dagaal hub loo qaato iyo magac diineed oo lagula diriro gumaystayaashii iyaguba gaalaysiinta ka waday geyiga. Maxaa yeelay, waxa dhegaha dadka ka sii qaylinayey dhirbaaxooyinkii kul-kululaa ee kacdoomadii culimada ee kala danbeeyey gaadhay.
Markaas waxa bilawday dhaqdhaqaaq gobannimo-doon ah oo ay badiyaaba horseed ka ahaayeen ardaydii uu gumaystuhu wax baray. Halbeegoodu wuxuu ahaa Soomaalinimo iyo xorriyad. Laakiin magac diineed kuma ay hawl-gelin, waxaanad mooddaa in ay fahmeen in aanu cadowgu u tudhi doonin haddii laga dareemo Islaam u-dirirnimo. Markii hore ash-khaas ayaa halganka astaan u ahaa, markii dambe se waxa samaysmay ururo gobannimo u-dirir ah oo la jaan qaadayey dabaylihii xorriyad doonka ee adduunka kale ka jiray. Dhaqdhaqaaqyadaasi waxay abuureen dareen xooggan oo qowmi ah, kuna salaysnaa in Soomaalida oo dhami xorowdo oo dawlad mid ah dhisato. Gumaystayaashu may rabin dareenkaa

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

qoomiyadeed ee xoogaysanayey. Markaa waxay ka shaqeeyeen gumaysteyaashu sidii xorriyadda la dalbayo looga ilaalin lahaa Islaamiyiin iyo waddaniyiin dhab ah. Waxa si tartiib tartiib ah xilka loogu diyaariyey karraaniyaashii iyo waardiyeyaashii gumaystaha.

Qaar ka mid ah indheer garadka Soomaaliyeed waa ay fahansanaayeen luggooyada meesha ka soo socota. Yuusuf Cismaan Keenadiid ayaa 1956 cabbiray sida xaalku ula muuqday. Wuxuu yidhi:

Tafaraaruqa kuwaas inagu ridey, toodi suubsade'e
Taws aan baxayn iyo bugtey, nagu tallaaleene
Tubtii innaga leexshiyo jidkii, inagu toosnaaye
Tashigiiba sida loo gafaan, weli tebaayaaye
Towfiiq ma noqon wiilashii, taajka loo suraye
Tacaddi aan yareyn baa ka dhacay, tey ku kacayeene
Ninkii tira-yar maalkiisa waa, laga takooraaye
Mareekaanka nagu taagan baa, taabey jahadiiye
Amxaarana tahdiid iyo waxay, tiri naloo sheegye
Cadowga soo tartamayiyo cabsida, loo tawaley ruuxa
Laye tamashle uun bey hayaan, tiilka madaxdiiye
Dawladnimo tabtaa lagu dhaqaa, tacaddi sow maaha.
– Cismaan Yuusuf Keenadiid

Aakhirkii waxa si nasiib ah xorriyad loo siiyey gobolladii Ingiriisku gumaysan jiray iyo kuwii Talyaanigu gumaysan jiray. Si halhaleel ah ayey u midoobeen, uguna hawlgaleen sidii loo heli lahaa shanta Soomaaliyeed oo wada xorooba, dabadeedna midooba. Isla wakhtiyadaas waxa bilawday dadaallo caalami ah oo lagu beenaynayo riyada Soomaali Weyn ilaa aakhirkii lagu guulaystay in xitaa qaybihii nasiibka ku xoroobay loo celiyo qabaa'il is neceb oo cadowgooda koowaad u yaqaanna nin Soomaali ah.

Fashilka ugu weyn ee ku yimid gobannimadii la helay, waa ayada oo u gacan-gashay dadkii uu soo tabobartay gumaystuhu oo siyaasadda ka yaqaannay sida loo maamulo ummad la gumaysanayo. Farxaddii iyo raynrayntii lagu soo dhaweeyey xorriyadda, markiiba way gaagaxday. Waxa taas sida qorraxda u caddaynaya suugaantii la tiriyey sannadadii ka dambeeyey 1960kii. Bal u fiirso Guhaad Cabdi-Gahayr oo markiiba fahmay in aan meesha xorriyad la heline, ay is bedeleen uun nin cad iyo nin madow, laakiin fikirka iyo dhaqanku isku midkii uun yahay weli:

Good iyo abees bays bedelay, garanna maysaane
Goraygii ilmii buu ka tegay, guumiska ahaaye
Gocondhooyin baa aasan iyo, mid gabaarrey
Karal kaama guurine halkanuu guud madow yahay.
– Guhaad Cabdi-Gahayr, 1960

Waxa sidaas si la mid ah u cabbiray Abwaan Qaasim oo isagu markii hore u damaashaaday xorriyad la-mooddii la helay. Wuxuu yidhi:

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Dambi ku hadli maayee ma arag, dawladdaan rabaye
Isma doorin gaalkaan diriyo, daarta kii galaye
Dusha midabka Soomaali baad, dugulka moodaaye
Misna laguma diirsade qalbigu, waa dirkii Karal e
Meeshaan dad aan urursho iyo, darar ka eegaynay
Iyaba waa darxumo ii hor lehe, dacar miyaan leefay?
Ma darraato raadkaan dhigaan, dib ugu soo laabtay?
Sidii aan dayaysnahay miyaan, dawgii ka habaabay?
– Axmed Ismaadil Diiriye (Qaasim)

Cabdillaahi Suldaan Timacadde ayaa isaguna saadaal ka bixiyey dhibta kasoo socota kusii-xidhnaanta iyo jaal la-noqoshada gumaystayaasha isaga oo caddeeyey in aanay wax horumar ah la rabin dadka Afrikaanka ah. Wuxuu yidhi:

Geesiga madow uma ogola, guusha reer-Yurube
Geerida Lamuumbaa wadnuhu, noo gig leeyahaye
Geyigiisa goortuu qabtee, gees isugu leexshay
Iga guura galabtuu yidhaa, geeddan loo xidhaye
Godka waxa u qoday Haamarshool1, waa gedduu rabaye
Maantaba hadday gawraceen, way gam'ahayaane
Meeshuu galaba doollaarku waa, uu gembiyayaaye
Ninkii dunida kala gaabiyaa, garabsanaysaane
Raggan gacanta haystoow wallee, saad-dambaad garane
Qudheennani intaynaan geb odhan, yeyna kala gaadha
Haddii kale se goor aan fogayn, gawda bal aan eegno
– Cabdillaahi Suldaan Timacadde, 1961

Maxamed Nuur-Laangadhe oo ah abwaanka tiriyey geerarka la magac baxay Maxaa liga Gidhiisha, ayaa isaguna ka cabanaya sida uu ugu hungoobay calanka la belay. Wuxuu yidhi:

Calanyahow dhib baa igaga timi dhalashadaadiiye
Dheef baa lagaa eegayee, dhiig sidaad tahaye.
– Maxamed Nuur-Laangadhe, 1963

1. Hamarshool: Waa Dag Hammarskjold ahaa nin Iswiidhish ah oo xukumayey UN-ka (Qaramada Midoobey) min 1953 ilaa markii la khaarajiyey oo ahayd 1961. Wuxuu Timacadde qabaa in uu lug ku lahaa dilkii foosha xumaa ee Batriis Lumumba.

Mar kale waxa xus mudan Guhaad Cabdi-Gahayr oo rajo ka qabay in hoggaan fiican oo wadani ah la helo, oo markii Aadan-Cadde la bedelay, arkay in aan waxba is-bedelin. Wuxuu yidhi:

Kanna aragte kii horena waad, wada ogeydeene
Miyaan madax Ilaahay taqaan, nooba imanaynin?
– Guhaad Cabdi-Gahayr, 1967

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Intaasi waa garooc yar oo ku saabsan dareenkii abwaannadu ka muujiyeen xorriyaddii dhicisowday ee Soomaalidu ka heshay cadowgii siddeetanka sano gumaysanayey. Xorriyaddaas dhicisowday iyo halgankii dheeraa ee loo galay heliddeeda iyo xanuunkii laga mutay gumaysiga waxaad igala dheehataan buuggan. Weliba si aydaan ugu hafan badweynta soo socota ila sii deecaamiya googoosyo ka mid ah suugaanta aad kula kulmi doontaan gudaha buugga.

DEECAAMINTA BUUGGA

(1)
Bal Oggow Isticmaarku Abidkii
Irridkuu Marinaayo Awr Raran
Irbad buu Ku Dayaa Ayaanta Horee
Raggaan Arkayee U Abasaxayow
Ninowna Ha Odhan Soomaalaan Ahee
Ordoo Magacana Ka Iibsada.
– Barkhadcas, 1958

(2)
Gambadii dumarkaa la ii guntiyoo
Gabbal baa iigu dhacay gasiirad cidloo
Gabaahiiri waa gumaysiga
– Barkhadcas

(3)
Rajulka kaafur ah ee rugtaan yimid
Sidii rasuul Rabbi nooma soo dirin.
Mana rabnoo naga reed bax waa niri
Haddaadse ruux la dagaasho kaa roon
Reerkaad u kaashan laheydne raagaan
Ragoow haddee qalbi waa rafaadaa.
– Sheekh Axmed Gabyow, 1891

(4)
Waa duni la kala iibsadoon, nala ogeysiine
Waa duni akhyaartii go’dayoo, aaran soo hadhaye
Waa duni ninkaad aamintaa, kuu abees yahaye
Anse ila ah aakhiro sabaan, iligyadiisiiye
– Faarax Nuur, 1920naadkii

(5)
Ingiriis ragguu laayey baan, cidi illaaweyne
Axmad-Gura unuunkay jareen, ehel ha waayaane
Oomaarna waad wada ogtihiin, uubtii loo qodaye
Sayidkii addoonsiga nebcaa, aakhiro u tabiye
Waa kuwii Cadhoolana2 ajalay, calankan awgiiye
Halyeygii Bashiir bay dharaar, adhaxda gooyeene.
– Ibraahin Gadhle

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

(6)
Doodna waxaan u leeyahay, da'kastaba ha noqotee
Kuwii diinta qariyow, idinkays dilaayoo
Nin dalkiisii iibsaday, dulli buu ku waariye
Ninkii gaalka dabagala darxumow dambaynoo
Naftu hadday ka duushana, dalku waysu diidiye.
– Sayid Maxamed Cabdille Xasan, bilowgii 1900

2. Cadhoole: Waa Cabdiraxmaan Cadhoole oo kamid ahaa halgamayaashii aqoonyahanka ahaa ee loo unuun-jaray gobannimo doonka, gaar ahaan dhinaca Jabuuti. Si naxariis darro ah oo cadaawad miidhan ah ayey gumaysiga Faransiisku u dileen Cabdiraxmaan Cadhoole. Arrintaasi waxay ku reebtay shacabka reer-Jabuuti uur-kutaallo iyo halgan adag oo ay u sii galaan xorriyaddooda. Fiiri qormada Cabdalla Xaaji ee halgankii Jabuuti.

(7)
Dawo lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane
Dabin buu idiin qoolayaa, way din dagayaaye
Dirhamkuu idiin quba-hayaad, dib u go'aysaane
Marka hore dabkuu idinka dhigi, dumar sidiisiiye
Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Marka xiga dalkuu idinku odhan duunyo dhaafsada e
Marka xigana daabaqad ayuu, idin dareensiine
Maxaad igaga digataan berruu siin3 la soo degiye.
– Sayid Maxamed Cabdille Xasan

(8)
Waxay tidhi "Inkaar buu ku go'ay, odagi Soomaale
Awlaaddi uu dhalayna waa, sida adoogoode
Hadday ul iyo diirkeed yihiin, rag iska eegaaya
Afrikadan ma joogeen nimaan, aabbe ku lahayne.
– Cali Xuseen Xirsi, 1950naadkii

(9)
Siduu abeeso dilaayo,
ragguu laayey Abeelle4
ce la dhacaayey Alwaaxa
ce Afka dhiiggu da'aayiyo
agoontii yaryaraydee
aabbihii korinaayey
uu ka gooyey unuunkan
Miyaan taa la arkaynin?
– Cali Xuseen Xirsi

Siin: Waa qalabka war-isgaadhsiinta ama war lalinta qaarkood.
Abeelle: Waa magac nin Talyaani ahaa oo gumayste ahaa.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

(10)
Gobannimo mid weeyee hadduu, meero xariggeedu
Misbaaxiyo haddey kaa demaan, muunaddiyo nuurku
Gacmo maran mugdaa kuu xigiyo, meel xilliyo hooge
Dawladnimo nimaan maalahayn, laga mid roonaaye
Mulki iyo awood iyo waqii, malaha maamuuse
Mucsir weeye maalmaha adduun, magan ha loo yaabo
– Faarax Cismaan Kowte, 1920naadkii

(11)
Dunjiga Aadan ubadkuu dhalaad, ugu dambaysane
Wixii aad ku dacafteen, qalbigu saw iskama daayo
Dib maxaa idiin celinayoo, hore idiin diiday
Mar uun maad ku dayataan khalqiga, libinta doonaaya.
– Xaaji Aadan Afqallooc

(12)
Gobanimo dalleel lagama helo, daar adoo gala'e
Haddaad doono leedahay naftaa, diiq la geliyaaye
Waa mur iyo deebaaq waxaad, dib ugu aydaane
Marse haddaan waxaan doonayiyo, dawladnimo waayey
Dantay weeye inan aamusaa, eegga dabadeede
Dulligaa ku jira noloshu waa, idinku deelqaafe.
– Xaaji Aadan Afqallooc, 1940naadkii

(13)
Kun baa subax disheen aamin ah, oo seexdey oo kacay
Saddex boqol ka badan culimadii, suuqa Harar tiille
Iyaga oo salaad jamac galaad, seefku mariseene
Saqda laylka dhaxe waxaad gasheen soolkii Dhagax-buur e
Samada iyo dhulkaba ciidankii, riday sawaariiqda
Kama seydhin ruux keliya oo, joogay subaxaase.
– Xaaji Aadan Afqallooc

(14)
Samir iyo Allow maleh sidaad, noola dhaqanteene
Waa ma hadho saanqaadka kora, lala sugaayaaye
Dhiig saafiyaa loogu qoray, saan biciid adage
Duq kastaaba sabiguu dhaluu, saa ogow yidhiye
Gartayadu xuduud kuma sinna iyo, soohdin iyo jaare
Waa saamigaad qaadateen, sabankii Baarliine.
– Xaaji Aadan Afqallooc

(15)
Qoof weeye laba gaal hadday, talo qorsheeyaane
Hindigay qafaasheen beryey, qaran ahaayeene
Qarni malaha Yawguba markuu, qaatay keenada e
Waa tii Suweys uu qabsaysay, qamac dharaareede
Waxa horteen sidaa loo qarribay boqol quruumoode

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Qoonsada halkaa waxa ku jira qabar laxaad weyne.
– Muxumed Aw Cabdi Xaashi, 1920-30kii

(16)
Waagaan dhawaaqaayey een dhego la'ii yeelan
Dharaartii hadday ila gartaan lama dhaqaajeene
Maantooy dhanaanaatay bay dhabanka haystaane
Dhammaantiin Soomaalaay hadday, dholo'di joogtaaye
In Qiyaamihii soo dhawyahoon, dhegiba noolaanin
Iyo gaalka inaan dhoofinoo, dhidibka loo saaro
Labadaas mid uumbay u dhici dhaaxa lala yaabye.
– Muxumed Aw Cabdi Xaashi

(17)
Talyanoow sidii duur belbelay, dab isu kaa dhaafye
Degelladu ku wada naaqusoo, dugum lagaa yeelye
Dekedaha wax kugu qayliyaa, kaaga soo dego ee
Duufaan Ilaahay ku geli, sida dabayleede.
– Abwaan Cali-Tuur

(18)
Haddii Ciise Muusaha majnuun, lagu malaynaayo
Waa muusannaw xaajadaa, nagu maqleyseene
Intaan marantideenniyo hablaha, madaxa loo xiirin
Mar ku roga mareeg-diidka waa, laga macaashaaye.
– Abwaan Cabdi-Dhukane

(19)
Dadkey madaxdu ka xumaato way, marin habaabaane
Kuwa muqaddimada looga dhigey, waa manfaco doone
Mar maxaad cuntaa keliya buu, yahay muraadkoode
Nin mushaharo eexeyn-hayaa, waa miskiin dhabahe
Muddeec waxa ka dhigay waa inuu, maarmi-waa yahaye Muddaafacana seeg iyo in uu, maya yiraahdaaye
Culimadana damac baa melgoo, mooyi sey tahaye
Milladdiyo shareecada bar baa, maal ku iibsada'e
Marsiin iyo fudeyd buu ku dhacay, magane diinkiiye.
– Cismaan Yuusuf Keenadiid

(20)
UN-ada taarka loo direy, waxba nama taraayee
Waxay taawin badidood, si laynoo taxaabto e
Waa la takhantakhayn jiray, ninkii tabar-yar weligiye
Tiirridatan gaalo ah, jinnaa inagu taagaye
Waa niman takoormayoo, towxiidka diidaye
Towreed iyo Injiil iyo teennaba ka beyre e
Tawaani keen isuma hayso, isku towna maahine
Ninkii haatan taabacayna, tubta kheyrka seegyaye

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Togaggii Firdowsaad, tegi-maayo weligiye
– Cismaan Yuusuf Keenadiid, masafo

(21)
Ingiriis Hargeysuu degiyo, hilinnadeediiye
Wax Talyaani weli haybiyaa, hoosadii Xamare
Faransiis Jabuutuu hurdaa, idinku hiifaaye
Wax Maraykan hawdka u maraa, waa horseed yimiye
Waakaas dhulkeenii hantiyey, hooliflow Xabashe
Hub samayso Soomaaliyeey, lagu hareereeye.
– Yuusuf Xaaji Aadan Qabille

(22)
Qaramadan gadaal-kacay qarbigu, waa geddiyayaaye Gobannimada lama doonayaan, gadasho mooyaane
Wiilkii garaad lagu tuhmaba way ka gurayaane.
– Cabdillaahi Suldaan Timacadde

(23)
Nasaqnimo Cagoolow Rabbaa, naaska kuu sudhaye
Ogaadeenku waa nala niyoo, nuurki wada gaadhye
Nafarkiyo aday kugu hodeen noolka Xabashaade
Nacabkaaga weeyaan waxaad, nugusta haysaaye
Kuwii Nebiyadii caasiyaa, Naashka kuu dhigaye
Naxlina kuu gal Soomaalidaad, Naafi leedahaye.
– Cabdillaahi Suldaan Timacadde

(24)
Goldalooladay jecel yihiin, ciday galaaftaane
Gelin qudha ma daayaan ninkay, gaatir ku arkaane
Gacma-hoorsi kaagama tagaan, kumana guuraane
Geesaa bay yeeshaan haddaan, waranku giirrayne
Dhegahay gufeystaan haddaan, geesiyaal heline
Garta ay dhagaystaanba waa, gumuc rasaaseede!
Gujaduu ku maalaa ninkii, geda-yaqaanaaye.
– Hadraawi

(25)
Hub wixii galaabaxay haddaan, meelna lagu gaadhin
Ninkiinnii gurguurtiyo intii, naafo gabargaashey
Ninkii gurungurcoodkuu dhaliyo, gacaladiis waayey
Nin goblamay nimaan gaban u hadhin, gaar nin keligiisa
Gallad qubatay xooliyo dadiyo, garangar duugowday
Gocoshiyo xanuun ma leh wixii, guud ahaan lumaye
Gobanimada waa loo dhintaa, gooriyo ayaane
Ummad gadata mooyee nin kale, waa ka garannuuge
Ma gabloosho beertii xabiyo, dhiig ku goraraaye
Damalkii la gooyaba mid baa, soo gadaal baxa e

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Guri laga baroortaba aroos, gaafan baa xiga e.
– Hadraawi

(26)
Maxaa guul darraystiyo
godadliyo hinaasiyo
Gocor igu habayseen
Giiba sow nin ma ahayn?
Geeskayga bari yimi
Maxaad gacan ku dhiigliyo
gibil kala tabooriyo
garma-qaate dhegaliyo
garac igu abuurteen?
Maxaad good mariidliyo
gungumiyo abeesiyo
goodaaddo jidhifliyo
garangoorri socotiyo
inta bahal gurguurtiyo
belo igaga guurteen.
– Hadraawi

(27)
Gudaha ceelka Hargeysa
Weligay gees uma dhaafin e
Bal maxaan laba gaal oo
Abtirsiimo gudboon
Midkood guusha u siin
Midna aan u gumeyn
Maxaa iiga gidhiisha?
– Maxamed Nuur-Laangadhe, 1943

SHEEKH AXMED WACDIYOW (GABYOW), 1891
Sheekh Axmed Sheekh Abiikar Xasan Sheekh Axmed Wacdiyow (Gabyow) oo ku noolaan jiray gobolka Shabeellada Dhexe, wuxuu ahaa nin caalim ah isla markaana suugaan-aqoon ah. Wuxuu had iyo jeer bulshada ku wacyi-gelin jiray suugaan kala duwan oo ay ugu caansanayd nooca maansada loo yaqaan masafo. Xitaa dacwada iyo diin-fidinta wuxuu u-adeegsan jiray maansooyin kala duwan oo si dadban caqiidada u tiimbinaya dadka. Haddaba markii uu gumaystaha Talyaanigu qabsaday dhulka Soomaaliyeed, wuxuu Sheekh Axmed-Gabyow kala hor-tegay dagaal jihaad ah. Wuxuu abaabulay dadkii, wuxuuna ku guubaabiyey suugaan. Sida u caadada ah dadka aan meel fog wax ka eegin, qaar badan ayaa Talyaaniga gacan ka siinayey danihiisa gurracan. Bulshada badankeeduna uma ay dhega-nuglayn Sheekha iyo dadka la midka ah ee ku dhiirrinaya in gumaystaha la iska qabto inta goori goor tahay. Waxaa ka mid ah suugaantii uu dadka wax ku fahansiinayey masafooyinka soo socda.

Raajulka kaafur ah
Rajulka kaafur ah ee rugtaan yimid
Sidii rasuul Rabbi nooma soo dirin

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Mana rabnoo naga reed bax waa niri
Haddaadse ruux la dagaasho kaa roon
Reerkaad u kaashan laheydne raagaan
Ragoow haddee qalbi waa rafaadaa.

Soomali ayaan u dagaallamaynaa
Markii Talyaanigu yimid degmada Cadale sanadkii 1891, wuxuu Talyaanigu dhinaca Muqdisho kasoo diray odayaal Soomaali ah si ay Sheekh Axmed-Gabyow uga joojiyaan suugaanta uu dadka ku kicinaayo ee uu kaga soo hor jeedo gumaysiga Talyaaniga. Markaa wuxuu Sheekh Axmed-Gabyow ugu jawaabay odayaashii uu soo adeegsaday Talyaanigu:

Soomaali aan u dagaalamaynaa,
Dalkaan balaaran u daafacaynaa,
Kufriga soo degay diida leenahay.
Kuwa dulmaaya la dood gelaynaa,
Dantiinii duul kale dhowri-maayee
Ha daalinoo u dulqaata leenahay
Dabeysha mowdku intuu i daadayn,
Hilibka duud cunin, oonan deebna noqon,
Dadka tus aan danahiisa leeyahay
Duruyaddaada dab looma aasee,
Kuwa dambaan u dariiq falaynaa.

MAWQIFKII SAYIDKA IYO MEESHII UU KU DAMBEEYEY, 1898-1920
Sayid Maxamed Cabdille Xasan wuxuu ahaa wadaad asal-raac ah oo ay haysay qiiro Islaamnimo iyo mid waddaniyadeed oo cabsi gelisay gumaystayaashii Ingiriiska, Talyaaniga iyo Xabashida iyo xitaa Faransiiska oo dhammaantood ku shuraakoobay boobkii dhulkii Soomaalida. Wuxuu kusoo beegmay xilligii reer-Galbeedku kala qaybsadeen dhulkii Soomaalida iyo qaaradda Afrika badankeeda iyo weliba guud ahaan caalamka aan caddaanka ahayn. Boobka dhulka Soomaalida waxa reer-Galbeedka ku wehelinayey dawladdii Xabashida ee xulafada la ahayd. Dawladda Ingiriisku waxay qoondaysatay oo degtay dhulkii markii dambe loo bixiyey Soomaalilaan. Dano dhaqaale, qaar istiraatiijiyadeed iyo kuwo diineedba way lahaayeen gumaystayaasha reer-Galbeed. Haddaba Sayidku wuxuu noqday qofkii ugu horreeyey ee dagaal abaabulan ka bilaaba dhulkii Ingiriisku gumaysan jiray. Hase ahaatee waxa dhiciseeyey halgankiisii gumaystayaashii saddex-geesoodka ahaa: Ingiriis, Talyaani iyo Xabashi, hoggaamiye dhaqameedyo gacan-saar la lahaa gumaystaha iyo culimo gacan-saar la yeeshay gumaystaha iyo dabadhilifka gumaystaha.

Culimadu xagga diinta ayey ka wareemeen oo waxay dadkii ka dhaadhiciyeen in aanu ninkani diin sax ah haysan ee uu lunsan yahay. Hoggaamiyeyaashii qabiilkuna waxay dadkii uga dhigeen nin qabaa'ilkooda dabargoynaya oo aan u jeedin la dagaallan gaalo. Marka ay dadka ku carinayeen goldaloolooyinka Sayidka iyo Daraawiishta, marna ma aanay ka hadlahayn sidii gumaystaha la isaga kicin lahaa iyo waajibnimada arrintaas. Marka la xasuusiyo xumaanta gumaystaha, waxay xujadoodu ahayd, "Kuwani waa cadow gaalo ah oo xumaantoodu way iska caddahay, laakiin xikmad ayaa loo baahan yahay."

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Sayidku dhinaciisa wuxuu olole ugu jiray inuu helo taageerada bulshada. Wuxuu si walba ugu dadaalay kasbashada culimada iyo odayaal dhaqameedka beelaha. Wuxuu qabay fikir ah in ay waajib diineed tahay la-dagaallanka gumaystayaasha. Ciddii caawisa gumaystaha ama safkooda gashana wuxuu u qabay gaalo diinta ka riddowda oo dhiiggooda iyo maalkooduba bannaan yahay. Markii uu ka quustay dadkii hormoodka ahaa ee gumaystaha kala saftay, waxa uu ku bilaabay dagaal rogaal-celis ah oo uu xumaantooda kaga digayo. Haddaba halkan waxa aynu kusoo qaadanaynaa dhawr gabay oo muujinaya mawaaqiftii Sayidka iyo mabda'ii halgankiisa.

Nin aqdaamo Faranji ah (Masafo)
Sayid Maxamed Cabdille Xasan
Mar wax laga waydiiyey Sayid Maxamed dadkan gumaystaha ka raacay ee haddana sheeganaya Soomaalinimo iyo Islaamnimo, ayuu masafadan tiriyey. Wuxuu sheegay in kuwaas ashahaadadoodu been tahay oo aanay sax ahayn in Islaamnimo lagula dhaqmo. Wuxuu yidhi:
Nin aqdaamo5 Ferenjiya,
Maantiyo abuurriin
Ama aaladda u sida,
ama awrtaba u rara
Ama adhigaba u qala,
ama laba ugaadhsada
Ama uba ilaala ah,
ama uurka kala jira
Ashahaado beeniyo,
Islaamnimo ha lagu dhaqo
Ilaahayna nama odhan,
Anna ma oggolaan karo!

5 Aqdaamo: Khaadin, adeege.

Wallee Saamax Baan Jirin (Gabay)
Mar kale waxa uu Sayid Maxamed Cabdille Xasan caddeeyey mawqifka diintu ka qabto dadka la safka noqda gumaysteyaal gaalo ah oo mullatari ahaan ku jooga dhul Islaameed. Caamada waxa jaho-wareer ku riday waagaas culimadii diinta oo warka Sayidka ku sheegayey mid aan waxba ka jirin iyo in aanay iyaga wax colaad ahiba kala dhaxaynin gaalada. Markaas ayuu mariyey gabay dheer oo aan kasoo qaatay intan yar ee uu ku leeyahay:

Niman baa shareecada siroo, gaalka saacidaye
Oo shalay safkii nagaga baxay, saymihii dhacaye
Oo Saarashada Faranjigiyo, saajinka u xilane
Awgii6 Siyaarada lahaa, selel hadduu qaaday
Oo ay sahwiday culimadii, saxal-mariikhowday7
Saxariirka aakhiro hadday sax u ogaan wayday
Saqiir iyo kabiir waxa la geyn, Saqara naareede
Soon iyo salaad iyo sekada, sadaqaddii iidda
Sawaab kama helaayaan waxay, camal samaysteene
Saasna waxa uugu wacan kufriga, Saab8 la leeyahaye

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Saaxiibkaa wuxuu kugu furaa, soohdintuu dego e
Iyaga oon ka saahidin wallee, saamax baan jirine9

Aw: Ninka diinta wax ka barta ee bulshada ugu adeega intaas uu diinta ka yaqaan.
Saxal-mariikhow:
Saab: Erey asalkiisu Ingiriisi yahay oo Soomaali loogu dhawaaqay “sahib” oo la macno ah sayid ama mudane.

Hoga-Tusaalayntii Bulsho ee Sayidka
Sayid Maxamed Cabdillaahi Xasan muddadii dheerayd ee uu dagaallamayey wuxuu la kulmay caqabado fara badan oo aakhirkii u nugleeyey warmihii gumaystaha. Laakiin isagu kama daalin in uu mar walba dadka ugu baaqo inay safka cadowga ka soo baxaan oo jihaadka la xoojiyaan isaga. Maansadan masafada ah wuxuu ku tusaalaynayaa dadkii Soomaaliyeed ee gumaystaha ku hoos jiray oo uu u qaybiyey:
1. Qabiilooyin uu sheegay in aanu jeclayn inuu dhib gaadho oo uu mid walba abaal gaar ahaaneed oo uu ku ammaanayo ku xusay
2. Dad caasi ah oo uu ula jeedo askartii iyo shaqaalihii caamada ahaa ee gumaysiga u adeegayey
3. Culimo xumaatay oo halkii ay umadda ku hoggaamin lahaayeen diinta, ayagii daba-fadhiistay rag dabadhilif u ah gumaystaha
4. Iyo dad maato ah – dumar iyo carruur – oo ay kuwaasi khaldeen.

Mawqifka Sayidka waxa ka muuqata in uu aaminsanaa in ciddii la saf noqota gaalo la dagaallamaysa Muslimiin, ay ayaguna gaaloobayaan, xitaa haddii aanay ayagu afkooda ka qiranin taas. Xitaa haddii ay salaaddii tukanayaan, oo soomayaan oo sekadii bixinayaan. Taasi waa mad-habkii salafka sida ku cad kutubaha qadiimka ah. Laakiin tan iyo waagii Tataarku qabsaday caalamka Islaamka, iyo markii dambe ee gumaystuhu yimid waxa la arkay Muslimiin culimo iyo caammaba leh oo aan arrintaas gaalnimo u arkayn.

Qolo walba wuu hoga-tusaalaynayaa. Marka hore wuxuu ku halqabsanayaa Xaaji Suudi Shabeelle10 oo ahaa afhayeenkii Sayidka, kana mid ahaa aasaasayaashii Daraawiishta ee khusuusiga ahaa. Waxaad mooddaa inuu Sayidku ka waaninayo Xaaji Suudi dagaal lagu qaado beelaha Soomaaliyeed qaarkood. Wuxuu yidhi Sayid Maxamed:

Waar Suudoow dagaalkaba, anigu dooni maayee
Dunjigiisa iidoor, duudsi baan ka yeeloo
Dibindaabyo Habaryoonis, dacwi iima qabanoo
Dagaal Sugulle Caynaashe11, durqunkii ka dhaartoo
Danabbada Ammaan12 dhalay, daawaa naga dhaxaysoo

Suudi Shabeelle: Waa Darwiish kamid ahaa afraaddii aasaastay Daraawiishta. Wuxuu ahaa afhayeenka Daraawiishta ilaa isaga oo ku loogan faltan jihaad ay Ingiriisku dagaal ku dileen sanadkii 1920.
SUGULLE Caynaashe: Waa qolo ka tirsan Habaryoonis oo ah qabiilka suldaamada beeshaas asalka u lahaa.
AMMAAN: Waa Suldaan Xirsi Amma Suldaan Diiriye Sugulle oo ahaa hoggaamiye

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Saldanada Habaryoonis kamid ahaa oo aad u xoog badnaa wakhtigiisii. Waa ninkii lagu tilmaamay gabaygii Ismaaciil Mire ‘Kibirka’ markii uu lahaa, “Kaysaha adduun Ina Ammaan koos dhan buu helaye, kolna kii asraa’ilay ma hadin kama yaabayne, Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado.” Laakiin wakhtigan Sayidku noolaa waxa joogay faracii Xirsi Ammaan.

Dabar hadduu ka baylaho, dubkaa ii xanuunoo
Dembi igama raacoo, daacad weeye saasoo
Darwiishkii Suldaan Nuur13, duudooduu ka beermee
Ciidagale ma daaroo, an danqaabi maayoo
Duubigay callaameen Diiriyaannu14 xididnoo
Markii uunku dabagalay, waa kii doc uga leexdoo
Wax kastoo loogu dawgalay, waataan la daynoo
Dayax weerar jeer hore, rag baa igu dukhuulee15

SULDAAN NUUR: Waa Suldaan Nuur Axmed Suldaan Ammaan Suldaan Diiriye, waa suldaankii beesha Habaryoonis ee waagii Sayidku soo baxay. Wuxuu kamid noqday dadkii ugu horreeyey ee Daraawiishta wax ka dhisay, kana tirsanaa ilaa uu ka dhintay. Waxaa lagu tilmaamaa suldaankii ugu horreeyey ee taageeray fikirkii gumaysi-diidka ahaa ee Sayid Maxamed iyo weliba suldaanka kali ah ee Soomaaliyeed ee halgankii Daraawiishta kamid noqday.
DIIRIYE: Waa Suldaan Diiriye Suldaan Xasan Suldaan Faarax Suldaan Guuleed oo ahaa suldaankii Ciidagale. Wuxuu suldaan ahaa 104 sano. Wuxuu kamid ahaa salaadiintii uu Sayidku ugu baaqay inay ka dhiidhiyaan dadka la gaalaysiinayo oo ay halgankiisa ku taageeraan. Waxanu ku sigtay inuu ku biiro Sayidka haddii aanu Ingiriisku sirtaa heli lahayn.
DAYAX-WEERAR: Waa geelii ugu horreeyey ee ay dhacaan ciidamadii Daraawiishta. Wuxuu ahaa geel ka badan 2000 oo halaad. Waxa laga dhacay beesha Suldaan Diiriye. Ficilladii ka dhacayey ciidamadii Daraawiishta sida in xoolo islaameed la dhaco ama beelo lagu duulo iskuma ay raacsanayn Daraawiishta lafteedu. Taas waxaad ka garan kartaa isla maansadan uu Sayidku kaga cudur-daaranayo dhicistii Dayax-weerar. Waxa kale oo kuu caddaynaya geerarka uu isla geelaa ka tiriyey Shariif Cabdulle Shariif Cumar oo ahaa nin shariif ah oo ka tirsanaa Daraawiishta. Wuxuu yidhi:

Col Ashraafi wacaysiyo
Caalin reero dhacaaya
Cilmi geel lagu qaado
Sayidkii Calmanaayow
Cimri yuu ku simaayoo
Cidhibteeda ogaada?

Dadka Nuux Ismaaciil16, dudmo igama haysoo
Reer Yoonis17 dayr hore, waa tuu diiday gaalkoo
Diigaanyo xoolo ah, waa tii laga dareershoo
Deyn iyo dulsaar badan, waa tii laga duduucee

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Markii Sayidku caddeeyey in aanu duullaan ku ahayn beelahaas uu xusay oo ahaa kuwii ku hoos noolaa gumaysigii Ingiriis, isla markaana uu caddeeyey sida uu beel walba ugu hayo wanaag hore, ayuu ku jeestay

NUUX ISMAACIIL: Waa qolo ku abtirsata beesha Sacad Muuse ee Habar-Awal. Waxay u kala baxaan: Yoonis Nuux, Axmed Nuux iyo Cali Nuux.
YOONIS: Waa Yoonis Nuux Ismaaciil oo ku aroora Sacad Muuse, Habar-Awal.

Darwiishkii ruug caddaaga ahaa ee Xaaji Suudi Shabeelle. Waxa uu Xaajiga hoga-tusaalaynayaa sida uu dagaalku u xun yahay ee dhibaato looga dheefayo. Halkaas waxa uu ku muujinayaa inay dagaalka dantu ku qasbayso ee aanu iskii u jeclayn. Wuxuu yidhi isaga oo sii wata hadalkiisa:

Awgey danafka baas daa, dirdiro ma fiicnee
Nin duqaan ku moodaye, daa'imo miyaad tahay?
Dacwigaan bannaanayn, maxaad uga dan leedahay?
Ina Shixiri18 baa dilay, danyadiyo islaaxoo
Ragguu dahabka dhaafsaday, cadhaa wada digsiisoo
Door buu is moodaye, waase dooro weynee
Ma ku dayatay waadigan, wax duqlaalinaayee
Maxaad uga dan leedahay, duullaanka aad humi.

INA SHIXIRI: Sheekh Cabdillaahi Shixiri wuxuu kamid ahaa aasaasayaashii Daraawiishta, isla markaana ahaa xidhiidhiyihii arrimaha debedda ee Daraawiishta ilaa ay is-khilaafeen Sayid Maxamed oo uu ka goostay. Sababta uu uga baxay Daraawiishta waxaa lagu sheegay ilaa saddex sharrax oo kala duwan oo kala ah:
1. Khilaaf shakhsi ah oo dhex maray isaga iyo Sayidka
2. Sheekhii Saalixiyada ee Maka oo fatwo diidmo ah kasoo saaray Sayidka
3. Iyo in Ingiriisku laaluushay sida ka muuqata masafadan. Alle ayaase xaqiiqda og.

Dawo lagama helayoo, durbaa lagu halaagmiye
Ninna duuli maayoo, cirka uma dafaayee
Waxa dunida joogaba, dukhaan laguma ridayee
Degmo haatan baan, duug laga arkaynoo
Reero duunyo haystaa, caydho dulugle noqonoo
Dagaaggaa wuxuu tegi, dekeddii Cadmeedoo
Wiilal Deeb marsaday buu, waraabuhu duddubinoo
Meyd dogob la moodaa, dugsiyada wadhnaanoo
Wax la dooxo mooyee, dar kalaan jiraynoo
Fardaa dininigtoodaa, dooy looga qixiyoo
Dooyadaa waxay tegi, Adari daafaheedoo
Wixii deeble geelaba, duhur baa la qabanoo
Makhribkaa hadduu dumo, dalaad lagu arrumiyoo
Iyadoo daruur u eg, ama daad masaalkiya

Markii waagu daalaco, derbi waa la kicinoo
Senge duubi weyn baa, hadba dooc ka geliyoo,
Daliilkii Ilaah iyo, dikraa lagu kaxaynoo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Dugul maraqa luli, dabadaa loogu xidhiyoo
Debec lama uleeyee daaqsin bay u soconoo
Kuwii Deero foofsaday, dugaaggaa la siiyoo
Daabbaddiyo hubkoodii, dorraataa la helayoo
Dayayadii horreetaa, rasaas lagu digsiiyoo
Dawanka iyo sowdkaa, diilalyada ka kicinoo
Inay soo digiigixi, dibey lagama yaaboo
Ninkii Days ahaabaa, boqol loo dawariyoo
Waar Daarood19 libtuu helay, dayib iima aha oo

DAAROOD: Waa qabiil macruuf ah oo ka tirsan qabiilooyinka ay ka kooban tahay Soomaalidu. Waxaa la sheegaa in odayga Daarood Ismaaciil ku abtirsado jufadii Nebi Muxammed – naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee – ee reer Banii-Haashim. Haddii arrinkaas la xaqiiqsado, waxay xubnaha qabiilkaasi noqonayaan Aalu-Beytkii Nebiga.

Anigoo dariiqo ah, asagay dulmiyayoo
Raggii daahirka ahaa, isagaa dulleeyoo
Nasaarada direyska leh, asagaygu dirayoo
Markaan diirtay Ferenjiga, ayagey duleedshoo
Maandhow kuu duceeyaye, dabuubtayda maqaloo
Ma duuloow wixii lumay, maanta haw damiin noqon.

Markii Sayidku hoga-tusaaleeyey sida aanu dagaalka u jeclayn una fahansan yahay xumaantiisa, ayuu guda galay waano iyo wax-sheeg ku socda bulshada qaybaheeda kala duwan. Wuxuu ugu horraysiiyey dadka caasiga ah ee aan dhinaca cibaadada u jajabnayn ee nolosha adduunyo uun ka fekera. Wuxuu si gaar ah ugu danleeyahay kuwa gumaystaha u adeega sida askarta iyo adeegayaasha kale. Wuxuu yidhi isaga oo sii wata masafadiisii:

Afartaa daleeyaye, ma daabacay sidaydii
Ma daleeyey maansada, damiin baan aqoonine
Hadal diirsimaad gala, duri waan u odhan jiray
Doodna waxaan u leeyahay, kuwii diinta caasiyey
Waar haddii la kala diday, sida deero iyo cawl
Rabbi nama dufeeyee, Cawar maxawla deristeen?
Eygii doofisha lahaa daaha maxawgu rogateen?
Dumarkii idiin dhaxay dala'20 maxawga yeesheen?
Doofaarkaad qalaysaan, sow kama diqootaan?
Dulligiyo cadaabkii, maxaa kiin isugu daray?
Durriyaddii Ibleys iyo maxaa daaduf idin qoray?
Dariiqii Rasuulkiyo, dawga maxawga baydheen?
Xaqa aan daboolnayn maxaa idinka soo deday?
War sow darajo aakhiro, Rabbi kama damcaysaan?
Xuuralcaynta diibka leh, waar maxaw dalaaqdeen?
Durdurkii Fardowsana, dacni maxawga yeesheen?
Dibjiryadiyo guuraha dafdaf maad u roortaan?
Dacas lalama jiifee, khayrka maw dadaashaan?

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Dala': Wax iska dayacan, lunsan

Waar hoy deeqda Eebbiyo, janno maad ku dirirtaan?
Dakharkiyo dubaaq dacar haddow malayseen
Dumbuq ninkii aan lagu dilin, dan la'aanba waw dhiman
Inkastaad dadaashaan, ma naf baa damcaysaan?
Haddaan dunidu waarayn, miyaa daa'imaysaan?
Duqyaankii Fircoon iyo, aaway daarihii Caad?
Qaaruun dad iyo maal, damug baa la siiyoo
Tacaddiguu Samuud falay, fa damdama ku noqoyoo
Waxa loogu dawgalay, Daaq iyo Gureyoo
Nebi Nuux kuwii duray, duufaan baa la tegayoo
Doonniduu samaystiyo, dooshi buu ka korayoo
Docogaysigii Luud, doogtiisii la aragyoo
Nimankii darribi jiray, Rabbi waw darraadoo
Iyagoon digniin qabin, malaa'ig buu u dirayoo
Dambasyaallo culus baa dusha lagaga ridayoo
Nin kastoo digniin qaba, mar uun baa la dagiyoo
Dooxanaha mawdka ah, diric kama geleysaan
Haddaan been dabaad ahay, aaway dawladdii Iram?
Aaway doorarkiinnii, dal-la-helayda qabi jiray?

Waano iyo wax-sheegga kor ku xusan ee ku wajahan dadka caasiga ah kadib, waxaa uu Sayid Maxamed u jeestay dhinaca culimadii waagaas oo halkii ay kala diriri lahaayeen gumaystayaasha u tafo-xaytay inay xagal-daaciyaan kuwii isu xilqaamay hawshaas. Culimada waxa dushooda saaran ammaano weyn oo xagga diinta ah. Waa inay xaqa caddeeyaan kuna dhaqmaan. Laakiin haddii ay xaqii ku dhaqmi waayaan, caddaynna waayaan, waxay noqonayaan sidii kuwii Alle ku tilmaamay dameero kutub xambaarsan. Fiiri suuratu-Jumuca. Haddii ay diinta sheegisteeda adduun dhaafsadaanna, waxay noqonayaan sidii ninkiii Alle ku metaalay ey haraaryoonaya. Fiiri suuratu-Acraaf. Haddaba Sayidku culimada wuu canaananayaa, wuu la doodayaa, wuu tilmaamayaa, wuu u digayaa, waanu waaninayaa, wuxuuna waydiinaya sababta ay nin lumay oo dabadhilif ah ugu dabo-fayleen ee ay ayaguba u noqon waayeen kuwo aayaha dalkooda u taliya oo aan cidna u dabo-fadhiisan. Wuxuu yidhi:

Afartaa daleeyaye, ma daabacay sidaydii
Ma daleeyey maansada, damiin baan aqoonine
Hadal diirsimaad gala, duri waan u odhan jiray
Doodna waxaan u leeyahay, culimada dafaarka ah
War an idinma doocine, idinkaygu diimayee
Dalkaad iibiseen baa, dacarta igu kiciyayee
Shan haloo idiin daran, dannigiin ka fiirsada
Mar waa inaad dayoowdeen, diirad haddaydun qabateen
Dadka aydun raacdeen, isna waydin diga gubi
Dillaalkii la siiyana, dunna kama helaysaan
Ninkii idin darraabana, ajri iyo ducuu heli
Dibna deeqda Eebbahay, dibno saari maysaan
Diin nimaan lahaynini, dameer caynsan weeyee

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

War maxaa dufulayahow, cadawga ugu daranteen?
Wanka doosha wayn iyo, ma dagadaad21 u xilateen?
Qandiga22 mayska duubtaan, dawarsigu ma fiicnee
Aw-yaaloow ma diiddeen, jahaad maw dareertaan?
Warma danana iyo seef, degta maad ku qaaddaan?
Darmaan haad la qooqdiyo, Doolaab maad u fuushaan?
Wiyilka diir ka qaadka ah bidixda mawgu dadabtaan
Doobiga-xamaalka ah dakarka maad ka goysaan?
Daacufleyda madida ah degdeg maw xabbaadhaan?
Idinkaa dalkaba lehee, dawlad maad u noqotaan
Illeen doqni calaf maleh, dubaax maxaa ka baylahay?
Afartaa daleeyaye, ma daabacay sidaydii

Dago: Seko, sadaqad
Qandi: Kolay, sallad. Waa tii la yidhi, “Wadaad qiil uu ku bannaysto iyo qandi uu ku rito midna ma waayo.”

Ma daleeyey maansada, damiin baan aqoonine
Hadal diirsimaad gala, duri waan u odhan jiray
Doodna waxaan u leeyahay, da’ kastaba ha noqotee
Kuwii diinta qariyow, idinkays dilaayoo
Nin dalkiisii iibsaday, dulli buu ku waariye
Ninkii gaalka dabagala darxumow dambaynoo
Naftu hadday ka duushana, dalku waysu diidiye
Inuu haadku diirdiiri, waa sida daruurtoo
Dubaaxdiisa feedhaha, dab baa lagaga shidiyoo
Hadduu waayo darib cuno, waa laga dambeeyaa
Ninkiise dawga dhaafaya, dawo looma helayee
Digtoonaada weligiin, dunidu waari maysee.

Ugu dambayntii wuxuu Sayidku la talinayaa dadka caamada ah, dumarka iyo carruurta. Wuxuu xasuusinayaa in dadkii hoggaamin lahaa ay lumeen oo meel xun ku hagayaan, inay iskaga hadhaan oo aanay baadinimadaas ku raacin ayuu ku guubaabinayaa. Wuxuu yidhi:

Doodna waxaan u leeyahay, dumarkiyo caruurtoo
Dadkii idinka weynaa, hadday idin dulleeyeen
Dambi kama ay yaabine, cuntay idinka doorteen
Duunyaa la dhaafsaday, dugsigaad galeeyseen
Dameerkuna ma yeeleen, halkay talo ku daysteen
Dab intay shideen bay, dalaq idinku siiyeen
Doox intay qodeen bay, ciid idinku daadsheen
Nin idiin damqanayaa, idinkama dambeeyoo
Haddaydaan digtoonaan, daad bay idin qaadiye
Duleeddada kufaartaa, dacas idinku laynoo
Naf dalkaaga doonaysaa, firaash looma daadshee
Dabkan aan shidaayaa, daawadiina weeyee
Dariiqii Rasuulkiyo, dawga haka baydhina.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

DARDAARANKII SAYIDKA (GABAY)
Halgankii Sayid Maxamed Cabdille Xasan wuxuu ku dhammaaday in loo xoog sheegtay. Cadowgii wuxuu ku guulaystay in uu kala dhexgalo Darawaashtii iyo bulshadii Soomaaliyeed. Ayagii ayaa cadow isu noqday. Culimada badankoodii waxay noqdeen kuwo soo saara fatwooyin lagu wiiqayo awoodda iyo ujeeddada Daraawiishta isla markaana xoojin iyo taageero dadban u ahayd gumaysigii xaaraanta ahaa. Dagaal 20 sano socday ka bacdi waxaa Sayidka jabiyey dayaarado lagu duqeeyey oo ahaa duqayntii cirka ee ugu horraysay ee ka dhacda Afrika23. Gulufkaas Sayidka lagu jabiyey waxaa gacan weyn ka geystay ciidamo Soomaaliyeed oo adeegayaal gumayste ahaa, dhinacna ka beelaysnaa. Soomaali badan ayaa laad ugu sii dartay dilkii Ingiriiska, waa la bililiqaystay, digasho iyo farxadna waa laga dabageeyey.

Daabaca ninkii kugu dhuftee, daabku kuu celiyey
Iyo kii duleedshaay ku yidhi, wax isma doorshaane

Sheegashada ah in dayaaradihii ugu horreeyey ee meel Afrika ah lagu duqeeyey ka dheceen dhulka Soomaalida, wax baa ka jira. Waxaa ka horraysay duqayntii dayaarado loo adeegsado ee ugu horraysay oo Talyaanigu ku weeraray ciidamadii Cismaaniyiinta ee ku sugnaa Liibiya oo dhacday 1911.

Tusaaleyaal yaryar haddaan ka soo qaato digashadaas, waxaa kamid ahaa gabaygii Cali-Dhuux Aadan ee ahaa:

Waa lagu digtaa ruux hadduu kuu darraan jiraye
Bal dayaay wadaadkii wakaa sii dabayshadaye.

Waxa kaloo jiray nin la odhan jiray Ammaan Faarax oo Ogaadeen ahaa oo ku damaashaaday:

Waa tii Bah-Geri looga baxay beled Islaameede
Waa tay belaayo ha gashee belel ka oogeene
Waa tay ka boodeen sharciga baaniyaaladuye
Bagoy baga’e maantaba ka dhimey Maxamad beentiiye
Ka biskooney beladii Taleex iyo basaaskiiye
– Ammaan Faarax

Laakiin dhinaca kale waxaa jiray dad indheer garad ah oo jirtoo ay kasoo horjeedeen Sayidka iyo Daraawiishta, haddana aan ku farxin sidii loo galay. Salaan Carrabay24 ayaa kamid ahaa dadkii laga filayey in uu ku digto, lagana codsaday arrinkaas laakiin ku jawaabay hadal dadnimo ka muuqato. Wuxuu yidhi:

Daaroodka jabay waa Isaaq, dadab ku xeerrayde
Hadday aqalka daahyadu go’aan, daakhilkaa xigiye
Maxaan kaga digtaa ruux la diley, saw ma dabajoogo!

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Gabaygan waxaa kale oo lagu sheegay inuu tiriyey Axmed Aadan Dubbe “Gabay-Xoog” oo ahaa wadaad indheer-garad ah oo xidhiidh sokeeye ka dhaxeeyey Daraawiishta.

Markii Sayidku jabay ee uu limay gaadhay, wuxuu tiriyey gabay dardaaran ah oo uu kaga hadlayo mawqifkii uu ku dagaallamayey, dhibtii ka qabsatay iyo waxa ay gumaystaha ka mudan doonaan dadkii la fahmi waayey ujeeddadii halgankiisa. Gabaygan oo ah mid dheer waxaan kasoo qaadanayaa inta ugu mac ee halkan ku habboon, waxaana dhici karta in ay qaybo badani ka maqan yihiin gabayga. Wuxuu yidhi:

Dubbayaal wixii nagu dhacee, nalagu daaduunshay
Annagu diidi maynoo mar baa, Daayin noo qoraye
Ninkii dunida loo deynayaa, haygu diirsado e
Mar haddaan cid laga daynahayn, mowdka damaqiisa
Ninka haatan soo diganhayow, dan iyo xeeshaada

Dangaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabbaashiisa
Inkastoo daleel nala dhigaan, doocna nagu cayman
Duuflaalladii naga hadhow, dan iyo xeeshiinna
Dagaalkii Nasaarada anaa, daalib ku ahaaye
Dalka ma lihid anigaa ku idhi doora weynaha e
Daliilkii Rasuulkii anaa, doonaayoo helaye
Anaa diiday maantuu lahaa deeqdan iga hooye
Diinkayga anigaan ku gadan dabaqii naareede
Anaan labada daarood tan hore darajo moodayne
Markay duusho gaaladu anaan daabbadow rarine
Goortay dareeraan anaan diiraddow qabane
Anigaan dariiqiyo waddada dawga sii marine
Anigaan dillaalkiyo ardiga duubigaw xidhane
Doofaarka eyga ah anaan, daarihiis galine

Sida doxorka lidoor anaan, duud-xammaal noqone
Daarood Ismaaciil ma oga, dawga loo qodaye
Waa niman daboolmoo qalbiga, daabac kaga yaalle
Waa wixii durbaan tumay markaan dawga sii maraye
Waa wixii dabaaldegay anoo, gaal isoo dilaye
Xadhka-heer u daadsanee haddana, ciidda lagu duugay
Markaan dunida dhaafaa wallee, lagu dabaayaaye
Dadoow maqal dabuubtaan ku odhan ama dan haw yeelan:
Dawo lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane
Dabin buu idiin qoolayaa, waydin dagayaaye
Dirhamkuu idiin quba-hayaad, dib u go’aysaane
Marka hore dabkuu idinka dhigi, dumar sidiisiiye
Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Marka xiga dalkuu idinku odhan, duunyo dhaafsada e
Marka xigana daabaqad ayuu, idin dareensiine
Maxaad igaga digataan berruu siin25 lasoo degiye

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Siin: Waa qalabka war-isgaadhsiinta ama war lalinta qaarkood.

Muxuu Rabay Sayidku?
Sayidku wuxuu rabay inay Soomaalidu ka xorowdo gumaystaha iyo inay helaan dawlad Islaam ah. Wuxuu qabay in hadafkaas lagu gaadho jihaad oo amma la shahiido oo sidaa Alle jannadiisa lagu rajeeyo ama la guulaysto oo dawlad gob ah la helo. Gabayadiisa qaar badan oo kamid ah ayaa arrinkaas muujinaya. Waxaanan kaa xasuusin karaa afarreydan. Wuxuu yidhi:

Haddaan waayey calan lay nashiro26, tan iyo Nayroobi27
Miyaan waayey naamuus janniyo, daalac iyo naasil?
Haddaan waayey Ciidoo28 Naqliyo inan Nugaal daaqo
Miyaan waayey neefaan xarbada, naallo ugu fuulo
Haddaan waayey ruux iga naxoo, ii nasabad sheegta
Miyaan waayey naxariis Alliyo, Nebiga jaahiisa?

Nashiro: Waa erey af-Carabi ah oo macnihiisu yahay fidin, wadhid, kala-bixin.
Nayroobi: Waa caasimadda xilligan ee dalka Keenya. Waxaa la aasaasay waagii isticmaarka, waxaana ugu badnaa dadkii lagu aasaasay Soomaali ciidan u ahayd Ingiriiska.
Ciid: Mar waa ciidda oo dhulka ayaa loola jeedaa, marna waa deegaan gaar ah oo Hawd ka tirsan.

Aragtida aan kor kusoo qeexay waxa dhici karta in aanay ila qabin dad badan oo xilligan nooli. Sidoo kale waxaa xaqiiqo ah in xitaa markii uu noolaa la isku maandhaafsanaa oo Soomaalida badankeedu kaba raaceen gumaysteyaashii. Laakiin si kasta oo dadkii la noolaa u diiddanaayeen ama uga soo horjeedeen, haddana waxay yaqiinsanaayeen inuu ahaa:
– Nin wadaad ah oo caalim ah oo xalaasha iyo xaaraantu u kala soocan yihiin.
– Nin la dagaallamayey gaalo duullaan ah oo gumaysi iyo gaalaysiinba wadday.

Taas waxaa u daliil ah, in markii uu jabay iyo ilaa xorriyaddii laga helayey uu noqday halqabsiga dhammaan Soomaalidii gobannimada u halgamaysay. Faarax Cismaan Kowte wuxuu kasoo jeeday beelihii sida cad uga saftay Daraawiishta, haddana markii ay Daraawiishtu jabtay, waxaa uu qiray inay ahaayeen dad xaq ku taagnaa waxaanu yidhi:

Manaamada Darwiishkii hadduu, diinta marinaayay
Muslinnimada gaariyo ninkii, muuminnimo sheegtay
Mansakheeda boolida ninkii, noo masala qaadey
Makhrib dumey sidii looga dhigey, maqalney eelkiiye.
– Abwaan Faarax Cismaan Kowte

Waxaa iyaduna xasuus mudan maansadii uu tiriyey Axmed Ismaaciil Diiriye (Qaasim) markii xorriyadda loo dabbaaldegayey 1960kii, maansadaas oo ay ka muuqato qiraal ah inuu Sayidku ahaa xaq u-dirir. Wuxuu yidhi Qaasim:

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Allow yaa Darwiishkii farriin debecsan gaadhsiiya
Allow yaa dadkaagii yidhaa dawladnimo qaaday
Allow yaa dabbaaldegiyo farax kala dul geeraara
Fardaha yaa dirkii dhooddi meer doona faracdiisa
Allow yaa darmaan farataqaan duqa u kooreeya
Allow yaa duleeddada Taleex uga dammaashaada
Dhaaxuu ku daakiray xaqoo naga dahsoonaaye
Ha daawado dadkow hiiliyiyoo doogga soob baxaye
Allow yaa dalluuntiyo qabriga dib uga soo saara
In dariiqadi nooshahooy dunida soo gaadhey
Oo uu dabkuu shiday rag kale dogobbo sii saaray
Allow yaa af lama daaliyee daacad ugu sheega!

Haddii ay kuwaasi yihiin qiraallo cadcad oo ah inuu gobonnimo-doon u-dirir ahaa, waxaa iyaguna jira gabayo badan oo qiray in Sayidku ahaa caalin ay u kala soocnaayeen xaqa iyo baadilku. Waxaan tusaale usoo qaadanayaa saddex nin oo geelqaadyo ahaa oo la moodo inay qabeen in geela dhicistiisu xalaal tahay, ama ugu yaraan markii la waaniyey ayey isku difaaceen in aanay xaaraan ahayn geela dhicistiisu. Arrinkaas waxay u daliishadeen in Sayidku geela dhici jiray isaga oo ahaa nin aan laga filayn inuu wax xaaraan ah sameeyo. Raggaa mid ahaani waa Cali Dhuux oo Sayidka wakhtigiisii noolaa, mucaaridna ku ahaa. Midna waa Cabdi-Gahayr oo laga yaabo inuu soo gaadhay Sayidka oo xitaa ku gabyey inuu joogay goobtii Jidbaale29, ninka kalena waa Faarax Laanjeer oo isagu waxoogaa ka dambeeyey xorriyaddiina in badan kasoo gaadhay. Bal u fiirso:

Jidbaale: Waa goob magaceed, goobtaas oo uu ka dhacay dagaal dhex maray Daraawiish oo dhinac ah iyo Ingiriis iyo qabaa'ishii xulafada la ahaa oo dhinac ah. Jab weyn ayaa kasoo gaadhay Daraawiishta, waxaana laga dheehan karaa gabayadii Sayidka sidii uu uga samri waayey raggii meeshaas lagaga laayey. Haddaba tixda Cabdi-Gahayr ku xusay inuu joogay goobtaasi, waxay leedahay sidan:
Weligeyba meel lagu jabaan, jiqilla weynaaye
Dagaalkii Jidbaaleba ninkaa, joogay baan ahaye
Ilaahay i jecelaa muxuu, jirey arwaaxaygu

Sayidkii wadaad oo dhan xidhay, weris xalaaleeye
Xaaraan hadduu yahay maqdaca, Xila ma qaadeene
Xoolaha kaleetiyo isagu, waaba kala xeere
Nin kastoo xadreeyaaba wuu, u xusul-duubaaye
Haddaan xaajiyadu weerareyn, xer uma duuleene30
– Cali Dhuux

Sonkor uga macaan reerkayaga, soofla xoogsadaye
Waxba ay sasabin awgayoow, sidigi waa aade
Sayidkuba naruuree haddaad, sadar taqaanniine
Haddaanad seeddigay aabbo noqon, saxar ma qaaddeene
Sii soco wadaadyahow intaan, sumuc ku naafaynin.
– Cabdi-Gahayr

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Xasan iyo Xuseen baa ogaa xeer u leeyahaye
Xulafooyinkii horeba way, kala xabbaadheene
Xinkii Dheeha lagu gawracaan, xiisaddii hadhine
Seyidkii Xadeed iyo ku furay xarun Daraawiishta

Xer: Waa culimo gaar ugu baxday barashada iyo baridda diinta. Halkan waxa loola jeedaa beesha Leelkase oo magacaas lagu naanayso maadaama ay ahaan jireen dad culimo u badan. Cali-Dhuux ayaa geel kasoo dhacay beeshaas, markii arrinkaas lagu canaantay ee laga wacdiyeyna wuxuu isku difaacay gabaygaas. Waxaa ka muuqata gabayga in Cali-Dhuux yaqiinsanaa sheekhnimada Sayid Maxamed laakiin wuxuu ku diiddanaa wax kale. Ismaaciil Mire waa tuu ku lahaa Cali-Dhuux:

Markii aan Daraawiish jirneed nagu dabraynaysay
Nama duufsan Shiikh Maxamedkii duubka noo xidhaye
Annagaaba diintiyo sharciga daalib ku ahayne.

Cabdi-Gaheyr wuxuu ahaa nin ku caan-baxay geel-qaadnimo iyo goolaaftan dirireed. Waxaa la sheegay inuu geel soo dhacay. Geelii waxaa ka daba yimid oo kasoo ergeeyey nin wadaad ahaa oo ay Cabdi aabbihiina xidid ahaayeen. Markaas ayuu gabaygan ugu jawaabay.

Ee Xodayo geeyn jirey intuu, xamar u heenseeyo
Xaafidal Quraan buu ahaa, soo xajiyey dhawre
Isagaba xaq iyo baadil waw kala xarriiqnaaye
Xaaraan hadduu yahay sengaha kuma xarraaseene.
– Faarax Laanjeer

Haddaba ayada oo Alle xaqiiqda ogyahay, waxaan leeyahay Sayidka iyo Daraawiishtu may ahayn qaar ka caaggan danbiyo iyo khaladaad. Weliba waxaa laga filan karaa qaladaad waaweyn, marka la tixgeliyo duruuftii ay ku sugnaayeen. Hase ahaatee ujeeddadooda iyo is-ursigoodu wuxuu ahaa Islaami, umadnimo iyo waddani. Dadka wax ka sheega Sayidka, ha taageeraan ama ha deedafeeyaane, waxaa ku badan qaar caadifad hadlaya.
Waxa hubaal ah in Sayidku ahaa nin cabqari ah oo ka aragti fogaa dadkii wakhtigiisa joogay isla markaana lahaa himilo aad u sarraysa. Laakiin waxaa iyana hubaal ah in Sayidka iyo Daraawiishtu heli kari waayeen siyaasad habboon oo ay ku kasbadaan umaddoodii ka arradnayd aqoonta iyo maal-adduunyo isla markaana ay kula tartamayeen ummado hankooda, hantidooda iyo hal-aqoontoodu gaadhsiiyeen inay ummado kale raaciyad ka dhigtaan.

Faarax-Laanjeer: Wuxuu ahaa gabyaa caan ah oo geel dhiciddana caad ku ahaa. Mar lagu qabtay geel uu dhacay oo la xidhay ayuu gabaygan isku difaacay.

MURUGTEY LAABTIIYE
Faarax Cismaan Kowte
Dagaalkii reer-Bariga iyo Talyaaniga 1920naadkii.
Gabaygan waxaa tiriyey abwaan lagu magacaabi jiray Faarax Cismaan Kowte oo ku noolaan jiray gobollada badhtamaha iyo bariga Soomaaliya. Taariikhda gabaygu

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

waxay ku beegan tahay 1920naadkii. Waagaasi waa markii gumaystayaasha reer-Yurub ay si buuxda gacanta ugu dhigeen geyiga Soomaaliyeed, kadib markii ay si xun u-jabiyeen dhaqdhaqaaqyadii kala duwanaa ee dagaalka iska-caabbinta ah kala hor-tegay. Waxaa ugu dambeeyey uguna riiq dheeraa dhaqdhaqaaqii Daraawiishta. Jabkii Daraawiishta waxaa loo adeegsaday Soomaali nooc walba lahayd, qabaa'il, siyaasiyiin iyo culimo diineed. Intii dagaalku jiray oo dhan, waxay gumaystayaashu iska dhigayeen nasteexo iyo qaar aan Soomaalida duullaan ku ahayn balse la dagaallamaya "nin waalan" oo "niman waalwaalan wata," taas oo ay ku luggo'een Soomaalida badankoodu, jirtoo looga digay. Balse markii Daraawiishtu jabtay, waxaa Soomaalida ku bilaabmay gumaysigii dhabta ahaa iyo cabiidin aan hore loo arag. Dadkii oo is-nacay intii dagaalkii Daraawiishtu socday oo aan isu gurman karin ayaa ninba meel laga helay. "Hubka dhiga," ayaa la faray Soomaali oo dhan. Ciddii ka dhego adaygtayna madaxa ayaa la jebiyey. Haddaba dadkii isku dayey inay iska caabbiyaan gumaysiga Talyaaniga waxaa kamid ahaa beelihii uu xukumi jiray Boqor Cismaan ee Bariga Soomaaliya. Markaa gabaygani wuxuu ku saabsan yahay dagaalkaas dhex-maray reer-Bari iyo Talyaaniga. Waxaanad ka dhadhansan kartaa xaqiiqooyin mudan in lagu cibaaro qaato. Wuxuu yidhi Faarax Kowte:

Cali Maxamadow gabay murtidi, waan ka maaliyaye
Waan idin masuugaye beryaad, iiga muhateene
Mareer-diidka waxa iigu wacan, maanta saan ahaye
Maantiyo kal hore waa adduun, labadi meeloode
Hadba waxa mur soo oran arliga, xaal la moog yahaye Madoobaadayay xalay miyaan, micida soo-feestey

Middoor caara oo kale miyaan, meel kasta u boodey
Mudkey go'aye midigtaan ka jabay, meel xun iyo seede
Milicda aan fadhiyo iyo waxaan, muhasha reemaayo
Miskiin iyo sidaan ahay magaan, xiirey madixiiye
Mashaqooyinkee soo baxay, murugtey laabtiiye

Gobannimo mid weeyee hadduu, meero xariggeedu
Misbaaxiyo haddey kaa demaan, muunaddiyo nuurku
Gacmo maran mugdaa kuu xigiyo, meel xilliyo hooge
Dawladnimo nimaan maalahayn, laga mid roonaaye
Mulki iyo awood iyo waqii, malaha maamuuse
Mucsir weeye maahnaha adduun, magan haloo yaabo

Masalooyinkaan oran jiraa, malagyo keeneene
Dadka gabal mashxarad buu hayaa, loo malqadin xeere
Maqsuud weeye maantiyo dorraad, dhaantana u mirane
Weli ma oga wuxuu maagan yahay, gaalka yimid meesha

Inuu aniga gaar ii mirtey moodayaan weliye
Moodkiyo inuu maalka dhici, run ay maleeyaane
Haddaan hadal murtiyo maamul iyo, marin cad loo yeelin
Miyirkoo ku dhererinin haddaan, odayo loo miirin
Ama muranka baas iyo xumaan, meesha laga saarin
Masalooyin rag maamulahayey murugtay laabtiiye

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Mudda hoose xaajada ninkaan mara-dhiggeed heysan
Wuxuu moodi meeshaan ka kacay maro in loo saari
Oo waa maanka laga siib isagu, soo mir-kacay haatan
Majeerteenka hoosiyo Cismaan, way mitidiyaane
Boqorkii la maamuusayaa maasahaw sida eh
Mid adeygga waxa looga haray mudane weeyaane
Meydkiyo raqdoodii ayay murugtay laabtiiye

Manaamada Darwiishkii hadduu diinta marinaayay
Muslinnimada gaariyo ninkii muuminnimo sheegtay
Mansakheeda boolida ninkii noo masala qaadey
Makhrib dumey sidii looga dhigey maqalney eelkiiye

Ogaadeenka Mowliyo Kilwa iyo, Geri la meeleeye
Ley-marag magaalada Jigjiga, oo Amxaar marine
Mareexaanku meeshuu fadhiyay muuro lagu maagye
Mudug oo la meersadey ayay murugtay laabtiiye
Suldaankii mudnaa iyo la qaad muqaddimiintiiye
Nimankii marsada noo fadhiyay meesha laga waaye
Maraakiib sidii loogu guray, muuqan mahayaane
Goortaan magaalada dayaa, maanku ololaaye
Isaaqii magaalada Berbera, Maakhirkiyo xeebta
Nimankii macaash iyo dallaal, badaha miisaamey
Dadku maqal madluun iyo iney, magan ku joogaane
Sidii loo mashiiqsadey ayey murugtey laabtiiye.

WAA DUNI LA KALA IIBSADAY
Faarax Nuur, 1920naadkii
Gabaygan waxaa tiriyey abwaankii halgamaaga ahaa ee Faarax Nuur oo nolol kusoo gaadhay 1930neeyadii. Wuxuu ahaa hal-abuure aad u xeeldheer, halgamaa, abaanduule iyo hoggaamiye qabiil oo caan ahaa. Dhinaca kale wuxuu ahaa indheer-garad iyo Alle-yaqaan laga dheehanayo suugaantiisa haybad iyo caddaalad. Inkasta oo gabayada qabyaaladda ku saabsan ee Soomaalidu ay yihiin wax laga xishoodo oo dulmi iyo deelqaaf buuxiyey, haddana kuwa Faarax Nuur sidaas uma dhadhamaan. Colaad iyo nabadba wuu ka gabyey. Dhinaca waddaniyadda iyo danta guudna kama uu madhnayn.
Wakhtiga uu Faarax Nuur noolaa wuxuu ahaa waagii gumaystayaasha reer-Yurub ku habsadeen geyiga Soomaaliyeed. Sida lagu yaqaan dadka indheer garadka ah, wuxuu Faarax meel fog ka garanayey ujeeddooyinka gurracanaa ee gumaystaha iyo cawaaqib xumada ay ku reebi karayeen umadda Soomaaliyeed. Dhinaca kale waxaa uu arkayey dad maangaab ah iyo kuwo dhuuni- qaateyaal ah oo u dan-qumminayey ma-naxeyaasha shisheeye. Markaa waxaa uu tiriyey gabaygan la magac baxay “Waa duni la kala iibsadoon, nala ogaysiin.” Wuxuu kashifayaa danaha gurracan ee gumaystaha, waxanu waano u jeedinayaa dadka dhuuni yar dartii cadowga ugu dan-qumminaya. Waxaad mooddaa in gabyaagu si gaar ah uga hadlayo markii Ingiriisku soo degayey dooxada Herer oo ahayd meeshii saldhigga u ahayd abwaanka. Wuxuu yidhi Faarax Nuur:

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Ingiriis Axmaariyo Talyaani, wey akeekimiye33
Arligaa la kala boobayaa, nin u itaal roone
Anse ila ah aakhiru sabaan, iligyadiisiiye

Orgigaa riyaha taadaxoo34, oodda faaliga35 e
Waa duni hablihii loo ogaa, aqalka diideene
Anse ila ah aakhiru sabaan, iligyadiisiiye

Waa duni la kala iibsadoon, nala ogeysiine
Waa duni akhyaartii go'dayoo, aaran soo hadhaye
Waa duni ninkaad aamintaa, kuu abees yahaye
Anse ila ah aakhiro sabaan, iligyadiisiiye

Waa duni xaqii la arkayaa, la arjumayaaye
Waa duni akhyaartii lahayd, iib ku doon tahaye
Anse ila ah aakhiro sabaan, iligyadiisiiye

Afka iyo adduunkaa hadloo, aasan sadarkiiye
Ninka gacanta midig oodan tahay, laga ilroonaaye
Anse ila ah Aakhiro Sabaan, iligyadiisiiye

Nimanyahow bal daya xaajada, lala aguugaayo
Odayaashan loo yeedhay ee, la anfac siinaayo
Asaxaabihii bayna yidhi, gaal ha aaminine
Haddaad niman Islaamiyo tihiin, Aadan faraciisa
Oo aydaan llaahay ka go'in, hayna oodina'e
Hadduu awrka dooxada ku furo, eel kalaa xigiye
Inaga daaya yaynaan ku dhicin, bahal afkiisiiye

Akeekamid, akeekan, akeekami: Muran
Taadax: Waa ogeynta riyaha
Faalig: Kala kaxeeya.

HABAAR TALYAANI
Guuleed Jucfe Warsame, 1920nadii
Geerarkan waxaa tiriyey Guuleed Jucfe oo ku noolaan jiray gobolka haddeer loo yaqaan Gedo. Waa geeraar lagu habaarayo gumaystihii Talyaaniga oo si aan la xammili karin ula dhaqmay Soomaalidii xornimada ku dhalatay. Xilligu wuxuu ku beegan yahay 1920neeyadii. Waxaa la yidhi markii gobollada Jubbooyinka Ingiriisku ku wareejiyey Talyaaniga, ayuu Talyaanigu bilaabay inuu geelashii ka xareeyo dadkii xoolo dhaqatada ahaa isaga oo kusoo rogay amarro aan la qaadan karin. Geeluna wuxuu ahaan jiray nolosha dadka Soomaaliyeed ee ay ku dhintaan. Waxaaba hore loo yidhi: Soomaalidu saddex ayey aaminsan tahay, diinta Islaamka, qabiilka iyo geela. Waxaa la isku deyey in Talyaaniga lagala xaajoodo amarradiisa la xidhiidha geela, laakiin arrinkii wuu garowsan waayey. Markaas ayey dadkii habaar miciinsadeen. Guuleed Jucfe oo gabyaa ahaa ayaa laga codsaday inuu Talyaaniga habaaro. Arrinkii ayuu yeelay Ilaahayna waa uu ka aqbalay. Horta taliyihii kadeednaa markiiba xilkii waa laga qaaday, 15 sano kadibna waxaa Talyaanigii

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

cagta mariyey dawladdii Ingiriiska oo dalkii oo dhanba ka qabsatay.
Maalintii dad la uumayoo
Nebi Aadan dushiisa
Loo ekaaday quraajo
Ilaahii asmaceenna
Ashahaado ka yeelay
Abaal baan la gudayne
Asxaan waan ka qabnaa

Ayaantii ka dambaysayoo
Ay Qorayshtu irdhowdayoo
Odayaasha la laayayoo
Dulqaffaar la afaystay
Ilaahuu Nuurre ugdoone
Umaddii naga yeelay
Abaal baan la gudayne
Asxaan waan ka qabnaa

Ilaahii afar naasiyo
Ibyar oo ka daloosha
Abeer nooga caddeeyayoo
Amarkiisa ku yeelay
Abaal baan la gudayne
Asxaan waan ka qabnaa

Ilaahii sawjad islaamahoo
Aadmi nooga sokaynin
Aqid noogu xarriiqayoo
Dabadeed ilmihii iyo
Ubadkii naga siiyey
Abaal baan la gudayne
Asxaan waan ka qabnaa

Ilaahii axad roori
Ka abuuray candhuufooo
Dabadeed indhihii iyo
Afka noo kala qaadayoo
Addin xoogle na siiyey
Abaal baan la gudayne
Asxaan waan ka qabnaa

Ilaahii ajasheenna
Indhaheenna ka duugayee
Aleen koora u yeelin
Iimaan nooma sugmeene
Abaal baan la gudayne
Asxaan waan ka qabnaa

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Gabayse waa afku leeble
Wadaad waa akhriskiisa
Gobi waa ta ergeysa
Ilaahii cirka uumayoo
Dhulka hoos ka aslaaxshayow
Ilaahaan amarkiisa
Aadmi diidi karaynoow
Ilaahow nin uraayoo
Nebi Aadan ka leexaan
Arrinkii isu keennay
Ilaahow Ingiriisiyo
Amxaartii Shawa joogtiyo
Suldaankuun ka adeejiyoo
Udubkiisa la siibo
Rag armaatiga qaatow
Naxariis il ha saarin
Eydii baando ahaydiyo
Guglahow ka idlaada
Iqiidka iyo bandaaskow
Ibleys haydin dhammeeyo
Afnaqa iyo bowgow
Asmo beerka ku goysay
Siinka meel walba aadow
Idil haw dhaqdhaqaaqin
Baabuurkay ordiyaanow
Omos meelle la jiifso
Markabkii badda aadow
Irjic meel isu taag
Dadkuse waa kala oode
Ninka geela afsaartayoow
Ayaantan aynu joogno
Ayaanteeda kaleeto
Amarkaagu ma gaadho oo
Asma beerka ku goysay.

QOONSADA HALKAA (Xad-Beenaadka)
Muxummed Aw Cabdi Xaashi, 1931
Gabaygan waxaa tiriyey nin la odhan jiray Muxumed Cabdi Aw Xaashi ama Muxumed Aw Cabdi Xaashi. Taariikhdu waa xilli ku beegan 1920naadka dhexdoodii. Waxay ahayd markii la samaynayey waddada xuduudka ah ee kala qaybisa dhulka Soomaalida. Maxamed Cabdi Xaashi wuxuu u arkayey samaynta waddadaas khatar weyn oo kusoo fool leh umadda Soomaaliyeed. Wuxuu dareensanaa inay tahay dhaxal-wareejin. Wuxuu u arkayey dabin loo qoolayo jiilasha dambe oo cawaaqib xumada ka dhalataa ay umadda saamayn xun ku yeelan doonto. Wuxuu aaminsanaa in joojinta xuduuddaas nafta loo huro oo lagu dagaallamo. Laakiin waxaa loo arkayey nin waalan oo ama dad diiddan ama dano gaar ah leh ama balaayo ka talis ah ama xadhig-maran ah ama aan caqli badan lahayn. Isagii ayaa daalac loo raacay. Laakiin wixii u muuqanayey waxay ahaayeen xaqiiq. Waxaa dareemi kara indheer-garadnimadiisa qofkii maanta nool. Bal ila akhriya gabaygan oo ka fekera garaadkii ku jiray ninkaas. Wuxuu yidhi Muxumed Aw Cabdi Xaashi:

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

In dhaweydba waa taan qarsaday, qiimigii gabaye
Waa laygu soo qaadayaa, waan ka qaw dhigaye
Abidkayba goortaan qabtaan, qurux u yeelaaye
Qaafada36 horteediyo shirkaan, qun uga sheegaaye
Bal qiyaasa caawana halkaan, uga qormaynaayo

Qooj37 weeye laba gaal hadday, talo qorsheeyaane
Hindigay qafaasheen beryey, qaran ahaayeene
Qarni malaha Yawguba38 markuu qaatay keenada e
Waa tii Surveys39 uu qabsaysay, qamac dharaareede
Waxa horteen sidaa loo qarribay boqol quruumoode
Qoonsada halkaa waxa ku jira qabar laxaad weyne

Qoto iyo Taleex baa40 la simay, qaydkan seeraha e
Sidii qaalmo booliya dhulkii waa la qaybsadaye
Isba qiil banaysuu u yimi qoortan dooga lehe
Wuxuu kuu qabtaba daaye wuu idin qalaayaa e
Sin qooreedkan lay dhigay waddadan lay qoqobadeeyay
Haddii aw qushuucdeen berruu qaadan waa imane
Qoonsada halkaa waxa ku jira qabar laxaad weyne

Qunsulkaa41 la dhigay ceelka Herer qiil kalaa xigiye

Qaafo: Guurti, waxgarad
QOOF: Khoof, cabsi. Labada gaal wuxuu uga jeedaa gaaladii ku tashaday qaybqaybinta dhulka Soomaalida.
YAW: Dadka cawaanka ah. Wuxuu si gaar ah u tilmaamayaa dadkii cawaanka ahaa ee ku noolaa dhulalka Afrika oo gumaystayaashu si xun u addoonsan jireen.
SUWEYS: Waa marin-biyoodka Suweys ama qoorriga Suweys.
QOTO IYO TALEEX: Waa laba meelood oo kamid ah dhulka Soomaalida, gaar ahaan dhulkii Ingiriisku gumaysanayey ee Soomaalilaan. Qoto waa dhinaca galbeed, Taleexna waa gudaha oo dhinaca koonfureed ah. Wuxuu abwaanku la yaabban yahay sida loo soo qaloociyey waddada markii ay ka timid dhinaca galbeed.

Waxba yaanu ii kala qarradhin qoolashaan dego e
Markuu geed qalloocsamaba waan, sii qandhanayaaye
Qayrkay hadday toban yihiin, qodob ma riixeene
Qanjo uma lahaadeen halkane, qaar ayaa wada e
Qoqobaha dhexdiinaba, mar baysugu qudh beeshaane
Qoonsada halkaa waxa ku jira, qabar laxaad weyne

Jarmalkii qadiimiga ahaa qoon uunbaw baxaye
Isaguba qasaarii la baday, quusay oo sabirye42
Waa wixii qatalay reer-Hindiya quudhsi li'idaase
Idinkuna qab laydiin dhigaa, moodaysaan quruxe
Markaan qawl idhaahdaba anaa, i qabsanaysaane
Waa qasuumo iyo yaab afkaa, qidhim i siiseene
Qoonsada halkaa waxa ku jira, qabar laxaad weyne

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Murtidaa qallooca u rogteen, qaradna43 loo yeelay
Waa qiiro gelinoo dhulkaa, laysu qoonsadaye
Aan ku baro qiyaamada ninyahaw, ninkii qaalin kaga maalay
Qayrkii ka hadhe waxa tihiin qaday habeenkiiye44
Qarqarkaaga mari maysabaa, igu qardoofteene
Qacdaan anigu eegaa indhaha, qarafka duulaaye
Qoonsada halkaa waxa ku jira qabar laxaad weyne

Qoomiyad ninkii garanayaa, ima qilaafeene
Hadii gaalku uu igu qabsado, oo qoorta iga gooyo
Qawl nimaan la laabmaynin, oon qoofin baan ahaye
Dadkiise aan u qaysho islahaa, qaafilnimadooda
Quful baa ku jabanoo ma oga, qoonta igu taalle
Qasaaraha ninkii ogi haduu, qaban lahaa taase
Qumuntani Allaa garan kolkay, qaadan waanada e
Qodaxdaa xanuunkeedu waa, qaamud kuu maqane
Ha qosleene daa waa dhawbuu, qaxar ka joogaaye.

QONSULKAA LA DHIGAY CEELKA HERER: Herer waa magacii asalka ahaa ee magaalada Hargeysa. Waxa gabayga laga fahmayaa in la tiriyey intii aanu maamulkii gumaysiga Ingiriisku u soo wareegin Hargeysa laakiin markaas un la keenay wakiil ama qunsul.
Halkan waxaa uu abwaanku ku xusayaa dagaalkii koowaad ee adduunka iyo sidii xumayd ee loo galay Jarmalka ee hankii iyo isla weynidii Jarmal loo wiiqay. Dabcan dhibtii gaadhay Jarmalka dagaalkii koowaad waxay reebtay gocasho mar labaad dhalisay dagaalkii labaad
QARAD: Ujeeddo, dan qarsoon oo qalloocan.
Halkan waxa ku jirta tusaalayn maahmaaheed iyo sheeko dhaqameed aad u qoto dheer. Waxaa la yidhi: Waxaa jiri jiray nin aad u maskax badan oo had iyo jeer dadka ka badiya xagga tabta iyo xeeladda. Markaa nin laga caqli badnaa ayaa ku yidhi, “Waar ninyahow qiyaamada i bar.” Markaas ayuu ninkii caqliga badnaa ku yidhi, “Waayahaye, horta hashaada ii soo lis.” Markii uu u lisay ayuu yidhi, “Haddaba qiyaamada i bar.” Markaas ayuu ku yidhi, “Dee waanigii ku baray, markii aan hashaada kaa maalay.” Wuxuu abwaanku ugu duurxulayaa, in dadkii waagaas noolaa lagu qiyaamay samayntii xuduudda oo aanay haba yaraatee macneheeda fahansanayn. Taas waxaa laga dareemi karaa markii 1954 la ansixiyey heshiiskii Ingiriiska iyo Xabashida, markaas ayey qaylo-dhaan ku dhufteen kuwii shalayto kasoo horjeeday indheer-garadkii uu ka midka ahaa Muxumed Aw Cabdi Xaashi.

WAAGAAN DHAWAAQAAYEY
Muxumed Aw Cabdi Xaashi, 1939
Gabaygan waxa tiriyey isla abwaankii tiriyey gabaygii xuduudda. Waa Muxumed Aw Cabdi Xaashi. Markan sannado badan ayaa kasoo wareegtay jeexiddii ama samayntii xuduudda. Waxa bilaabmay dagaalkii labaad ee adduunka oo Talyaaniga ayaa qabsaday Itoobiya iyo Soomaalilaan labadaba. Talyaanigu wuxuu watay ciidamo Soomaali ah oo dadkii arkay ay ka tacajubeen. Waxay ahaayeen mooryaan iimaan-la’ oo aan sinaba la isaga caabbin karin. Talyaanigu wuxuu u sheegay in cuntadoodu tahay waxa ay dadkaas shicibka ahi haystaan. Dadkii waa ay gabagabeeyeen. Ingiriisna waddankii waa laga saaray. Markaa dadkii waxay

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

yaqiinsadeen dhibta weyn ee timid. Abwaan Muxumed Cabdi Xaashi oo talo ku caddaatay ayaa gabaygan mariyey, asaga oo ku calaacalaya, haddii wax la iga maqli lahaa markii aan qaylinayey ee aan lahaa waar xuduuddaas aan iska moosno, haddii markaa wax la iga maqli lahaa maanta dhibtani ma dhaceen.

Waagaan dhawaaqaayey een dhego la'ii yeelan
Dharaartii hadday ila gartaan lama dhaqaajeene.
Maantooy dhanaanaatay bay dhabanka haystaane.

Waxa uu abwaanku faalleeyey waxa dadkii dhib gaadhay iyo xitaa Itoobiya sida dhabarka looga jabiyey. Wuxuu yidhi Maxamed Cabdi Aw Xaashi:

Caliyoow adduun lagu dhintoo dheeliyaan ogaye
Ma dhadhamiyo caanaha liska ah, sida dhukaameede
Sidii dhagar aan qabo oo xabsiga, la iga dhawraayo
Dharaar iyo habeen faalladan, dhabanka haystaaye
Dhag markaad tidhaahdaan hurdada, maba dhakoolayne
Ka dhabriiray haasaawahaad, dholonbiyeyseene
Dhalinyaradu hadalkii naxwa ah, dheg uma qaadaane
Nin dhamaaday baa garan lahaa, dhaabadaan odhane
Bal dhagaysta caawaan rakibay, dhidibadiisiiye
Kol haddii dhulkeenii xadkaas, dhereran loo yeelay
Oo moodhikaar lagu dhibtiray, wada dhabbaynaayo
Dhallaan weeye kii haybiyaa, dhaqasho xoolaade
Dhuuryadan dusheenaa garnayl dhacayey saarraaye
Waxa dhanibaalka lala roorayaa, dhinicii Tuureede
Dhalankii Hawiye loo qabtaa, lay dhexmarayaaye
Sidii dhoocil awraan ka baqan, dhaan in lay raro'e
Baandadan45 dhabbada joogsatiyo, qoriga dhawr qaad ah
Inaan dhaxal wareegnaa kuwani, meesha loo dhigaye
Hadday dhiillo meel soo gashoo, khabarka loo dhiibo
Dhan kastaba haddii ay tihiyo, dhulaan la gaadhaynin
Baabuurro dheeraynayaa, lagu dhaqaajaaye
Oo dheehadoodii isweer, lagu dhab siiyaaye
Oo dhiidhi kii lagu tuhmana, lagu dhirbaaxaaye
Dhayal hayga moodina caddaan, dhaarsan baa yimiye
Waa duni ninkii dhumuc lahaa dhaatay oo kacaye
Af-warqeba46 cishaa lagu dhugtamay ciidankuu dhuraye
Is dhootaalintii reer Walliyo47 dhirifki beenowye

Baando: Waa ciidamadii Soomaalida ahaa ee u dagaallamayey Talyaani oo ahaa niman dooxato ah oo calooshooda u shaqaysteyaal ah oo aan waxba kala soocahayn. Mooryaan iska dhe.
Afwarqe: Waa madaxdii Itoobiya ama Eriteriya mid kamid ah.

Wuxuu Xayle48 dhoofka ugu kacay dhuumashuu bidaye
Ka dhaqaaqe daarii Shawiyo49 dheregii fiicnaaye
Waatay dhalaankiyo hureen, ooryaha udhaxaye
Waatii galbeed loo dhuftay, dhamal u yaaceene

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Dhirbaaxadii Talyaaniga ayey, dhego barjoobeene
Annagana dhulkii aan lahayn, dhaafa buu yidhiye
Habaryoonis50 oonbay u dhiman, dhibica dayreede
Geediga Caleenweyn51 ku dhacay, dhaafi kari waaye
Kuwii harada dhalandhoobin jiray, dhamacda jiilaalka
Ayey gaaladii dhiifatooy, Siraw la dhaaftaaye
Caynaashihii52 dhiirranaa, dhacarti loo diidye
Reer Sugulle53 dhaantada Digweyn54, kagama dheelmaane
Dhalooshii farcaamood55 xeryaha, uma dhameeyaane
Dhiilaha karuurka ah martida, looma soo dhigo'e
Dhegcaddii madheedhkiyo la waa, dhuubkii geedaha'e
Reer Daahir56 beel kama dhisaan, dhinacii beereede

Wallo: Waa gobol kamid ah Itoobiya oo ay degaan Amxaaradu, weliba kuwoodii boqorrada ahaa. Waxaa ka muuqda inay ahaayeen dad isla weyn.
Xayle: Waa Xayle Salaase oo markii Talyaanigu dalka qabsaday u qaxay xaggaas iyo Ingiriiska.
Shawa: Waa gobolka barwaaqada ah ee ay ku taal magaalada Arda- Sababa
Habaryoonis: Waa qabiil guud oo macruuf ah, waxayna ugu badan yihiin dhulka Soomaali Galbeed iyo Soomaalilaan.
Caleenweyn: Meel magaceed.
Caynaashe: Waa reer-Caynaashe oo ah qolo ka tirsan Habaryoonis.
Reer-Sugulle: Waa qolo ka tirsan reer-Caynaashe, Habaryoonis.
Dig: Waa harooyin ku yaalla dhulka Soomaali Galbeed.
Farcaano: Waa deegaan ka tirsan dhulka Soomaali Galbeed.
Reer-Daahir: Waa qolo kamid ah beelaha Habarjeco, Maxamed-Abokor.

Dhudhubo57 iyo buuhoodlayaal58, laga dhawaateeye
Dhulbahantii59 fallaagada ahaa, waa la dhaawacaye
Halkuu nugulku dhacadiiday iyo Dhooddi60 laga qaadye
Aduunyadan ninkii aan ka dhiman dhaygag baa diliye
Kolka Dhool da'aa Ciidagale61 kor u dhaguugaaye
Iyadoo Dhegows62 iyo Burcada dhaayin lagu foofshay
Ma dhambalo Qolkii63 gaanihii dhogorta xiisnaaye
Dhaameel tolkay wuxu ku furay dhabarkan Tuur weyne64
Imakay nirgihii dhaadhyi jiray badi u dhuubteene
Hadba waxaan ka dheelimanayaa dhabarka raaxayse
Dhegxumada ku noolow waxaa dhaanta geerida'e
Waagaan dhawaaqaayey een dhego la'ii yeelan
Dharaartii hadday ila gartaan lama dhaqaajeene
Maantooy dhanaanaatay bay dhabanka haystaane
Dhammaantiin Soomaalaay hadday, dholo'di joogtaaye
In Qiyaamihii soo dhawyahoon, dhegiba noolaanin
Iyo gaalka inaan dhoofinoo, dhidibka loo saaro
Labadaas mid uumbay u dhici dhaaxa lala yaabye

Dhudhubo: Meel kamid ah Togdheer.
Buuhoodle: Meel ka mid ah Togdheer.
Dhulbahante: Waa qabiil macruuf ah oo ku aroora Harti Daarood.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Dhooddi: Deegaan kamid ah carro Dhulbahante.
Ciidagale: Waa qabiil macruuf ah oo ku aroora Garxajis Sheekh Isaxaaq.
Dhagoys: Waa meel magaceed oo ku taal Soomaali Galbeed.
Qol: Qoolasha, sida qoolcaday, qoolbuulalle iyo wixi la mida.
Tuur: Waa deegaan Hargeysa ka xiga koonfur bari oo galool badan.

DALKAYAGA ILAAH KAA KEXEE
Talyaani, 1940
Cali Faarax Jaamac “Cali-Tuur”, 65
Gabaygan soo socdaa waa habaar dusha lagaga tuuray Talyaaniga markii uu qabsaday Soomaalilaan. Waxaa tiriyey Cali Faarax Jaamac oo ku magac-dheeraa Cali-Tuur oo reer-Berbera ahaa. Cali-Tuur wuxuu khaati iska taagay tacaddigii iyo dhaqan-xumadii Talyaaniga oo baro-dheeraatay tii Ingiriiskii meesha laga qabsaday. Talyaanigu waxa uu qabsaday Soomaalilaan bishii Agosto 1940, waxanu haystay bilo gadeed, kurbo iyo karkabo xad-dhaaf ah ay shacabkii Soomaaliyeed muteen. Suugaan badan oo dhako-faar muujinaysa ayaa arrinkaas lagu cabbiray, waxaana kamid ah gabaygan habaarka ah ee uu tiriyey Cali-Tuur. Habaarkii abwaanku wuxuu u rumoobay sidii uu Alle uga beryey. Wuxuu yidhi:

Talyanoow sidii duur belbelay, dab isu kaa dhaafye
Degelladu ku wada naaqusoo, dugum lagaa yeelye
Dekedaha wax kugu qayliyaa, kaaga soo dego ee
Duufaan Ilaahay ku geli, sida dabayleede
Deegaanta seeg oo gugaa, da’ay ha noolaanin

Gabaygan sida ay dad looga qaateen ahi ii xaqiijiyeen waxaa tiriyey Cali-Tuur oo reer-Berbera ahaa. Waxase jirta in mudane Idaajaa ku sheegay nin uu ku magacaabay Axmed Maxamed, mar uu idaacadda Codka Mareykanka (VOA) ka hadlayey. Abwaan Axmed Aw Geeddi ayaa kamid ah dadka arrinkaas gaashaanka u daruuray.

Sidii adhi wadeeco u dib jiray, Weerku dabayaacye
Dawgaad martaba kaaga yimid, danab ku xooraaye
Mayl soo dabbaashaa ku qabay, oo waaga soo degaye
Dusha kaaga soo dhace xabbado, sheedi soo diraye
Durriyaadka66 sheekhaannu67 nahay, laga ducaystaaye
Raggii dunida soo wada derderay, kugu dammaashaadye
Dayuuraduhu kaa joogsade, oo dawlad waa noqo ee
Dalkayaga Ilaah kaa kexee, duhur dharaareede
Dibna hawgu soo noqonin, waa kama dambaystiiye

Durriyaad: Waa durriyad oo wadar ah, ubad, farac. Halkan ammaan ahaan ayey ugu jirtaa.
Sheekha: Waa Sheekh Isaxaaq

MAR KU ROGA
Cabdi-Dhukane
Gabaygan waxaa tiriyay Cabdi Xirsi “Cabdi-Dhukane” oo ku noolaan jiray Berbera

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

xilligii gumeystaha Ingiriisku dalka haystay. Waxay ahayd xilli uu halganka xornimo-doonku si balaadhan uga socday Berbera, oo uu Suldaan Cali Kooshin oo ahaa Suldaankii Ciise Muuse ku baaqay in la mamnooco adeegsiga sharciyada Ingiriiska. Sababtu waxay ahayd, in markii hore dadka ay kala xukumi jireen qaaddiyo wax ku kala xukumi jiray shareecada. Markaas ayuu Ingiriisku soo rogay in sharcigiisa lagu dhaqmo. Taas ayaa keentay qaaddacaad iyo iska hor imaad.
Haddaba gabaygani waa dhambaal uu Cabdi-Dhukane u dhiibayo nin la odhan jiray Cabdillaahi-Cawar oo ku socda reer-Hargeysa, oo uu hal-abuurku ku guubaabinayo inay halganka taageeraan. Wuxuu dareensiinayaa in laga macaashayo keeno-diidnimada oo aan lagu khasaaray. Wuxuu yidhi Cabdi-Dhukane:

Haddii aad masaladaan ku faro, maanta iga geyso
Cabdillaahiyoow kuma makalo, mawdku waayadane
Masiibada gudaysiyo fakhriga, maro lagaa saarye
Maqaamkii Saleebaan68 ka gaadh, maalka xoolaha'e
Marka muranka xooggali dhacee, xaqiyo miisaanka
La mushaax macaaneey jannada, Maxamadkeenniiye
Dhulkana haatan murugaa jirtee, mahad ku nooloowe
Marka aad majliskii tagtiyo, meesha lagu jaado
Dhallinyaradu waxay kaa milshiyi, moosinkii gabaye
Sida nimanka muurqanida loo, wada maryaamaaya
Meeqaami luuqdana habluu, haw mashxaradeene
Muslinnimadu qaali bay ahayd, maanta ka horoowe
Niman baa mahoobiyay dhulkoo, maal ku iibsadaye
Minhaajkii Kitaabkiyo sharciga, meeri qaaddiguye
Muqniqiyo Bukhaariga la saar, miiska gaaladuye
Makhribkiyo Cishaa'iga hadduu, maranti wiil keeno
Madbacaadda dhiiseeyadaa, loogu mehershaaye
Maqbuul kuma dhicine sawjadii, way maxlalanyiine
Waa maytinloow caaqilkii, madaxa weynaaye
Marsaday kasoo degi jireen, wiilalbaw mudhaye
Masaar buu u buuxshaa ninkuu, maalintaa dagiye
Ninkuu dheregga maytaamiyaba, wuu kasoo magiye
Iyagaba musbaarrada la tumay, way ku maqanyiine
Waa meherad uu jecelyahoo, maya kafaysaaye
Haddii aan la isaga mid noqon, maylinkii durugye
Mihin bixi Suldaanoow raggii, moodka hayn jiraye
Marku madaxa dhoobada la galay, waa la miinsadaye
Haddii Ciise Muusaha69 majnuun, lagu malaynaayo
Waa muusannaw xaajadaa, nagu maqleyseene
Intaan marantideenniyo hablaha, madaxa loo xiirin
Mar ku roga mareeg-diidka waa, laga macaashaaye

Maqaamkii Saleebaan: Derejadii ama heerkii Nebi Saleebaan – nabadgalyo korkiisa ha ahaatee.
Ciise Muuse: Waa qolo macruuf ah oo ku aroorta qabiilka Habar-Awal ee reer Sheekh Isaxaaq.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

***

MAXAA IIGA GIDHIISH AH

Maxamed Nuur-Laangadhe

Gabaygan waxaa la tiriyey 1943kii oo ahayd markii uu gebagebada ku dhawaa dagaalkii labaad ee dunida. Gumaystihii Ingiriiska waxaa muhiim u ahaa sumcadda iyo magac-wanaagga. Wuxuu dagaallo lagu hoobto u geli jiray si ay uga haybadeystaan umadaha uu gumaystaa. Soomaalida dhexdeeda haddii uu ka maqlo cid ka faafisay wax sumcad dil ah, wuxuu kula kici jiray xadhig, dagaal ama inuu abaabulo wax buriya ceebta laga sheegay. Tusaaleyaal badan ayaa lasoo qaadan karaa. Waxaaba ah mid ah oo aan la illoobi karin wixii Cabdi-Gahayr ka raacay gabaygii Qoorriga Suweys ee uu xaaskiisa ugu caqli-celinayey. Dhinaca kale si weyn ayuu uga faa'iidaysan jiray dadka aftahanka ah iyo kuwa magaca ama meeqaanka leh si ay u hormariyaan ujeeddooyinkiisa oo sumcad-dhisku kamid yahay. Abwaannada Soomaaliyeed wuxuu ku dhiirrigelin jiray maal iyo maamuusba si ay isaga u ammaanaan, cadowgiisana u sumcad dilaan. Taasi marar badan ayey u hirgashay. Laakiin markii ay soo gaadhay abwaanka kor ku xusan, waa ay dhicisowday kaartadii Ingiriisku. Ingiriisku wuxuu ka codsaday abwaanka iyo abwaanno kaleba inay ka gabyaan guulihii ay Ingiriiska iyo xulafadiisu kasoo hooyeen dagaalkii labaad ee adduunka, ayaga oo guulihii Ingiriiska iyo jabkii Jarmalka ku qoraya far waaweyn dabcan.

Abwaannada waxaa loogu abaal-gudayey go'yaal baahi weyn loo qabay berigaas, maadaama adduunka bad xidhan ka dhacay.

Abwaan Maxamed Nuur-Laangadhe oo ahaa nin waddani ah oo iimaan qaba, arrintaasi way cuntami wayday. Waxaanu go'aansaday inuu madasha ka gabyo laakiin gabaygiisu noqdo mid ku liddi ah wixii laga rabay, isla markaana ka turjumaya iimaankiisa iyo aragtidiisa dhabta ah. Idaacadda Raadiyow Hargeysa oo markaas cusbayd, wax kastana si toos ah ayaa looga sii deyn jiray. Markaas ayuu soo fadhiistay abwaanku. Wuxuu ka hadlayo lama sii ogeyn waxaase la filayey ammaantii guusha Ingiriiska. Wuxuu yidhi:

Mar haddaan gurigayga
gidhligaanka* gariiriyo
Garnayl* loola tagayni
Iglan* baa gubanaysa
Maxaa iiga gidhiisha

Gudaha ceelka Hargeysa*
Weligay gees uma dhaafin e
Bal maxaan laba gaal oo
Abtirsiimo gudboon
Midkood guusha u siin
Midna aan u gumeyn
Maxaa iiga gidhiisha?

Gudaha ceelka Hargeysa
Waligay gees uma dhaafin e
Inta aan wax gasiintiyo
Intaan gaajo ku seexday
Hadii aan isu geeyo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Mala waa isku gow e
Maxaa iiga gidhiish ah?

Mar haddaan ka gabyay
Go'aygiina ka qaatay
Maxaa iiga gidhiisha?

*Gildhigaan: bunduq ama qori ka mid ahaa hubkii waagaas la isticmaali jiray
*Garnayl: waa hub gacanta laga tuuro oo qarax weyn, qasaare badanna dhalin kara.
*Iglan: dalka Ingiriiska
*Hargeysa: Magaalo madaxda Somaliland, isla markaana ah magaalada labaad ee ugu weyn uguna dadka badan magaalooyinka Soomaalidu degto, qarnigan. Waxa hore loo odhan jiray Herer.

RAQDII SHEEKH BASHIIR
Xaaji Aadan Afqallooc, 1948
Gabaygan waxaa tiriyey Alle ha u-naxariistee Xaaji Aadan Axmed Xasan oo ku magac-dheeraa Xaaji Aadan Afqallooc. Xaajigu wuxuu ahaa halgamaa, aqoonyahan, caalin diimeed iyo gabyaa. Ilaahay waxaa uu ku mannaystay cimri dheer. Dawladdii Cismaaniyiinta ayuu xilal kasoo qabtay, gaar ahaan faraceedii Yemen. Dawladda Cismaaniyiintuna waxay burburtay 1924. Wuxuu meelo badan kula soo diriray gumaysigii Ingiriiska, gaar ahaan Falastiin iyo Suudaan. Asaga oo nin weyn ah ayuu dalka dib ugu soo laabtay. Markaa wuxuu bilaabay olole wacyi-gelin ah oo ka dhan ah gumaystayaasha ku habsaday geyiga Soomaaliyeed, gaar ahaan Ingiriiska. Haddaba xaajiga oo aan ka yarayn 80 jir wuxuu usoo taagnaa dilkii Sheekh Bashiir loo geystay iyo sidii arxan darrada ahaa ee Ingiriisku ula dhaqmay iyo sidii damiir la'aanta ahaa ee dadkii Soomaaliyeed uga dhiidhiyi waayeen. Markaa waxaa uu tiriyey gabaygan la magac-baxay Raqdii Sheekh Bashiir. Wuxuu yidhi Xaaji Aadan:

Duhur baa Bashiir* lagu shannaqay*, daar agtiina ahe,
Damal* la hadh galaabay jabsheen waqay* dulloobaane
Dahriga iyo laabtay rasaas, kaga daloolsheene
Isaga oo dem* iyo dhiig leh, oo maro ku duu-duuban,
Dadkii uu nebcaa iyo kufri baa, daawasho u yimide
Dacsad* iyo ihaaniyo cag baa, loogu sii daraye.
Meydkiisa daahiran markii, debedda loo jiiday,
Ee aaska loo diiday, waa wada dul joogteene.
Ma damqane jidhkiinii markaa, waa ku digateene
Nasab haddaad durriyaddii* tihiin kama dareerteene
Ma duugoobin Qaybdiid* lafuhu, waanay duxayaane

Duur* looma jabin geesigii, dirirta waallaaye
Wax badan oo ciyaar lagu diliyo, dawgal baa jiraye,
Oo aan deero deero u hirdiyin, sida digaaggiiye
Isaga oo dulmiga aad qabtaan dood ka celinaaya
Da'dii uu ahaa Faarax* baa jeelka loo diraye
Immakuu siduu dayro yahay, debedda meeraaye
Loo diid durriyadduu dhaliyo, duunyaduu dhaqaye

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Gobanimo duqii Cali Bahdoon*, doonisteed dhimaye
Tilifoonna* waakii dawakhay, doorkii uu yimide
Dacwad iyo wuxuu hadal yiqiin, idinka daw waaye
Wax badan baa karbaash lagu dirqiyey, duq iyo wiilkiine
Nin gadhkii camuud loo daroo, dabada loo xayday
Oo ulo dubka iyo jiidhka suga, lagu dalliigaayo
Oo kuman dadkiisii ahaa, daawasho ujoogo
Oo aan la diidine farxaan, lagu dareeraayo
Waa dabac idiin gooniyoon, duulla waafiqine
Afdalleela iyo baad shubtaan, diin la iibsado'e

Bahal cadarku dilayaa jiroo, digo shifaysaaye
Idinkana daliilkiyo wacdigu, waydin didiyaane
Dulli inaad tihiin buu hubsaday, diinta caasiyaye
Dahab buu ku iibshaa dhulkaad, dir u lahaydeene
Hore haddaad u dirirtaan haddaan, nin idin daareene
Doqonnimadiinii horay, darafku haysaaye
Dambarsada haddaa xaabadii, laysu soo degaye
Ummaddaan xorriyad doonan ee, daafac noqon wayda
Dadku inuu addoonsado horaa, loogu daabacaye
Dabka naarta fulahaa wax gala, ugu dambaab weyne
Dunjiga Aadan ubadkuu dhalaad, ugu dambaysane
Wixii aad ku dacafteen, qalbigu saw iskama daayo
Dib maxaa idiin celinayoo, hore idiin diiday
Mar uun maad ku dayataan khalqiga, libinta doonaaya
Dabka qaaday sharaqii* wax badan, daamishka* ahaaye
Turki inuu Bulgaariya daguu, duunka ku hayaaye
Dardaniil* ka xidhey Ruushankay, deris ahaayeene
Wax badan buu dariiq inu ka helo, doonay Malatoofe*
Ka duuduubey Faransiis, dhulkii Suuriyuu degaye
Dergedihii Lubnaan iyo ka guur, degelkii Beyruude.
Deeq kama ahaanine bir baa, daanka loo sudhaye

Dejla iyo Furaat Ferenjigii, kama dekeeyaane
Dahraan iyo ka kece ceelashay, wada degmaysteene
Dirir iyo jihaad Maxamed Rida*, uga dambaysiiye
Wuxuu Faysal* taarka ugu diray, daawo iyo jaare
Ingiriis wuxuu damacsanaa reer Hindiya diidye,
Daarihii Bunjaab* iyo ka kace, dahabkii hoos yiile,
Daymada hadeer bay indhuhu, dib u jalleecaane
Damaashaadku waa Maxamed Cali,* loo dabbaal degaye
Masarna waa horaa laga diriyo, dawgii qoorriga e
Iskandariya kama soo degaan, ducuflihii gaale
Dakhiirad iyo saabaan wixii, dirirta loo keenay
Faaruuq* u dacaree inay, dabar ka qaataane
Dadoo idili soo eri ninkii, daallinka ahaaye.
Dayaarado wax lagu soo guriyo, May* wax lagu doono
Daad xoorta oo idil halkaanaa lala damcaayaaye
Dekedaha maraakiib shixnadan, baa ka soo degiye,

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Waa dooyo nimankaa u kacay, Dig iyo Ceeldhaabe
Dable dhagaxa uu doonayaa, waa dusmiyo xeele
Danta iyo qasdigu waa horseed, laga dambeeyaaye
Dabayshiyo ayaxu waa dhunkaal, laysku dagayaaye

Wax daliil ah maabkuu* diruu, soo duwaay yidhiye
Dawlaabta* boqol fayl ka badan, daafta waxa yaalle
Inay duuddu dacar yeelatuu, doonayoo helaye
Wax dawanan dariiqiyo halkay, Debec* ku fooftaaye
Daliig cawsa meel aan qornayn, deelka laga waaye
Dacasha* iyo xaynbooradaa*, buug ku daabacane
Dabin baa sitaar looga dhigay, man* iyo doomaare*
Daaqiyo biyaha waxa la xidhan, eegga dabadeede
Halka daawad* xeradeedu tahay, gaaladaa degiye
Dad-guuraagu goortuu madhaa, dabar-go'aysaane
Nin dayuurad iyo moodhar laa, beer idiin dirane
Durgufkiina soo hadhay, waxaan doonayuu garane.

Wax badan baan damiin dhega la'aa, daasaddaw tumaye
Amba nimay indhuhu ay damyiin, day waxaa idhiye
Caammiye nin daadihinayuu, diidayaan ahaye
Dab-baan mooday gaaraabidhaan*, dayrnadii hore'e

Dacar iyo Unuun baan macaan, ugu dudaayaaye
Doofaar ilkihii baan u filay, Dur iyo Yaaquude
Dambas iyo ramaad baan intaa, naar ka deyayaaye

Dawliilka waxad shaabahdaan, dad iyo iinsaane
Balse waxaydun daawa u tihiin, habar dugaagiiye
Hadba kii idiin soo digaa, dabin u qooshaane
Dafdafiyo kulayl waxan la imid, dacastay laabtiiye
Idinkiyo dinnaduhuba horaw, damac xumaateene
Midna darajo kuma haysataan, labada daaroode

Gobanimo dalleel lagama helo, daar adoo gala'e
Haddaad doono leedahay naftaa, diiq la geliyaaye
Waa mur iyo deebaaq waxaad, dib ugu aydaane
Marse haddaan waxaan doonayiyo, dawladnimo waayey
Dantay weeye inan aamusaa, eegga dabadeede
Dulligaa ku jira noloshu waa, idinku deelqaafe.

*BASHIIR: Waa Sheekh Bashiir Yuusuf. Wuxuu ahaa Sheekh geesi ah oo cilmiga diinta fahmay. Wuxuu ka dhiidhiyey gumaysigii shisheeyuhu ku hayey umadda Soomaaliyeed. Waxaase garabkiis ka baxay kuwii u hiilin lahaa. Xitaa culimadii ayaa la fahmi wayday oo u arkay in isku maqiiqaya wax aan tamar loo hayn, waxaanay u soo jeediyeen in diinka lagu akhriyo oo Alle la baryo uun. Laakiin wuxuu ku tusaaleeyey in aanay kala hadhahayn "ficilka" iyo diinta oo la akhriyaa. Aakhirkii Ingiriisku waxay dileen Sheekh Bashiir 1947, ayaga oo diiday in la aaso. Sheekh

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Bashiir maanta waa la wada yaqaan, waana loo duceeyaa, tafiirtiisiina waxaa lagu xushmeeyaa isaga dartii. Kuwii garabkiisa ka baxayna waa ay dhinteen sidiisa oo kale laakiin ayagu waxay ku abaadeen qashin-qubka taariikhda. Ninkii la odhan jiray Caydiid Lafcanbe oo cabbiray murugada uu ka qaaday dilka Sheekh Bashiir wuxuu yidhi:

Rakiig baan noqdaa bari markuu, ruux kasoo galo'e
Halkaad igu ruxaysaan qalbiga, waan kasoo raraye
Nin raqdii Bashiir ogi Togdheer, uma riyaaqeene

*SHANNAQAY: Shannaq waa erey af-Carabi ah oo macnihiisu yahay dil deldelaad ah.
*DAMAL: Waa geedka weyn ee hadhka badan ee lagu nasto hooskiisa
*WAQAY DULLOOBAANE: Ha dulloobeen, Alle ha dulleeyo ee.
*DEM: Waa erey af-Carabi ah oo macnihiisu yahay dhiig.
*DACSAD: Gacanta hoosteeda.
*DURRIYAD: Dad wanaagsan, dadkii kasoo farcamay dadka wanaagsan, Aalu-Beyd
*QAYBDIID: Waa qaybdiid Xirsi Guuleed oo kamid ahaa halgamayaashii hoggaaminayey jihaadkii Sheekh Bashiir. Ingiriiska ayaa dilay.
*DUUR: Waa geed bur ah oo wada ulo ah oo ulihiisa laga sameeyo aloolka iyo wixi la mida.
*FAARAX: Waa Faarax Oomaar.
*CALI BAHDOON: Wuxuu ahaa halgamaa u tafo-xatay gobannimada dadka reer-Jabuuti.
*TILIFOON: Waa Jaamac-Tilifoon oo ahaa nin qurbaawi ah oo u doodi jiray xuquuqda dadka Soomaaliyeed u leeyihiin inay ka xoroobaan gumaysiga.
*SHARAQ: Waa reer-Bari.
*DAAMISH: Degemsan, hurda.
*DARDANIIL: Waa marin-biyood u dhexeeya Ruushka iyo Turkiga.
*MALATOOF: Malatov, waa wasiirkii arrimaha debedda Midowgii Soofiyeeti ee xilligaas.
*MAXAMED RIDAA: Waa boqorkii Eeraan ee wakhtigaas.
*FAYSAL: Waa boqor Faysalkii labad ee Ciraaq.
*BUNJAAB: Waa gobol kamid ah dhulka Hindiya.
*MAXAMED CALI: Waa Maxamed Cali Jina, aasaasihii dalka Baakistaan.
*FAARUUQ:
*MAYL: Waa markabka.
*Maabka la duway waa xuduudda kala qoqobta dhulka Soomaalida, gaar ahaan tan kala qaybisa Soomaali Galbeed iyo Soomaalida kale.
*DAWLAABTA: Khaanad, armaajo, kabadh, meesha lagu xareeyo dhukumentiga ama alaabooyinka kaleba.
*DEBEC: Waa hal magaceed oo loola jeedo geel.
*DACAL: Waa sumad xoolaha lagu calaamadiyo oo ah dhegta oo hoosta laga kala jeexo.
*Xaynbooro: Waa summad geela lagu calaamadiyo oo lagaga dhigo cududa ama garabka.
*Man: Waa ubaxa dhirtu bixiso marka roobku helo kadib.
*Doomaar: Caws.
*Daawad: Waa hal magaceed oo loola jeedo geela oo dhan.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

*Gaaraabidhaan: Waa xasharaad aan dukhsiga ka weynayn oo marka uu habeenkii duulayo, bixiya iftiin big-wac ah.

SULDAD XABASHIYEED (Ma-Hadho)
Xaaji Aadan Afqallooc
Gabaygan waxaa tiriyey Xaaji Aadan Afqallooc oo ahaa sheekh caalim ah, gabyaa xeeldheer, halgamaa iyo waddani aan isaga oo kale la arag. Wuxuu kaga hadlayaa dhaxal-wareeggii Soomaalida kasoo gaadhay dhulkii taariikhiga ahaa ee Soomaali Galbeed. Dhaxal-wareeggaasi wuxuu ahaa marxalado kala duwan. Mar walbana waxaa gumaysiga Xabashida ku ladhnaa Soomaali. Dhaxal-wareeggaas dhulka Soomaalidu, kumuu hirgelin si ciyaar ah ee waxaa wehelinayey dhiig-bax, xasuuq iyo cadaab adduunyo oo loo geystay dadka. Xaaji Aadan wuxuu gabaygan uga danlahaa sugitaanka taariikhdaas xanuunka badan, si ciddii awood u yeelataa ugu xisaabtanto mustaqbalka. Waxyaalaha uu abwaanku xusayo waxaa kamid ah: xasuuqii culimadii Harar, xasuuqii Dhagaxbuur, xasuuqii reer-Ashica, xasuuqii Awaare Afdam iyo xasuuqii Leegada ee Jigjiga. Wuxuu yidhi:

Qarnigii siddeed-iyo-tobnaad, sanac xumaantiisa
Siddeetan iyo dhawr sano, waqtiga saaka laga joogo
Oo uu saancaddii qarab* arliga, sabab la'aan boobay
Oo idinka idin siiyay*, qaar aradka Soomaali

Sodcaalka uu Jermaaniya ku tegey, saaxirkii Menelik*
Afriiqiya* sidii loo dhacaad, sabab ahaydeene
Midow oo dhan waxaad siisateen, sooryo maalin ehe
Sirtaa naga gasheen baa aheyd, sun iyo waabay ee
Sina uma qaddarin midabka iyo, soohdin iyo jaar ee
Gumeystaha dadkaan ula sinneeyn, soo degoo yimide
Wax saayid ah addoonsiga madoow, kugu sameeyaaye
Xaqqana lagama seexdoo nin lihi waw sid tiriyaaye
Kolkay soo martaa buu wuxuu, sugayay doontaaye
Samir iyo Allow maleh sidaad, noola dhaqanteene
Waa ma hadho saanqaadka kora, lala sugaayaaye
Dhiig saafiyaa loogu qoray, saan biciid adage
Duq kastaaba sabiguu dhaluu, saa ogow yidhiye
Gartayadu xuduud kuma sinna iyo, soohdin iyo jaare
Waa saamigaad qaadateen, sabankii Baarliine
Sakarashada iyo quudha iyo dilkuba, saamaxaad malahe
Isticmaarku waa kala sifee, kiinu waa suruqe
Sahyuuniga iyo Suud Afrika*, iyo saaqidka Ismiidh ah

Saddexdoo israacay baan faleen, waxaad samayseene
Seeddi iyo abti iyo waalidiyo, sowjad iyo hooyo
Kala soocde qoys keli ah oo, seeda wada yaalle
Suldaan amar leh sheekh saahid ah, iyo seen caddaa odey ah
Soddonku ninuu u buuxiyo, haween sida carruurtooda
Sirqo habar ah inan seerateyiyo, kuwo sagaal jooga
Ayagoon saxarna dhimin baad, dhammaan sibiq u leyseen
Sarrafyidhi Amxaar jamac dhan, oo wada sujuudaaya

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Saqiirka iyo umulahaad disheen, malaha soo qaade
Kun baa subax disheen aamin ah, oo seexdey oo kacay
Saddex boqol ka badan culimadii, suuqa Harar tiille
Iyaga oo salaad jamac galaad, seefku mariseene
Saqda laylka dhaxe waxaad gasheen soolkii Dhagax-buur e
Samada iyo dhulkaba ciidankii, riday sawaariiqda
Kama seydhin ruux keliya oo, joogay subaxaase
Sujaacdii Awaare afdam ee sida xun loo laayay
Saxariiradii naagahaan, weli sasayaaye
Saqiir iyo kabiir reer Ashaco, oo nabad kusoo hoyday
Sardhaday galeen baad qumbulad, sun ah ku tuurteen ee
Surimada Jigjiga Leegadii sida xun loo laayay
Surkaad wada jarteen wiilashii, timaha soohnaaye
Saqajaanka beesha iyo guryaha, socod xumaantiina
Nin sidaa ku dhaqanteen ogaa, waa siqsiqiyaaye
Suldad Xabashiyeed nimay heshaa, waa sac kuu taliye
San ku neefle aad is shaabahdaan, baan dunida saameeyne
Saxi maayo axad sheeg is yidhi, sidaad sameyseen

*Qarab: Waa erey af-Carabi ah oo la macno ah reer-Galbeed.
*Cidda dhulka Soomaalida la siiyey ee halkan lagu xusayaa waa Xabashida
*Menelik: Waa boqorkii Xabashida u talin jiray min 1889 illaa 1913. Waxaa lagu xasuustaa qabsashadii Harar, kaniisad u rogiddii Masaajid-Jaamaca Harar iyo warqaddii uu u diray reer-Yurub ee ahayd inuu yahay jasiirad Kiristaan ah oo ku dhex jirta bad Muslin ah. Waxaa lagu ammaanaa boqorkii boqorrada Itoobiya iyo mideeyihii.
*Afriiqiya: Afrika oo af-Carabi ahaan loogu dhawaaqay.
*Suud Afrika: Waa Koonfur Afrika oo af-Ingiriisi ahaan loogu dhawaaqay. Waxaa berigaas ka jiri jiray xukun midabtakoora oo gumaysi ah oo dad yar oo caddaan ahi ay si xun u cabiidsan jireen dadka madow ee Afrikaanka ah ee dalka iska leh.

GUUBAABADII YUUSUF XAAJI AADAN QABILLE
Yuusuf Xaaji Aadan Qabille, wuxuu ahaa aqoonyahan, suugaanyahan, halgamaa iyo indheergarad. Waxaa aad loogu xasuustaa dhinaca tacliinta oo waaba shakhsiga labaad ee waxbarashada dhinaca iskuullada lagu xasuusto. Dabcan qofkii koowaad wuxuu ahaa Maxamuud Axmed Cali oo macallinkiisa ahaa.* Labadoodaba dhibaato ayaa kasoo gaadhay halgankoodii ay u galeen sidii dadku wax u baran lahaa. Sidaa darteed ayaa loogu kala magacaabaa aabbihii koowaad ee waxbarashada iyo aabbihii labaad ee waxbarashada. Yacnii Yuusuf Xaaji Aadan wuxuu ahaa aabbihii labaad ee tacliinta iskuullada Soomaaliyeed. Halgankii iyo dhibaatooyinkii uu arrinkaas u maray waxaan akhristayaasha kula talinayaa inay ugu noqdaan buugga ay qortay Foosiya Yuusuf Xaaji Aadan ee ay ugu magac-dartay, “Geeddi-Nololeedkii Yusuf X. Aadam.” Laakiin waxaan halkan idinku dhadhansiinayaa halgankii dhinaca gobannimo-doonka ee uu suugaanta u adeegsaday wax kamid ah.

*Qoraaga Maxamed Baashe Xaaji Xasan wuxuu igu biiriyey in Maxamuud Axmed Cali iyo Yuusuf Xaaji Aadan ay caan ka ahaayeen gobolladii Ingiriisku gumaysanayey xagga waxbarashada laakiin dhinacii Talyaaniga waxaa ka jiray aabbo tacliineed oo kale oo lagu magacaabi jiray Aw Jaamac.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Dagaal Nimuu Haysto Meel Halisa
Yuusuf Xaaji Aadan, 1948
Hadhuub nin sitoo, hashiisa irmaan
Ha maalin la leeyahaan ahay
Nin hawd degayoo, harraad ku diloo
Biyaha laga heegayaan ahay
Habaas nin dhex jiifa oo ku haftoo
Hayaankii kasoo hadhaan ahay
Dagaal nimuu haysto meel halisoo
Hubkiisu hangool yahaan ahay
Wixii ku habboon nin haabanayoo
Bahdii ka horjoogsataan ahay
Nimaan hadalkiisu hadh-qooflaalkiyo
Haweenkaba dhaafin baan ahay.

Hub Samayso Soomaaliyeey
Yuusuf Xaaji Aadan, 1949
Ingiriis Hargeysuu degiyo, hilinnadeediiye
Wax Talyaani weli haybiyaa, hoosadii Xamare
Faransiis Jabuutuu hurdaa, idinku hiifaaye
Wax Maraykan hawdka u maraa, waa horseed yimiye
Waakaas dhulkeenii hantiyey, hooliflow Xabashe
Hub samayso Soomaaliyeey, lagu hareereeye.

Gobannimo Intay Laalantahay
Yuusuf Xaaji AAdan, 1953
Inta uu gumaystuhu arlada, gebagabaynaayo
Gaaladu intay ii fadhido, guriga coonkiisa
Intay gibili weli saarantahay, aniga guudkayga
Gobanimo intay laalantahay, gebi ahaanteedba
Intay guushu ii muuqatee, labantay gacantu
Ee goonyaha Jabuutiyo Wajeer, la iga goobaayo
Inta gaadhku igu meersanyahay, gumucna lay haysto
Gasiinkiyo anfaaciguba way, goha dhunkaaleede
Ninkay gaajo haysoow aduu, gorofku kuu yaalle.

WAAN IRDHAYS-NAHAY
Gabaygii Fiinta
Cali Xuseen Xirsi, 1954
Gabayada xusuusta gaarka ah leh ee Cali Xuseen Xirsi tiriyey waxaa kamid ah gabayga Fiin oo sida ka muuqata uu tiriyey sanadkii 1954kii markii la dhaxal wareejiyey dhulka Soomaali Galbeed. Gabayaagu wuxuu gabaygiisan ku waraysanayaa shimbirta loo yaqaanno fiinta oo uu arkay iyada oo aad u ooyaysa. Gabayaagu gabaygiisa wuxuu ku caddaynayaa in shimbirtani ka ooyeyso dalkeedan la dhaxal wareejiyey halka qaar kamid ah dadkiisii ay weli ku mashquulsan yihiin qabyaalad iyo qolo qolo, waxaanu yiri:

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Fiin yahay adaa ololayoo, oohin ciirsadaye
Haddii aan laguu imanin waad, aammusi lahayde
Maxaad aragtay waan kula qabaa, uur-ku-taallada'e?

Waxay tidhi, "Ilaahay haddaad, aad u garanayso
Oo aad Islaam tahay i daa, waan irdhaysnahaye."
Waxaan idhi "Qofkii i abhiyaa, wuu ammaan heliye
Ashahaadda iyo waan aqaan, aayadii Nebiye
Hayeeshee ilmada kaa dhacdiyo, umalka guudkaaga
In yar iiga sheeg waxaan rabaa, inan ogaadaaye."

Waxay tidhi, "Inkaar buu ku go1ay, odagi Soomaale
Awlaaddi uu dhalayna waa, sida adoogoode
Hadday ul iyo diirkeed yihiin, rag iska eegaaya
Afrikadan ma joogeen nimaan, aabbe ku lahayne
Ayax kuma dhaleen kaymihii, ubaxa weynaaye
Anna aydii aan joogi jirey, kama abraareene."

Waxaan idhi, "Irdii nalaga qaad, aad ahaan jiraye
Waataa la kala iibsadaan, nala ogeysiine
Ooddaaba laga goynayaa, Idhankii Laasoode
Meeshaad ilmaa dhigan lahayd, uun kalaa degaye."

Waxay tidhi, "Dhulyahow eheledaa, ma laha iimaane
Ilaaleeyey oo dunida waa, ugu il liitaane
Iyagaa ableyda isu sida iyo eebo xoog badane
Intey Ayro kala qaadayaan, aarsan mahayaane."

Waxay tidhi, "Ilaahay hadduu, duul arrin u diido
Oo uu Ibleys gebi ka rido, sooma ururaane
Qalbigii engegey waanaduu, orod ku dhaafaaye
Goormaa inkaartani heshey ee, lagu alhuumeeyey?"

Waxaan idhi, "Arbiyo laguma oga, geesi aynaba'e
Iniinaha kelyaha iyo wadnaha, iini kaga taalle
Aanada tolkood bawga roon, uumiyaa kale'e
Maxaan ararta kaga daalayaa, edeg na loo gooye."

TAA MIYAAN LA ARKAYN?
Cali Xuseen Xirsi
Abwaan Cali Xuseen Xirsi oo ahaa shakhsi ka dhex muuqday gobannimo u-dirirkii umadda Soomaaliyeed, waxaa dhib weyn ku hayey dadkan uu xorriyaddooda iyo xuquuqdooda u dagaallamayo ee haddana cadowga u dhuun-daloola. Waxaa badanaa dadka gumaystaha u adeegi jiray, waxaa jiray qaar u basaasi jiray, waxaa jiray qaar u shaqayn jiray, waxaa jiray kuwo u arkayey gobonnimo-doonka qaar jar-iska-xoor ah. Haddaba waxaa lasoo wariyey in maalin ay kulmeen odayaal gumaystaha wax la cuni jiray iyo madaxdii ururkii Leegada ee gobannimo u-dirirka ahaa. Markaas ayuu shirkii ka tiriyey maansadan yar ee uu ku hoga- tusaalaynayey

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

odayaashaas Soomaalida ah ee haddana cadowga la saaxiibka ah. Wuxuu yidhi Cali Xuseen Xirsi:

Akhyaartaas i maqlaysiyo
Odayaasha tan joogoow
Sida awr hayinoowbay
Oo alaabtii qubi waayey
Umaddaa la raraayo
Ee usha loogu daraayo
Ma waydaan arkahaynin?

Webiyaashan Asayliyo*
Jannaala kan agteenna
Siduu abeeso dilaayo,
ragguu laayey Abeelle*
ee la dhacaayey Alwaaxa
ee Afka dhiiggu da'aayiyo
agoontii yaryaraydee
aabbihii korinaayey
uu ka gooyey unuunka
Miyaan taa la arkaynin?

Hableheennii ugbaa iyo
Ooryihii aad qabteenee
Markii ay umuleen
Laga tuuray ilmaayee
Lagu abuur-falanaayey
Taa miyaan la arkayn?

*Asayle: Waa Kelli Asayle oo ah gacan-biyood biyaha webiga lagu gaadhsiinayey meelo fogfog si beeralaydii Talyaaniga iyo mashaariicdii beeraha ee Talyaaniga biyo loogu helo. Wuxuu ku yaal meel u dhow Qoryoolay. Waxaa si qasab ah loogu qodi jiray dadka Soomaalida ah, ayada oo la jidh-dili jiray, la gaajaysiin jiray oo si daran loo ciqaabi jiray. Waxaa la sheegay in muddo yar ay ku xasuuqmeen 26000 oo Soomaalidii lagu shaqaysanayey ah. Dhimashada faraha badan ee ku imanaysay dadkii lagu qodayey gacankaas ayaa sababay in loo bixiyo Asayle ama Kelli-Asayle. Maxaa yeelay dumar badan oo raggooda lagu shaqaysanayey ayaa qaaday asay. Fiiri Dktr. Saadiq Enow "Dhalashadii iyo Dhabarjabkii Soomaali Weyn 4."
*Abeelle: Waa magac nin Talyaani ahaa oo gumayste ahaa.

***
MAANYARIDU SOOMAALI WAA
Yuusuf Cismaan Keenadiid
Gabaygan waxaa tiriyey abwaankii waynaa ee Yuusuf Cismaan Keenadiid. Taariikhdu waa dabayaaqadii 1950naadkii. Geyiga Soomaaliyeed oo dhan waxaa gumaysanayey quruumo kale. Dhaqdhaqaaqyadii gobannimo u-dirirka ahaana waa la dhexgalay oo waxaa ku milmay qaar dabadhilifyo ah oo gumaystayaasha gacan-saar la lahaa. Kuwaas ayaanay markiiba gumaystayaashu kor usoo qaadeen si ay ugu sii dhiibtaan xorriyad ku meelgaadh ah oo ay lasoo noqon karaan markii ay

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

doonaan. Haddaba cadaawaha umadda Soomaaliyeed iyo cawaantoodu waxay yaqaanniin meesha umadda Soomaaliyeed ka nugushahay ee laga wareemi karo ama laga xagal daacin karo. Dabcan waa qabyaaladda. Markaa ururkii ugu xoogga badnaa dhaqdhaqaaqyadii gobannimo-doonka ee la odhan jiray Es.Waay.El (SYL) ayaa la dhexgalay markii ay guushii soo dhawaatay. Khaakhuul qabiil ayaa laga dhex oogay. Markaa abwaanku wuxuu isku deyayaa inuu dadka waaniyo, isaga oo iftiiminaya meeqaanka liita ee Soomaalidu ka taagan tahay dareenka Somaalinimada iyo Islaamnimada labadaba. Wuxuu yidhi:

Maan-yaridu Soomaali waa, meheraddeediiye
Maslaxaddeeda garan-weydey iyo, marinkii toosnaaye
Macnahay ku noolaan lahayd, maluhu siin waaye
Maamuus la'aan lagu wadey, moodayaan nolole
Miis xumida heysiyo dulligu, waw macaan yahaye
Mabsuud weeye badidood waxay, mudan-hayaan ceebe

Muslinnimada sida loo mud-mudi, kama maseyraane
Maqaam-xumida waxa joojey waa, muran dhexdooda ahe
Iyagaysu muuqanahayee, moog adduunyada ee
Murtidey lahaayeen diliyo, magaca kooda ahe
Muwaafaqo kolkii laga gafaa, mowtigood galaye

Anigaa ku mira-dhaama baa, meleggu saarraaye
Macrifo uma yeeshaan wuxuu, baran masaalkoode
Macaamilada aadmigu ku jiro, laga madoobeeye
Martabadaa adduunkiyo cilmigu, umaba muuqdaane

Dadkey madaxdu ka xumaato way, marin habaabaane
Kuwa muqaddimada looga dhigey, waa manfaco doone
Mar maxaad cuntaa keliya buu, yahay muraadkoode
Nin mushaharo eexeyn-hayaa, waa miskiin dhabahe
Muddeec waxa ka dhigay waa inuu, maarmi-waa yahaye
Muddaafacana seeg iyo inuu, maya yiraahdaaye

Culimadana damac baa melgoo, mooyi sey tahaye
Milladdiyo shareecada bar baa, maal ku iibsada'e
Marsiin iyo fudeyd buu ku dhacay, magane diinkiiye
Maan-gaabka iyo weys hayaan, kii mufti ahaaye
Ardeydaa mujaadilo la geli, macallinkoodiiye
Midkii dhowr masalo soo bartaan, maaro loo heline
Makas-tiyo intii caamo bey, madax-wareersheene
Hadba xaal muraad lagu waraa, leyna maqashiine
Waase waxaan Minhaajkiyo Tuxfaha, meelna kaga oolle

ISTAAGEERID LAGA WAA
Cismaan Yuusuf Keenadiid
Maansada soo socotaa waa masafo. Masafadu waa nooc kamid ah maansada Soomaaliyeed oo berigii hore ay caan ku ahaayeen culimadu. Waxaa tan tiriyey

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Cismaan Yuusuf Keenadiid oo qudhiisu ahaa nin culimo ah. Wakhtiga uu tirinayaa waa mar ay sooba dhawaatay xorriyaddii beenbeenta ahayd ee la siiyey laba gobol oo kamid ahaa dhulkii Soomaaliyeed ee gumaystayaashu bililiqaysteen. Waxa uu iftiiminayaa dhibkii jiray berigaas, dawladihii kala qaybsaday dhulka Soomaalida, dabadhilifnimadii dadka qaarkood lagu ibtileeyey iyo sida looga tegay kasoo-horjeesiga gumaysiga iyo ku-dhaqanka Islaamnimada dhabta ah. Wuxuu yidhi:

Axmadow* tixdii maanso, tirinteedba daayaye
Indhoweyd ka tegayoo, tooggo uuma yeelane
Kolse haddaan ku tacalluqo, saan u taxo ma waayee
Tuduc uun baan ka sheegaa, tororogi ma fiicnee
Sida loo tebaayaa isaga-key tallaalane
Taallo iyo buur iyo kama tuuro meel xune
Tubta kama qalloocshiyo ta'wiilaha higgaaddee
Takhtarkeed inaan ahay, waad igu tiqiinaye
Meeshii aan ka taab-saaro, raga qaar ma tabayee
Wow tallaaba qaadaa, an kuma turunturrooda'e
Dhaaxaanse tabo jadiidiyo meelo kaaga taabtaye
Tu yar oo aan kuu sheegi, bal tilmaanso caawana

Afartaas tusmeeyaye ma tammimay sidaydii
Ma tartiibshey maansada awal baan tacliimaye
Sow xarafka kuma toosin ta'da kama habaabine
Taasi weyga degataye tiraab kale waxay tahay

War Soomaali tala xumo, taag looga waayaye
Tabtay horey u soo baratay, marna kama tegeysee
Tadbiir kale ma hayso'e iyadaysku taagane
Istoleysigii gacalo, tusi waa Ilaahaye
Iyadaysu tumanaysa, teeri iyo billaawe e
Istaageerid laga waa, isu turinamaysee
Tabaalaha adduunkiyo, taariikh eegi meysee
Waxay tacadi soo aragtay, iney toosto diidaye
Cilmiga loo tartamayana, u tacjiilimeysee
Shisheeyaha ku tuman iyo tooda fiirin weydaye
Xornimada u timid haatan, toodoobi meysee
Diinta tiirinta u baahan, waxba uguma taallee

Tiiraanyo kama hayso, tafarruqa la geliyaye
Si kastoo ad ula talisid teedii uun weeye e
Dalkoodii rag baa tebiyey iyageyska tuunsane
Ingiriisku tahantiyo toogadiba ka helyaye
Faransana tabkiciyoo tiisii waa ku heystaye
Inta kale waxaa taabay, Talyaani iyo Xabasho e
Amxaarkana tix-gelin iyo turaal lagama eego e

Tol-waynihii Ogaadeen tuu ku falay la maqalyaye
Gabal toogey qaarkoodna xabsiguu ku tuuraye
Nimankii u talinaayey Tafarraa* dhammeeyee

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Tallan iyo kuwii haray tawal baa dilaayoo
Waa ka tubaha soo jiiray Ina-Tarabbi* keligiye

Isaaqna looga tabar sheegay, takhtigii dhulkiisee
Wuxu tiriyo maal qabay, kor u tiigan waayee
Arladi tooxa weyneed ku tallaabsan waayee
Inkastooy tigaadowdo tuldihii, daaqsan waayee
Toban mayl ma dhaafsiisna taaggii Hargeysa e

Majeerteenna laga teed halkuu Toga ku dhaqayaye
Kobtii lagu tammadin jiray laga wada takooryaye
Taxkuumadi ma seejine tunjileecsi weeyee
Toomihii Marqaan iyo tegi waayey Ceel-cade
Tiiriga agtiisiyo waakan tuuran Beyra'e

Afartaas tusmeeyaye ma tammimay sidaydii
Ma tartiibshay maansada awal baan tacliimaye
Sow xarafka kuma toosin ta'da kama habaabine
Taasi weyga degataye tiraab kale waxay tahay

Yuu.En-nada* taarka loo direy waxba nama taraayee
Waxay taawin badidood si laynoo taxaabto e
Waa la takhantakhayn jiray ninkii tiro-yar weligiye
Tiirridatan gaalo ah, jinnaa inagu taagaye

Waa niman takoormayoo, towxiidka diidaye
Towreed iyo Injiil iyo teennaba ka beyre e
Tawaani keen-isuma hayso, isku towna maahine
Ninkii haatan taabacayna, tubta kheyrka seegyaye
Togaggii Firdowsaad tegi-maayo weligiye
Inkastuu wax sii tuurto, isagay u tuudine
Risqina taharoweyniyo, tabar laguma helayee
Taftar baa hor lagu dhigay, tanaadkiyo saboolkee
Ninba waxaa u taal meel, tii loo xariiqaye
Tafan-taaf in lagu doono, toolmooni maahee

Dowladdana tukubo iyo tuugmo laguma gaaree
Haddaan rag isku tacaddoobin tiginkeed ma aasmee
Horaa loo tijaabshoo cayaar kuma timaaddee
Taawil iyo buruud iyo tadcaar wax u ah dhiiga e

Cadowse soo tabcadayoo, leh tareen iyo dayuurado
Nin tusbax iyo laan qaatay, taag uma helaayee
Banbada laysku tuurona, toorreey gaari maysee
Haddaynaan wax tabaraysan, rag waa kii is-tiilee
Aan qalabka lagu tuugsan tumasho iyo ganacsiba
Ee tabaabulyada seegno, waxba taransan maynnee
Tawakalidda Eebbena tiir la cuskan weeyee

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Taliyuhu isaga weeye, tadbiirshaha aduunka e
Waxaan tabarruk ka helnaa tilaawada Quraankee
Taqwa iyo cibaadiyo towbad baa danteen ahe
Tukashaduna faral weeye taarik waa la caayaye
Hadaynaan ka tegin diinka Rabaa inagu toosane
Tuu fali lahaa iyo, isna tiis la laabanee.

*Axmed: Waa will uu dhalay abwaanka Cismaan Yuusuf Keenadiid.
*Tafarre: Waa Xayle Salaase, boqorkii cimriga dheeraa ee Xabashida oo waagaas talinayey.
*Ina-Tarabbi: Ma helin warbixinta ninkan, wuxuuse u egyahay hoggaamiye kasoo jeeda gobolka.
*Yuu.En-na: Waa Qaramada Midoobey (United Nations – U.N.) oo lasoo gaabiyey dabadeedna la Soomaaliyeeyey.

HALGANKII BARKHADCAS
Halkan waxaynu ku xusaynaa oo ku bilaabaynnaa buuggeena maansooyin kooban oo uu tiriyey abwaan Maxamed Ismaaciil Baasarce “Barkhadcas”. Abwaanku intii uu noolaa waxa lagu naanaysi jiray “Balaayo-Cas” laakiin markii uu dhintay ayaa loogu bedelay “Barkhad-Cas”. Abwaanku wuxuu hano-qaadkiisii hore u badnaa dhinaca magaalada Cadan ee dalka Yaman. Laakiin markii uu kusoo laabtay dalka, gaar ahaan magaalada Hargeysa wuxuu ka bilaabay dhaqdhaqaaq gobannimo-doon ah oo lagaga soo horjeedo gumaysigii Ingiriiska. Waxaa kamid ahaa ereyadii halhayska u ahaa ee bilawgiiba laga xafiday:

Ayuu guullahay gargaaraayoo?
Ayaa garanaaya gobanimadoo?
Ayaa la gembiya gumaysiga?

Wuxuu abwaanku waajib iskaga dhigay wacyi-gelinta bulshada ee dhinaca gobannimada iyo gumaysi-diidka.

AAN OOYEE ALBAABKA II XIDHA
Barkhadcas
Haddaba sanadkii 1958kii ayaa waxaa magaalada Hargeysa soo booqday nin Ingiriis ah oo la odhan jiray “Duke of Gloucester” oo adeer u ahaa boqoraddii Ingiriiska. Ninkaas oo uu dalkiisu si wuxuushnimo ah u gumaysanayey waddamo qaaradaha Afrika iyo Aasiya ku yaal oo fara badan. Haddaba intii aanu dalkaba soo gaadhin ayaa la bilaabay u-diyaargarowga soo-dhaweyntiisa.
Waxaa loo yeedhay abwaanadii wadanka ayaga oo laga codsaday in ay soo dhaweeyaan sarkaalkaa Ingiriiska ah. Dabadhilifyadii ayaa durbaannada tuntay. Dadkii aan indheergaradka ahaynina waxay iska noqdeen sida caamada lagu yaqaanno dameeri dhaan-raacday. Haddaba abwaan iyo hal-abuure Maxamed Ismaaciil Baasarce “Barkhadcas” wuxuu kamid ahaa dadkii laga codsaday inay maansooyin kusoo dhaweeyaan sarkaalka Ingiriis, laakiin isagu wuu iska diiday taas, waxanu codsigaas kaga jawaabay maansada la magac-baxday Aan Ooyee Albaabka ii Xidha oo uu ku sheegayo xumaanta gumaysiga iyo nacaybka uu u qabo gumaystaha. Wuxuu yidhi Barkhadcas:

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Awoowgey ninkii indhaha tiray
Ninkii aabbahay adoonsaday
Ninkii anigana i iibsaday
Ninkii ifka igu adduun tirey

Haddaan ogohoo-nan ka aarsan karayn
Haddaanan Aadanoow unuunka jarayn
Asaag li'i baa ishaa i baddee
Ninkaa aragiisa uurkaan ka necbee
Aan ooyee albaabka ii xidha

Isagoo Iglan* jooga buu i diloo
Ushuu soo fidshaa i iimaysoo
Waa taa aramidi i oofa tirtee
Haddaan ogohoonan ka aarsan karayn
Haddaanan Aadanoow unuunka jarayn
Asaag li'i baa ishaa i baddee
Itaal darri aan la eedaadee
Ninkaa araggiisa uurkaan ka necbee
Aan ooyee albaabka ii xidha

Arladii ka samroo aduun ma hayee
Haddii la ilaashay afkaygii
Haddaanan ikhtiyaar aqoontay hadlayn
Haddaanan eray qudha shirkaas odhanayn
Asaag li'i baa ishaa i baddee
Ninkaa araggiisa uurkaan ka necbee
Aan ooyee albaabka ii xidha.

Wixii arrineen Ilaahay jeclayn
Aayaadka Qur'aanka wada aragtoo
Udgoonena yidhi, "Indhaha ka qarshee,"
Asaag li'i baa ishaa i baddee
Ninkaa aragiisa uurkaan ka necbee
Aan ooyee albaabka ii xidha.

Ugaadha ninkii dhaqee ururSada
Ruuxii eegayaa adduun ka baxshee
Raggiinii ogaa horuu u arkee
Ninkii ooridiisa geynaayoow
Iimoowdaye axankaaga waynee.

Bal Ogow Isticmaarku Abidkii
Irriduu Marinaayo Awr Raran
Irbad buu Ku Dayaa Ayaanta Horee
Raggaan Arkayee U Abasaxayow*
Ninowna Ha Odhan Soomaalaan Ahee
Ordoo Magacana Ka iibsada.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Libaaxa Annayiyo Abaarso ka ciyey
Aburriin* lo'da joogta baa urisoo
Ooday jabisaa intay ka dhacdoo
Amsaxuu ka guraa idaylkeede
Wakaa Ingiriiskii iidaayee
Idina u dabaaldegoo adhiyohow
Ordoo magacana ka iibsada.

*Iglan: Waa gobol kamid ah dalka Ingiriiska laakiin halkan waxay ugu jirtaa isla dalkaas oo dhan.
*Abasax: Waa abasaxa geela dhedig, waana marka ay haluhu u baahan yihiin awr abaahiya. Si kale haddaan u dhigno, waa hammoodka geela dhedig.
*Anaya, Abaarso iyo Aburriin: Waa deegaanno aan kala fogfogayn oo dhinaca galbeed ka xiga magaalada Hargeysa.

AFGARAN-WAAGU WAA GUMAYSIGA
Abwaan Barkhadcas waxaa maalin kale soo maray gabdho ay hore isu yaqaanneen. Dadka qaarkood waxay leeyihiin gabadh keli ah ayey ahayd. Abwaanku wuxuu fadhiyey geed hoostii. Wuu xanuunsanayey oo aad ayuu raadka xanuunku uga muuqday korkiisa. Markaa gabdhihii waxay ku murmeen, "Tolow qofkani ma Maxamed baa?" Dabcan way garanayeen ee waxay cabbirayeen isbedelka ka muuqda jidhkiisa uu xanuunku dooriyey. Markaas ayuu gabdhihii ugu xog-warramay maansadan heellada ah oo uu ku muujiyey in dhibaatada haystaa aanay ahayn xanuune, ay tahay aramida iyo tiiraanyada gumaystaha. Wuxuu yidhi abwaan Barkhadcas Ilaahay ha u naxariistee:

Adigaa gabadhyahay, habeen gudayee
Anigoon guunyo waayin, geel dhalay
Gasiinka la cuno, afkaa ma gashoo
Gaajiyo cudur gaanka iima sudhnee
Waxa i goday waa gumaysiga

Hooyaday gacalaa afkuun garatee
Sidii garanuug joogta geyi abaareed
Amase geri laacay geed sare
Gurucaa dheeri waa gumaysiga

Sidii geesi uu tolkii gacma jaray
Garawshiyo waayey oon gardarrayn
Ilmadan gu'i weyday ee gobo'liyo
Gama'aan diiday waa gumaysiga

Waanigii gabannimo aroos ku galee
Waanigii gaari helay garaaro lehee
Gaasira isagaa na kala gooyee
Carruur ma gargaarsadoo ma gartee
Goblankaan ahay waa gumaysiga

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Maan gaadhin gankaad i moodaysee
Gu'gaygii soddonkii labbuu ka gudbee
Guudkaa i caddaaday ee i gu'iyo
Gabaxdaan idhi waa gumaysiga

Wax ii gooniyiyo guhaad ma qabee
Somaalaa giddigeed is gaadaysoo
Cadhadaan gubnahay waa gumaysiga

Gambadii dumarkaa la'ii guntiyoo
Gabbal baa iigu dhacay gasiirad cidloo
Gabaahiiri waa gumaysiga

Rag baa gacalkay na kala gooyoo
Gaaliyo nacab baa u geesa ahoo
Afgaran-waagu waa gumaysiga

Garaadnimo iyo gobbaan u dhashoo
Gibir baan ka baxshaa haddaan wax gadtoo
Nin gini qaatay baa i gacan galiyoo
Gartay-daan waayey waa gumaysiga

Guullow adigaa gargaaro lehoo
Ninkii la gumaysto u gacan-celiyee
Anigoon afar gaal gabaar u ahayn
Anigoo geesiyoon gaboonayn
Inaan calan gaar ah guudkayga sudhiyo
Lixdanka gobonnimo i gaadhsii.

Geesiga Madow
Cabdillaahi Suldaan Timacadde, 1961
Gabaygan waxaa tiriyey abwaankii waddaniga ahaa ee Cabdillaahi Suldaan Timacadde. Wuxuu iftiiminayaa sida quwadaha waaweyn ee reer-Galbeedku (gumaystayaashii hore) aanay u rabin guul ay helaan waddamada yaryar ee korayaa (la-gumaystayaashii hore). Waxaa loo fahmi karaa, digniin uu siinayo quruumaha curdinka ah si ay isaga ilaaliyaan shirqoollada lagu hagar-daamaynayo. Waxaa uu markhaati uga dhigtay digniintiisa, sida geesigii u kacaba boqonta loo jarayo. Tusaale wuxuu usoo qaatay dilkii Gaandi-gii reer-Hindiya, dilkii Kamaalu-Diin oo ahaa danjire Masaari ah oo Muqdisho joogi jiray waagii gumaysiga, dilkii Maxamuud Xarbigii reer-Jabuuti iyo geesigii Afrikaanka ahaa ee lagu magacaabi jiray Batriis Lumuumba. Wuxuu Cabdillaahi Suldaan kala dardaarmayaa siyaasiyiintii dawladdii curdinka ahayd ee Soomaaliya, inay aaminaan oo nasteex moodaan gumaystayaashii shalay iyo xulafadooda. Haddii kale waxaa dhici doona caaqibo-xumo aan la mahadin, ayuu yidhi. Taladii Cabdillaahi Suldaan lama qaadan, waxaana lagu dhacay dabinkii uu ka digayey. Dabadeed waxaa laga dhaxlay ayaan-darradii ku habsatay umadda Soomaaliyeed intii yarayd ee xornimada heshay. Wuxuu yidhi Cabdillaahi Suldaan Timacadde:

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Qaramadan gadaal-kacay qarbigu, waa geddiyayaaye
Gobannimada lama doonayaan, gadasho mooyaane
Wiilkii garaad lagu tuhmaba way ka gurayaane
Gardarriyo is-yeelyeel horaa, Gaandi* loo dilaye
Kamaalu-Diinna* qaar baw gabaday, qaatay giniyaade
Xarbigii* guntaday bay qunbulad, haad u geliyeene
Geesiga madow uma oggola, guusha reer-Yurube
Geerida Lamuumbaa* wadnuhu noo gig leeyahaye
Geyigiisa goortuu qabtee, gees isugu leexshay
Iga guura galabtuu yidhaa, geeddan loo xidhaye
Godka waxa u qoday Haamarshool*, waa gedduu rabaye
Maantaba hadday gawraceen, way gam'ahayaane
Meeshuu galaba doollaarku waa, uu gembiyayaaye
Ninkii dunida kala gaabiyaa, garabsanaysaane
Raggan gacanta haystoow wallee, saad-dambaad gariine
Qudheennani intaynaan geb odhan, yeyna kala gaadha
Haddii kale se goor aan fogayn, gawda bal aan eegno.

*Gaandi: Waa Mahatma Gaandi. Wuxuu ahaa garyaqaan u halgami jiray xorriyadda reer-Hindiya waagii Ingiriisku gumaysan jiray. Wuxuu aaminaa in la halgamo ayada oo aan dhiig la daadin. Hoggaamiye ruuxi ah ayuu u ahaa reer-Hindiya laakiin waxaa la dilay markii Hindiya heshay xorriyaddeeda. Waxaa dilka ku fuliyey nin xagjir ah oo Hindoos ah laakiin waxaa la rumaysan yahay in shirqool ka dameeyey dilka.
*Kamaalu-Diin: Waa Kamaalu-Diin Saalax oo ahaa nin Masaari ah oo aad ugu halgamay sidii Soomaalidu uga xoroobi lahayd gumaysigii reer-Yurub. Wuxuu dalka u yimid asaga oo ahaa nin ka socda dawladda Masar laakiin muujiyey jacayl aan qiyaas lahayn oo dhinaca Soomaalida ah. Taasi werwer ayey ku abuurtay gumaysigii. Kamaalu-Diin waxaa Muqdisho lagu dilay 17 Abriil 1957. Waxaa dilka fuliyey nin Soomaali ah laakiin waxaa la rumaysan yahay in shirqool ka dambeeyey.
*Xarbi: Waa Maxamuud Xarbi oo ahaa geesi Soomaaliyeed oo kasoo jeeday dhinaca Jabuuti. Waxaa si shirqool ah loo khaarajiyey isaga oo ku foogan hawlaha gobannimo-doonka. Dayaaraddii uu la socday ayaa burburtay, waxaana la yaqiinsan yahay in shirqool isaga ah loo qarxiyey diyaaradda. Geerida Maxamuud Xarbi waxay dhacday 1960kii.
*Lamuumba: Waa Batriis Lumuumba oo ahaa halgamaa reer-Koongo ah. Wuxuu u halgamay in dalkiisu xorriyad ka qaato gumaystihii Biljam. Xorriyaddii kadib wuxuu noqday raysal-wasaaraha Koongo-Kinshaasa laakiin in markiiba waxaa lagu inqilaabay shirqool ay maleegeen Sii.Ay.Ee (CIA) iyo gumaysigii Biljam. 1961 ayey milateriga Biljam dileen Lumuumba isla markaana gubeen maydkiisii. Arrintaasi tiiraanyo weyn ayey ku reebtay shucuubta gumaysi la-dirirka ah. Waxaana la yaqiinsaday in aanu reer-Galbeedku rabin geesi Afrikaan ah oo dalkiisa ku maamula siyaasad ka madax-bannaan gumaystayaasha.
*Haamarshool: Waa Daag Hamarshool (Dag Hammarskjold) oo ahaa nin Iswiidhish ah oo xukumayey Qaramada Midoobey (UN) min 1953 ilaa markii la khaarajiyey oo ahayd 1961. Wuxuu Timacadde qabaa inuu lug ku lahaa dilkii foosha xumaa ee Batriis Lumuumba.

Nidarray Xaylow
Cabdillaahi Suldaan Timacadde

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Gabaygan waxaa tiriyey geesigii waddaniga ahaa ee Cabdillaahi Suldaan Timacadde. Wuxuu kaga hadlayaa niman Soomaali ah oo la shaqaynayey gumaysigii Xabashida ee Xayle Salaase isla markaana si nacasnimo ah uga soo horjeeday horumar kasta oo ay umadda Soomaaliyeed xorriyad ku gaadho. Wuxuu si gaar ah u magacaabayaa nin gumayste-kalkaal ahaa oo la odhan jiray Cagoole. Cagoole wuxuu daacad u ahaa xukunkii Xabashida ee Xayle Salaase, waxanu u dadaalay sidii dhulka Soomaali Galbeed ugu hoos jiri lahaa xukunka Itoobiya. Cabdillaahi Suldaan Timacadde, wuxuu ku taamayaa in dhulka Soomaaliyeed ee ilaa Hawaas iyo ilaa Negeyle iyo ilaa Nayroobi lasoo celin doono oo aan la nasan doonin ilaa riyadaasi xaqiiqowdo. Waxaa kale oo uu nadar la gelayaa Xayle Salaase. Wuxuu leeyahay, “Naagaha midkeen lagu daraba nidarray Xayloowe.” Marka aan buuggan qorayo (2012) waxaa laga joogaa markii gabayga la tiriyey 50 sano iyo dheeraad (1960), waxaana iska cad cidda labadii qolo naagaha lagu daray iyo cidda nidarkoodii dhaboobay. Waxse dambeeya Allaa og. Wuxuu yidhi Timacadde:

Naxwihiisa gabay waanigii, nimiri ku ahaaye
Ma naannaabiyo ee kaygu waa, nibirraddiisiiye
Nadaamkiisa anigoo yar baan, nuuradayn jiraye
Bal aan nudo tixdaan Yuusufow, nuunka ka higgaadshay
Nimcada kuma xamdiyo ruux haddii, naarta loo lulo’e
Namruud iyo Kancaan waa kuwuu, nacay Ilaaheene
Nasiib ma leh ninkii uga dudaa, gaalo naxariise
Nacallaa qabsada kaadirkii, kiisa naasila e
Nin nifaaqa mooyiye khalqigu, wuu ku neefsadaye
Soomaalidaa naaxday baa, qaar ka naxayaane
Nasaqnimo Cagoolow* Rabbaa, naaska kuu sudhaye
Ogaadeenku* waa nala niyoo, nuurki wada gaadhye
Nafarkiyo aday kugu hodeen noolka Xabashaade
Nacabkaaga weeyaan waxaad, nugusta* haysaaye
Kuwii Nebiyadii caasiyaa, naashka kuu dhigaye
Naxlina kuu gal Soomaalidaad, naafi leedahaye
Ninkiise dhiigga nuugaba mar buu, nudaygu qoonmaaye
Naqa laaso dabadeedna waa, laydin naawiliye
Naaliyadda goortaan duldhigo, tan iyo Nayroobi
Nageyliyo caruusaad haddii, naafaq ku habsaamo
Nasan maynno meeshiyo Hawaas, nacam Ilaahay ye
Raggii nadiga kuu qaadan jiray, niibka ka adkaaye
Haddii aan nadaadiga la raran, naruradaan geysto
Nakh-nakhdiyo dajidu waa intaan, nowdu kuu bixine
Wallee inaan nawaaxiga Shawaad lagu nagaanayne
Niska dhexe habeenkaad misana, now dhe leedahaye
Meeshiyo Niyuu-Yaag haddaad, noolka bixin doonto
Nasaariyo Yahuud baad u noqon, nayl xun oo kale ee
Naagaha midkeen lagu daraba, nidarray Xayloowe
Hadday nabaddu kula naaqus tahay nooli kulanteeye.

*Cagoole: Waa Cabdillaahi Faarax Cagoole oo ahaa nin Soomaali ah oo daacad u ahaa dawladda Itoobiya kuna dadaalay sidii Soomaali Galbeed ugu hoos jiri lahayd xukunka Itoobiya. Wuxuu ahaa nin aw ah oo yaraantii xer lagu daray, af-Carabiga

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

iyo af-Amxaarigana wuu yaqaannay. Wuxuu ahaa curyaan ku socda gacmaha iyo jilbaha, sidaas ayaanu kula baxay naanaysta Cagoole. Waxaanay dadka qaar u qabeen nin amran.
*Ogaadeen: Waa qolo macruuf ah oo ku aroorta qabiilka Daarood, lagana heli karo dhammaan dhulalka Soomaalidu degto laakiin ku xooggan dhulka Soomaali Galbeed iyo dhulka Soomaaliyeed ee Keenya xukunto.
*Nugus: Waa af-Xabashi uu macnihiisu yahay boqor.

INGIRIIS RAGGUU LAAYEY
Ibraahim-Gadhle
Ibraahim Sulaymaan “Ibraahim-Gadhle” wuxuu ahaa abwaan Ilaahay ku mannaystay indheergaradnimo iyo farshaxan suugaaneed oo aad u heer sarreeya. Waxaa saldhig iyo deegaan u ahaa magaalada Jabuuti. Waxaanu kamid ahaa dadkii usoo joogay gumaysigii Faransiiska ee umadda reer-Jabuuti soo silciyey. Indheergaradnimadiisa iyo farshaxannimadiisa waxaa laga dheehan karaa suugaantiisa badda ah. Bal inta aanan soo qaadan maansada gumaysi-diidka ah ee aynu buuggan ku xusi doono, ila dheeho heerka iyo martabadda uu gaadhsiisnaa suugaanta iyo samo- talisnimada. Ibraahin Gadhle waa abwaankii lahaa ereyadan waanada ah ee soo socda:

Midigtaadu yey noqon,
Mid tolkeed u muruq weyn,
Murjinkaagu yuu noqon,
Magli dila walaalkii,
Magacaagu yuu noqon,
Mid xumaan ka marag-kaca,
Sida macawisaa qaar,
Ninba maalin yuu xidhan,
Hadba kii muraadle ah,
Hawga dhigin maqaar-saar,

Mar waxaad dhadhamisiyo,
Mijin qaad ah haw dhiman,
Hana talin masiibiyo,
Wax makhluuqa kala dila,
Maskaxdaadu yay noqon,
Maqal lagula leeyahay,
Yaan toban muftaax iyo,
Lagu furan masaabiir,
Waxaad shalayto mudatiyo,
Mahadhada xusuusnoow,
Halkii qorigu kaa muday,
Mar labaad lugtaadiyo,
Cagtu yaanay kula marin.

Abwaan Ibraahin Saleebaan wuxuu soo gaadhay ayada oo ay gumaystayaashii shisheeye cabiidsanayaan bina-Aadan fara badan oo ay ku jirto umadda Soomaaliyeed. Wuxuu si gaar ah u dulsaarnaa meeshii uu joogay gumaysigii Faransiiska oo kamid ahaa kuwii ugu arxanka darnaa duul wax gumaysta. Wuxuu

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

usoo joogay ama maqalay Soomaali badan iyo xitaa Afrikaan badan oo xasuuq loo geystay. Wuxuu hebel iyo hebel u yaqaannay culimo iyo aqoonyahanno unuunka laga jaray ama la kaxaystay oo aan dib loo arag meel ay jaan iyo cidhib dhigeen. Haddana wuxuu usoo joogay ayada oo dhammaan gumaystayaashaas laga dulqaaday umaddii Soomaaliyeed, alxamdulillaah. Laakiin xorriyaddii la helay waxay noqotay mid dhicis ah maadaama taladii u gacan-gashay dad gumaystuhu beertay oo la odhan karo waxaa loo sii yara wakiishay hawshii gumaysashada. Waxay noqdeen dad aan laga filahayn in ay usoo aargudaan umaddii saxariirka la soo baday. Ayaan-darradaasi kumay koobnayn umadihii Soomaaliyeed, waxaa la qabay guud ahaan shucuubta Afrikaanka ah badankooda. Markaas ayuu abwaan Ibraahin-Gadhle tiriyey gabaygan tawaawaca ah:

Allahayow adduunyada markaad, taagtay udubkeeda
Ama aad abuuratay khalqiga, Aadan iyo Xaawa
Maalintuu Iblayskuna kufriyey uu, diiday amarkaaga

Imminkiyo ayaantaa maxaa, belo adeegeysa
Imisaa ardaa fiican iyo, aqal madoobaaday
Ubadkay siteen iyo maxaa, dumar agoonoobay

Imisaa arwaax hoyatay oo, gaal iyo Islaan leh
Axmadkii* la doortiyo maxaa, Nebiyo loo ooyey
Abuubakar Siddiiq* iyo inuu, Caliba iiljiifo*

Inkastoon ogsoonahay inaan, axadba waaraynin
Wadka Eebe soo diro wax baa, aniga ii dheere
Ifka ruuxa joogaa kol buu, ku istareexaaye

Kol uun bay anfaaciga macaan, iligga saaraane
Ikhtiyaar kol uun bay helaan, uumiyaa kale ee
Aasiya ba waxay leeyihiin aarmi iyo xooge

Annagana Orobbaa* sidii, awrta noo rarane
Waagii iftiimaba kun baa, nalaga aasaaye
Bal qabsoo ugaadhiyo sidii, adhiga weeyaane

Eygaa ciyaayaa hadduu, dhaamo inankeenna
Afrikadan Ilaahow maxaa, laga abuuraayey?*
Allahayow alhuumiyo maxaad, iinta ugu yeeshay?
Allahayow awood iyo maxaad, aalad ugu diidday?
Ummaddaada Eebbow maxaa, loogu kala eexday?

Ingiriis ragguu laayey baan, cidi illaaweyne
Axmad-Guray* unuunkay jareen, ehel ha waayaane
Oomaarna* waad wada ogtihiin, uubtii loo qodaye

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Sayidkii* addoonsiga nebcaa, aakhiro u tabiye
Waa kuwii Cadhoolana* ajalay, calankan awgiiye
Halyeygii Bashiir* bay dharaar, adhaxda gooyeene

Maxamuud* sidii loo arjumay, aamus laga qaadye
Imaam Cusmaan* baa ku maqan, ololeheeniiye
Ablay bay u quudheen nin ragi, kuma ataageene

Eeddii gumaystaha haddaan, in yar ka faalloodo
Axaddii bishii Maaris* iyo, hore Isniintiiba
Eedaanka waaberi markuu, noo addimay sheekhu

Waa kuwii intay ururiyeen, edeg ka buuxsheene
Waa kuwii awaaraha na tubay, aqab la'aaneede
Waa kuwii uqaylkii guriyo, kii arrimin lahaaye

Waa kuwii hablaha ugub diliyo, Aaminiyo Luule
Waa kuwii Amaar iyo dugaag, oomman noo qubaye
Immikana kuwaa talinayay, eebada u tumiye

Isticmaarku ooduu dhigiyo, odaxdii waa taalle
Ma ilbixin kuwii aan lahaa, way ka aargudane
Iglan* baaba loo dhoofiyaa, weli addoontiiye

Iib baa Amriik* loogu diray, odayo waaweyne
Almaaniyana* kolay ku tahay, nala asqaysiiye
Kol hadday abiid ii yihiin, oohintiyo ciilku

Uurkii islaantii maxaan, uga abuurmaayay?
Oofta iyo hooyaday maxay, adhaxda ii saartay?
Allahayow awoowiyo muxuu, aabbe ii dhalayay?*

*Axmed: Nebi Muxammed – nabadgelyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee. Magacyadii Nebiga waxaa kamid ahaa Axmed, Muxammed, Maaxi, Xaashir iyo qaar kale.
*Abuubakar Siddiiq: Cabdillaahi ibnu Abii Quxaafa. Waa Nebiga saaxiibkiisii koowaad ee xagga dacwada Islaamka. Waana khaliifkii koowaad ee Nebiga dabadii hoggaamiyey umadda Islaamka.
*Cali: Waa Sayid Cali binu Abii Daalib. Waa carruurnimo ugu hor rumeeyey Nebiga, waa Nebiga ina-adeerkii rumaad, waa saygii Faadumo Rasuul iyo khaliifkii afraad ee Muslimiinta Nebiga dabadii.
*Orobba: Yurub
*Beydadkan waxa la moodaa inuu abwaanku eedaynayo Eebbe (xumaan ka hufnaaye). Ilaahay waxan uga baryeynaa abwaanka inuu ka cafiyo wixii gef ah ee ka dhacay. Caqiidadeenu waa in aan Alle lala xisaabtami karin laakiin uu asagu xisaabinayo addoomadiisa. Dhinaca kale dadka wuxuu Alle abuuray ayagoo siman laakiin waxaa kala reeba camalkooda aakhiro iyo adduunba. Markaa Afrika ayadaa seexatay, dabadeedna waxaa helay cadow aan arxan lahayn oo bakhtigoodana ka

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

kici waayey.
*Axmed-Gurey: Wuxuu ahaa halyey hoggaamin jiray bulshada Geeska Afrika ee Muslinka ah. Wuxuu ahaa sheekh caalin ah.
*Oomaar: Waa Faarax Oomaar Ileeye, halgamaa si nabadgelyo ah ugula diriray gumaysigii Ingiriiska, isaga oo af iyo aqoon u adeegsaday dagaalkiisa. Wuxuu u qoray dawladda Ingiriiska talagaraaf ay ku qornayd saddexdan erey “Hayaay, hayaay, hayaay.” Dalka ayaa dhawr jeer laga masaafuriyey, aakhirkiina wuxuu dhintay isaga oo masaafur ku maqan, waxaa ugu dambeeyey hadal isaga oo leh, “Dalkaygu ka yar wax la kala qaybiyo, dadkayguna ka tabar yar wax la rarto.” Fiiri qormada 16aad ee Dktr. Saadiq Enow ee Dhalashadii iyo Dhabarjabkii Soomaali Weyn.
*Sayid: Waa Sayid Maxamed Cabdille Xasan, hoggaamiyihii Daraawiishtii gumaysi la-dirirka ahayd. Wuxuu ahaa wadaad ay ku fogaatay caqiiqada Islaamku isla markaana ku xeeldheeraa curinta maansooyinka af-Soomaaliga iyo shicirka Carabiga.
*Cadhoole: Waa Cabdiraxmaan Cadhoole oo kamid ahaa halgamayaashii aqoonyahanka ahaa ee loo unuun-jaray gobannimo-doonka, gaar ahaan dhinaca Jabuuti. Si naxariis darro ah oo cadaawad miidhan ah ayey gumaysiga Faransiisku u dileen Cabdiraxmaan Cadhoole. Arrintaasi waxay ku reebtay shacabka reer-Jabuuti uur-ku-taallo iyo halgan adag oo ay usii galaan xorriyaddooda. Fiiri qormada Cabdalla Xaaji ee Halgankii Jabuuti.
*Bashiir: Waa Sheekh Bashiir, wadaad iimaanku qanjaha joogay oo ka dhiidhiyey gumaysigii Ingiriiska. Waxaa lagu deldelay gobolka Togdheer.
*Maxamuud: Waa halyeygii waynaa ee geesiga ahaa ee Soomaaliyeed. Waa Maxamuud Xarbi oo ahaa geesi gobannimo u-dirir ah oo ay shirqool ku dileen Faransiisku.
*Imaam Cismaan: Waa Sheekh Cismaan Wacays oo kamid ahaa culimada reer-Jabuuti ee kasoo horjeestay gumaysigii Faransiiska. Wuxuu ahaa imaamka masaajidka Cabdilqaadir ee Xaafadda Afaraad ee magaalada Jabuuti. 6dii bishii Juun 1966 ayey gumaysigu si shirqool ah u dileen, Alle ha u naxariisto.
*Axaddii bishii Maaris: Waa 19kii Maaris 1967 oo laga qaaday afti dadka reer-Jabuuti oo si weyn u diidanaa gumaysiga. Laakiin Faransiiska ayaa marin-habaabiyey aftidii oo ku sheegay in shicibkii reer-Jabuuti doorteen in gumaysigu sii joogo. Dhacdadaas waxaa laga tiriyey maansooyin badan oo ilmadu kaa qubanayso.
*Iglan: Waa dal kamid ah dalweynaha Ingiriiska laakiin waxaa looga jeedaa waddanka Ingiriiska oo dhan.
*Amriik: Maraykan.
*Almaaniya: Waa Jarmalka.
*Baydadkani waa cabasho. Ma habboona in qaddar dhacay laga cawdo ama laga murugoodo. Waxaynu Alle uga baryeynaa abwaanka inuu dembigiisa dhaafo oo u naxariisto.

GALANGAL
Maxamed Ibraahin Warsame “Hadraawi”
Gabayga soo socda ee galangal waxaa uu Hadraawi tiriyey 1970needayadii, wakhtigaas oo uu socday dagaalkii xaqdarrada ahaa ee lagu qaaday reer Fiitnaam. Madasha uu ka tiriyey waxay ahayd mid lagu soo dhaweynayey weftii ka socday jabhaddii xaq u dirirka ahayd ee reer-Fiitnaam ee la dagaallamaysay dulmiga Maraykanka. Waftigaasi waxay marti u ahaayeen dawladdii Soomaaliya oo hiil la garabtaagnayd dulmanayaashii reer-Fiitnaam.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Si aad u fahanto nuxurka gabayga aan kuu soo koobo taariikhda dagaalka Fiitnaam. Dagaalku wuxuu socday min 1955 ilaa 1975. Wakhtigaas ka hor markii gumaysigii Faransiiska laga saaray dhulkii uu gumaysanayey ee loo yaqaannay Indo-Shiina oo ah Fiitnaam-ta maanta, ayaa wuxuu dhaxal ahaan uga tegay kala qaybsanaanta Fiitnaam. Dabadeed waxaa jabkii Faransiiska kadib faraha lasoo galay dalka Maraykanka oo taageero siiyey qaybtii koonfureed ee Fiitnaam oo aan haysan taageerada shacabka reer-Fiitnaam. Shacabkii reer-Fiitnaam oo uu saldhig u yahay waqooyiga Fiitnaam, ayaa arrinkaas ka dhiidhiyey. Dagaal socday labaatan sano kadib waxay guushii raacday shacabkii gobannimo u-dirirka ahaa ee reer-Fiitnaam, waxaana si foolxun u jabay Maraykan iyo xulafadiisii faraha badnayd ee xaaraanta isku bahaystay.
Bal aan tirakoob yar kaa xasuusiyo musiibadii ka dhalatay dagaalkaas labada dhinacba:

Ciidadamadii labada dhinac ee dagaallamayey (1968)

Maraykanka iyo xulafadiisa
536100 askari oo Maraykan ah
850000 askari oo koonfurta Fiitnaam ah
50000 askari oo Koonfurta Kuuriya ah
7672 askari oo Ostaraaliya ah
10450 askari oo Filibbiin iyo Taylaan ah
552 askari oo Niyuu Siilaan ah
Wadarta askarta xulafadu waxay ahayd 1830000 (hal milyan siddeed boqol iyo soddon kun oo askari)

Askarta shacabka reer-Fiitnaam ee gumaysi-diidka ah
287465 askari oo reer Fiitnaam ah (laba boqol siddeetan iyo toddoba kun iyo afar boqol iyo shan iyo lixdan askari)

Khasaarihii ka dhashay dagaalkaas labada dhinacba

Dhinaca Maraykanka iyo xulafadiisa
Mareykan: dhimasho 58220 askari, dhaawac 303635
Koonfur Fiitnaam: dhimasho 220357, dhaawac 1170000
Koonfur Kuuriya: dhimasho 5099, dhaawac 10962
Ostaraaliya: dhimasho 521, dhaawac 3000
Niyuu Siilaan: dhimasho 37, dhaawac 187
Taylaan: dhimasho 1351
Boqortooyada Laawos: dhimasho 30000
Wadarta dhimashada askarta xulafadu waa 315384 askari

Khasaaraha gobannimo-doonka reer-Fiitnaamka
1176000 (hal milyan, boqol iyo lix iyo todobaatan kun oo qof).

Tirooyinka qaarkood waxay sheegayaan ilaa shan milyan oo qof in ay ku naf-waayeen xasuuqii loo geystay reer-Fiitnaam. Toddoba milyan oo bam ayaa lagu bam-gareeyey reer-Fiitnaam, taas oo ku laba jibbaarmaysay wixii bambo la tuuray

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

dagaalkii labaad ee adduunka oo dhan. Waxaa dib ka dhashay 500000 (shan boqol oo kun) oo carruur laxaadkoodu kala dhantaalan yahay ah suntii hubka dartii. Xad-gudubka intaas le'eg ee laga galay reer-Fiitnaam, kama aanu dhigin kuwo u cabiidsama gumaysigii laga rabay. Waa ay dagaallameen, adduunka taagta daran oo dhamina wuu la ooyey.
Haddaba gabaygani wuxuu ahaa mid lagu dhiirrigelinayo dagaalyahannadii reer-Fiitnaam ee diiday keenadii gumaystaha. Weli ayada oo uu dagaalkii Socdo ayey Soomaaliya yimaaddeen wefti ka socday jabhaddii xarbiyeysay. Markaas ayuu Hadraawi gabaygan qiirada iyo dhiirrigelinta ah u akhriyey. Gabaygu reer-Fiitnaam uma gaar aha ee wuxu quseeyaa cid kasta oo loo soo qaato keeno gumaysi. Wuxuu yidhi Maxamed Ibraahin Warsame Hadraawi:

Galbis dhacay dadweynahan gabradey, gaafka igu meersan
Qurux ganac leh gole dheehaniyo, bilicdan gaasheesay
Gargarraanta nuurkiyo shacniga, la isku googgooyey
Shirgobeedka guurtida fadhida, garangar waaheelan
Marti gacala mudan laysu guray, gulufka heensaysan
Gololada mashxaradaysa iyo, sacabka guugaabo
Galladda iyo raynraynta iyo, gooha dami waayey
Iyadoo gorfayntiyo la taxay, doodda gudaheenna
Guddi werisayaa iyo nin kale, gooni hadalyaaba
Qofba kaalin goorteeda buu, gaar u leeyahaye
Anna tayda ii go'an haddaan, galo abbaarteeda
Ma gunaanadaayee haddaan, jaro garraarkeeda
Gayaaxaa haddii aan ka furo, madida ii gaaxsan
Godolqaad hadday labada law, dib u yar gaalgaasho
Gaawaha hadday buuxisoo, waliba gaash daato
Ganuunkeeda xoorka le haddaan, madalka gaadhsiiyo
Anigiyo garaadkay haddaan, idin guddoonsiiyo
Geestayda waa iga dhanyahay, galangalkaygiiye
Gadaashay ninkii odhanayow, gacanta ii haadi

Afartaasi waa gogaldhigiyo, maanso gedeheede
Godkaan degay warkaas guud haddaan, kor uga sii guuro
Xaajada gondaha laaban iyo, godanka hooseeya
Gunta iyo salkeediyo haddaan, saro gunaadkeeda
Gawdiyo ujeeddada ladhkiyo, caawa iyo goobtan
Nimanyahow gantaalaha subkaye, gamaska dhiigeeyay
Nimanyahow galkiyo seefta yidhi, gees u kala leexda
Nimanyahow sidii awr gurgura, caynku gubi waayey
Nimanyahow garbaha buuxsadee, raray gardaadkooda
Nimanyahow gadoodiga bartiyo, galow la soojeedka
Nimanyahow habeenkii gudee, guura-bahaleeyay
Nimanyahow gadiidkii socdee, meel hadh gali waayey
Nimanyahow sariir lagu gam'iyo, gogal ka dheeraaday
Nimanyahow guryaha diiday iyo, gaari lala seexdo
Nimanyahow gasiinkii ka tagey, gaws wax lagu qaato
Gudcur dama cirkoo gibil xidhoo, dhibic is gaadhsiiyey Nimanyahow gudgude soo curtiyo, guuxu kari waayey

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Gabadannada nimanyow dugsadey, goorad laga hoyday
Nimanyahow gabboodkiyo dugsiga, gelinna hayn waayey
Gudguduudka waagiyo saq-dhaxe, maalin kala guurtay
Mugdi gaba' cadceed gaasa-baxa, waaga galacdiisa
Nimanyahow gumaystaha ku jaray, gaadmo iyo weerar
Miinada gumaadkiyo xeryaha, gaadhka lagu meershay
Nimanyahow sidii aarka guda, guudka kaga booday
Nimanyahow guddoonsadey inaan, godobtu duugoobin
Nimanyahow ma guurtada xuska le, geliyey taariikhda
Haddaydaan adduunyada gilgilin, xil i ma guuleene
Laabtayda kama soo go'een, tix iyo geeraar e
Gocashada dareenkiyo murtida, amase guurowga
Waxad gaysateen buu ku yimi, gabayga joogaaye
Taariikhda guunka ah haddaan, gelin wax weydiiyey
Allaylahe Galbeed wuu ku jabay, goballadiinaase
Indoo-Jayna geeraw-ga qoran, guuldarriyo hooge
Biyanfuu gulcubihii dhiciyo, galalki dhiigoobay
Faransiiska wiishkii la go'ay, saw la garan maayo!

Maantana geddii baa dhacdiyo, tii gafkii hore e
Gal dad liqa ul baa lagu dayaa, lagu gurraacaaye
Garka xadhigga loo daadshey iyo, gedefka loo saaray
Gaaggaabnidiiniyo malaa, gibil basaaskiinna
Is gamaarintiinnii miyuu, gorodda soo dhiibtay!
Iyagays gunaanada intay, qawl is geliyaane
Garannuugta laacii hodaa, goodir tiigsadaye
Gashigii maqnaa buu is yidhi, gooshkan soo celiye
Baariis dabkii lagu gubaa, Waashintoon galaye
Geyigiinna oo idil illaa, gooddi iyo gooddi
Gargoor baa la moodaa timaa, ciidda guud-qubane
Gallaydhyeys waaraabiina xoor, gorofki caydheede
Rag baruurtu goobtiyo lagiyo, goolalbaw qalane
Gudur iyo badhaadhiyo mudiyo, goonji buu cunaye
Intaad gawracdeen iyo intii, goobo lagu laayey
Gorgor iyo intii baylahnimo, haad ku gabasleeyey
Garba-duub intaa ugu xidheen, galalka liileysan
Way galabsadeen ciilka ay, golongol tiiceene
Goldalooladay jecelyihiin, ciday galaaftaane
Gelin qudha ma daayaan ninkay, gaatir ku arkaane
Gacma hoorsi kaagama tagaan, kumana guuraane
Geesaa bay yeeshaan haddaan, waranku giirrayne
Dhegahay gufeystaan haddaan, geesiyaal heline
Garta ay dhagaystaanba waa, gumuc rasaaseedel
Gujaduu ku maalaa ninkii, geda-yaqaanaaye
Gudin iyo warmuu kaga furtaa, gaadhi shaaximane
Gurracnaanta iyo maagga iyo, laba-gar-daymoodka
Gaffuurtaagga iyo tookha iyo, higilka gawdiidka
Gabgabtiyo is-waalkiyo saskiyo, gooddigiyo faanka
Galoof-ololka wey leeyihiin, qabiyo guulguule
Dagaal laysu soo galay haddii, gaylanku is-dhaafo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Galaayuus qaboonada horray, gabarrucleeyaane
Hadhow bay sidii guunyo nugul, gebi-dhacleeyaane
Marka runi-runteed gaydo way, gamashi dhiiqaane
Gagsi ma le haddii loo cuskado, tabiyo gaalleefe
Haddii laysu sii giijo way, galangalcoobaane
Gadaal bay u laabtaan haddii, good ku soo baxa e
Waligoodba guul kalama tagin, meel garaad jiro e
Gubniyada la soo daadsheyee, gaatin caranaaya
Gurmad raabaraabiyo coliyo, guuto iyo guuto
Wixii gaasas soo degay wixii, geesh is-daba joogey
Ee tirada ay gaadhayaan, ruuxna garanwaayay
Laf galluuban mooyee haddaan, goosan laga haynin
Maraakiibta goonyaha baddiyo, gaafka hoganaysa
Diyaaraadka gawdaa hayiyo, galacda baaruudda
Dabbaabadaha goobyaalayee, gurada loo buuxshey
Garangarinta Naabaalka iyo, gabaxda Riigaanka
Gaaraabidhaankiyo dabkiyo, gugaca yeedhaaya
Galayaxa is-dhaafiyo higtiyo, guuxa iyo reenka
Gudban iyo waxay tuurayeen, goosatada reebban
Waxay gaaxsadeen iyo waxay, godal ku keeneenba
Godanadda Kamboodiya taniyo, Laa'us gudaheeda
Fiidnaam galkeediyo intii, godanka Saygoona
Indoo-Jayna gees iyo ka gees, guudka iyoo hoosta
Hub wixii galaabaxay haddaa, meelna lagu gaadhin
Ninkiinnii gurguurtiyo intii, naafo gabargaashey
Ninkii gurungurcoodkuu dhaliyo, gacaladiis waayey
Nin goblamay nimaan gaban u hadhin, gaar nin keligiisa
Gallad qubatay xooliyo dadiyo, garangar duugowday

Gocoshiyo xanuun ma leh wixii, guud ahaan lumaye
Gobanimada waa loo dhintaa, gooriyo ayaane
Ummad gadata mooyee nin kale, waa ka garannuuge
Ma gabloosho beertii xabiyo, dhiig ku goraraaye
Damalkii la gooyaba midbaa, soo gadaal baxa e
Guri laga baroortaba aroos, gaafan baa xiga e
Haddaan loo garraadayninoo, waayyo lagu guulin
Way gaaggaxdaa talada aad, gola-ka-fuushaaye
Garab-qaadka faylkiyo dhismaha, oodda guriddeeda
Gudintiyo hangoolkiyo habkiyo, gees-u-wada-jeedka
Gadhwadeenka xeerbeegtidiyo, gaanka wadartiinna
Gabadhiyo marwada heeganta'a, ee gambada xooray
Gashaantida maryaha faydatee, gayfan diriraysa
Gaashaan dhiggiiniyo qorshaha, amma go'aankiinna
Guddoonkiinna hoosiyo illaa, guniyo-baarkiina
Galdalloolo kama mutiqatiyo, gobor la sheegaaye
Xaajadu gun bay leedihiyo, xeedho sii godan e
Farriin laysu geeyiyo ka culus, guubis iyo baaqe
Bulshadii gadooddaa midbay, dhiilla gelisaaye
Markay gibisha xoortaa ta kale, dabarka goysaaye
Gobolkii xoroobaa mid buu, gama' ka toos-shaaye

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Jidkaasaa go'doonkii maraa, geeddi mariyaaye
Gabbashada intii diiddanee, gaylan diriraysa
Galladiinu inay nuur u tahay, galiya maankiinna
Waxba arartu yey ila gudbine, waxan ku soo gooyey
Gaar kuma tihiin hawsha iyo, goonidiin qudhahe
Gar-naqsiga badheedhkiyo runtiyo, godolka maahmaahda
Golaa baanistiisiyo intii, geed inagu raacda
Gumaystaha intii diiddan baa, gacal wadaagtaane
Gammaan baynu wada saarannahay, gu' iyo jiilaale
Nolosha iyo geerida dirkaba, waw gudboonahaye

Dhul guduudan geediyo ugbaad, ubax ku guud yaala
Xareed galac le galal buuxa iyo, webiyo guurreeya
Ido gorod madow iyo fardiyo, lo' iyo geel foofa
Aar gooha gooliyo shabeel, haramcad guuxaaya
Goobyaalka deerada mankiyo, gurata maanjeeta
Geri jeenya dheeriyo biciid, goray-haldhaa qooqay
Wiyil gees leh farow gaadda-weyn, goodirkiyo cawsha
Maroodiga Ganaanee mirtee, gacanka laadlaadsha
Shimbiraa galooliyo maraa, buul ka wada goostay
Umad goba gabraartana u daran, gebi ahaantiisa
Oo waxad gashaaniyo ogsoon, guurtinamadiina
Gacmo furan salaam gaara iyo, gogal idiin taalla
Iyo guusha oo dhaw haddaan, goorna laga seexan
Galabtaas ninkii jooga iyo, guri-yagleelkeeda.

GABADH MADOW
Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"
Maansadan la magac-baxday gabadh madow uma baahna in la fasiro. Waxay xambaarsan tahay guud ahaan nuxurkii ku jiray suugaantii aan xusay. Waxay kamid tahay sababaha aan abwaan Hadraawi ugu dhex daray halgamayaal beri hore noolaa. Maxaa yeelay buugga waxaan u qorsheeyey suugaantii la tiriyey xilligii gumaystaha. Waxaan u arkaa nin jaad-gooni ah oo kasoo hadhay dadkii hore. Wuxuu yidhi:

Goonyahaygu waa dhagar
guudkaygu waa xeel
garayskaygu waa seef
guntigaygu waa dil
gudahaygu waa yool
Weligay gu' iyo dayr
guul oomman baan ahay
hantidayda gawriyo
gabayooxna lagu beer
dayaxay u gudubtaa
anigana gelgelintiyo
garab rarato kama baxo
gadh wadeennadayduna
giddi inan-la-yaal iyo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

guur-doonno weeyaan
geyaankoodu waa damac
utintayda lama gudo
gashigayga lama bedo
galladayda lama karo
dibnahaa ka gaabsada
guubaabadayduna
kama foga guraa-baas
Guuguule yeedhii.
Badi waan gadoodaa
Cidda aan galaaftaa
guurtidayda weeyaan
anigays gunaanada
hadba waxan ku giirtaa
guuleedka ii kaca
geeddigaygu sahan ma leh
geenyo hadaftey weeyaan
goob-yaalka milicsiga
gabar-gaalka lahashada
gacan haadis bay dilay
iyo laba gar-daymood
gurrantayda bidixdiyo
garabkayga midig baan
midba gelin u jeestaa
ka cabsaday god naareed
jannadana ma geli karo
gooddigooda ku anbaday
duniduna gabaabsiday.
Tiradaa gedmaysoo
i galaa baxaysee
maxaa goolal igu maqan?
dheeshan laygu goobtee
gefka lagu heshiis yahay
mee gar-sooreheedii?
Geeddu xeer ma leedahay?
Mise waa lug iyo gacan
labadaba ku garangari.
Goohu yuu kasoo baxay
guurowga yaa wadey,
maxaa keenay gabayada?

Inaan gabadh madow ahay
cadrad lagu gabboodfalay
malaa waad i garateen?
Sheeko gaaban baa tidhi:
“Nin ay gaajo haysaa
guri yimi duleedkii
soddoh garasho dheer uu
gabadheeda qabay baa
dhito godollo sheellayd

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

ugu geysey meeshii…
Isaguna guddoon yidhi,
laysu guud mar toyashada
caanaha gadhoodhaa
inay guura-guuraha
weelka gaararkiisiyo
gunta badi ku ururaan
waa ged lagu yaqaannee,
godankii isugu tage…
Isaguna ka geyn waa
inuu dhiilka gororsado
gacantana ma dari karo.
Isagoo xil-gubashada
u daruuray gaashaan
Isma gabe wuxu yidhi:
“Markii ay na gelayeen,
waa nala gilgilayoo
inta nala gun-dhebey baa
afka nalaku gaacsaday…”
wadnihiisu galow ma leh
ku gadaangad ceebtii
libintana ku geeraar
xeeshiise lagu garay
murti guun ah laga reeb.

Jiiftada gar-dhaladka ah
waxan uga gol leeyahay
Allahayow gurracanaa
marti goor xun socotood
gobannimo ku soortoo
kugu tidhi gun baad tahay!
Markii aan garaaddaha
taariikhda kala guray
illaa gogol-dhiggiinnii
galabtaad is-wacateen
taladana in lay galo
Baarliin ku goyseen
Ilaa gooshkan maanta ah
hadimada i gaadhiyo
waxaad geysateen baan
gocashada xasuustee
maxaan reer Galbeedow
godob kaa tirsanayaa?
Mise gabawar mooyee
tolow maba garowdaan!
Maxaa gaasas duuliyo
guutooyin xoogliyo
gurmad leedda-fuuliyo
guluf weerar tooxdiyo
dabley gaatan socotiyo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

geba-geba i saarteen?
Maxaan goor la seexdiyo
habeenkoo gabbala-ridey
laba gelin is-raaceen
gaaf-meerka socotada
iyo guura-bahallaha
geesaaska fiintiyo
galow foodhidiisiyo
galayaxa rasaastiyo
col gurguuranaayiyo
gellimaad ku sara kacay.

Maxaad gaade hoosiyo
gurrac iyo shirqool.
iyo tabo igu gantoobteen?

Maxaad garan-gartaydiyo
guryahayga bi'iseen
Gacal iyo tol wada yaal
gobol gobol u ooddeen
laba aan is-gooyeen
kala goonni yeesheen
Maxaa laba gudboonayd
midna garabka siiseen
ka labaad u guusheen
isku go'a tidhaahdeen

Maxaa wiilal gaammurey
intaad ugu guduuddeen
ha galgalan tidhaahdeen

Maxaa Gaanni ciidmiyo
hanad aan gardaadshoon
ku goblamay birayseen
golxobkiinnu ku afuray

Maxaa geesi aan dhalay
inta gowrac mariseen
gorgor baahan siiseen

Maxaa inan gashaantiya
gayaxaha ka siibteen
milgadeeda gawsheen
ka xil baxay gayaankeed

Maxaad gaari weer xidhan
godol-qaad ku daydeen

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Maxaa guul darraystiyo
godadliyo hinaasiyo
Gocor igu habayseen
Giiba* sow nin ma ahayn?
Geeskayga bari yimi

Maxaad gacan ku dhiigliyo
gibil kala tabooriyo
garma-qaate dhegaliyo
garac igu abuurteen?

Maxaad good mariidliyo
gungumiyo abeesiyo
goodaaddo jidhifliyo
garangoorri socotiyo
inta bahal gurguurtiyo
belo igaga guurteen.

Maxaa gegi dabayliyo
gocondhaley cagaagliyo
galoofiyo candhooliyo
geyi lama degaaniyo
goonbaar habaasliyo
guban lagu asqoobiyo
gaajada rugteediyo
gabno igu tilmaanteen?

Goobtii harraadkiyo
gurigii cadceeddiyo
geedkii saboolkiyo
gudcur maararrowliyo
yaa go'doonka iga dhigay?
adduunyada geddaas faray?
gaasiray maxaan ahay?

Maxaa gocayadiinniyo
inta gaawihiinniyo
gorofiga milaasheen
gudhan iigu yeedheen

Aaway guuyadaydii
geeliyo lo'daydii
faraskiyo gammaankii
goolashaydi soocnaa?

Aaway gaaxsantaydii
dahabkii guduudnaa
macdantii goshaydiyo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

gebiyada ku duugnayd?
Warshaddiinna guuxdaa
midhahay gadaysiyo
miidday guntaysiyo
ganacsiga abeerka ah
xaggee looga soo guray?

Guushkay tufaysiyo
dheecaanka gabaxliyo
xinjiraha galshaystiyo
dhiigga gobo leh yayska leh?

Immisaa gabaarrey iyo
garab-cas igu koray?

Maxaa gaatirtaydiyo
galdaloolladaydiyo
sida lay gabraartiyo
garka laygu laylyiyo
gedda lay salaaxiyo
googgaa ku sabiddiyo
gobortayda barateen?

Dadku geed adaygiyo
gudintay kol iyo laba
lafa-geri ku dhuuxaan
waxba kuma garaacdee
miyaan tiinnu gaagixin?

Maxaan geystay oo dhimay?
Maxaan galabsadee falay?
anigoo la gamashiyey
gondahayga seetadu
waxay haar ku gedeftiyo
Gurgurkii i saarraa
boqol gu'iyo taartaar
anigoo gun iyo baar
korku wada gunaad yahay
anigoo la golongolay
sida caynku ii gubay
gubuxsiga tallaabada
garba-beelay dhowr jeer
goob-joogna ka ahaa
galab noolba waxa dhacay
anoo uur-guluuluca
la gommoday dhibtaadii
adoo gacan togaalaha
gardarriyo is-yeel-yeel
intaasoo gef muuqdiyo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

guul darrooyin igu falay
maxaad weli guhaaddiyo
gaadhka iiga haysaan?

Maxaa gumuca boodiyo
gaara-bidhaantiyo
hubka iigu gibisheen?

Maxaad saymo gadataa
dab gamaaray hurisaa
Maxaad gawsahaagiyo
miciyada golxaystiyo
ciddi wada garaara ah
shaadh iigu gelisaa

Maxaad geda-gedaysaa
hadba geed is-marisaa
Ummad geylameysoo
gaarkooda taladii
inta ay gorfeeyeen
raba inay geyoodaan
kuwa jira gadaashana
gaadiid u celiyaan
intaan gaasha-weyntiyo
cawa-darantu soo gelin
maxaa geeddigoodii
gujis lama filaaniyo
gal dad-liqa ku noqoteen?

Hadba ruuxa goolmoon
raba inad gunnaysaan
ama guufaf timiriyo
galley loogu sama-falo
maxaa geeridiisiyo
waran iyo gantaal iyo
gaalleefu siisaan?

U gurbaynta noloshiyo
gacan-siinta nabaddiyo
gudashada sidii roon
maxaa kaa gabaanadey?

Afartaas god madaleed
gola-joog ku naanays
Gaarriyow ka marag noqo
ila gudubtay sheekadu
geba gebana doontee
bal aan soo gunaanado

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Ninka loo gol leeyahay
isagaa is-garan kara

sida goosan Weer belay
igu gaabi tuurtuur
igu gado sir iyo caad
halkaad gaadho taagtaa
Aniguna il-galaclaha
is-gamaarintaydiyo
gadh-salaaxa maahdiyo
gama'aan hurdo lahayn
goroddaan lalminayaa
gabbashiyo ma aha quus
gar-naqsaan ku jeedaa
talaan gawda ku hayaa
Inkastaad gamuurteen
geedka aan ka beerrahay
ma qallalin guntaydii
ganto xidid leh baan ahay
dab baan soo gadaal-celin
Gebi-dhaca i haystiyo
gaalgaalka dheelliga
ku guddoonsan maayee
waxaan goobayaa raad
jidkii guusha aadmiga
gelbiskiyo mashxaradaha
gafi maayo hawlaan
guryo-samo ku tegi karo
goobannimo ku hanan karo.
Guntashada xasuusaha
gudashada habboonkay
gabay gabaygan ciil-tira
u ged-baxa falaadkay
waxaan geysto magac-dheba
Aan lahaanno goorteed.

– Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"

*Giib: Waa Alen Giib (Allen Gibb) oo ahaa sarkaal ka tirsanaa ciidamadii Ingiriis ee gumaysan jiray Soomaalilaan. Wuxuu ahaa nin dhibaatooyin badan gaadhsiiyey shacabkii Soomaaliyeed. Laakiin aakhirkii waxaa dilay geeljire Soomaaliyeed oo ka dhiidhiyey cashuur Ingiriisku kusoo rogay geelashooda.

YABOOHIN HALYEY IYO HIMILOOYIN FOG

Waxaan kusoo gabagabeeyey xaashida tan ka horraysa, ururintii suugaantii laga tiriyey gobannimo-doonkii Soomaalida iyo suugaan dhawr ah oo xidhiidh wanaagsan taas la leh. Ujeeddadu waxay ahayd in aan akhristaha isugu xidho taariikhdaas dhow, ta maanta lagu jiro iyo timaadada mustaqbalka. Halgankii loo galay xorriyadda marna laguma gaadhin himiladii la rabay. Sidaas darteed waxaa la odhan karaa wuu

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

dhicisoobay halgankaasi. Laakiin intii dhicisku sii noolaa rajo ayaa la qabay bal in wax uun is bedelaan oo dhiciskani iska koro laakiin kol haddii uu bakhtiyey waxaa loo baahan yahay halgameyaal cusub oo kuwa buugga ku xusan bedeli kara, isla markaana aanay natiijada halgankoodu dhicisoobin.
Waxaa loo baahan yahay halgan dheer, halgankaasi ilaa uu xaqiijiyo toban hadaf waa mid qabyo ah. Tobanka hadaf ee loo baahan yahay u-hawlgalkooda waa:
1. Waxbarasho: Waa in lagu dadaalo in dadka wax la baro oo la kobciyo aqoontooda iyo wacyigooda. Lama gumaysan karo dad aqoon leh. Aqoonta loo baahan yahay waa mid maaddi ah iyo mid diini ah labadaba. “Qof muumin ah god laba mar lagama wada qaniino,” ayuu xadiis leeyahay. Waxbarashadu waxay noqon kartaa mid nadaamsan iyo mid dadban labadaba. Waa in manhajka waxbarasho iyo muqarrarada tacliineedba lagu saleeyo duruufta umadda iyo dalka. Dad dhaqan kale wax lagu baray sidee ayey horumar ugu samayn karaan kooda?

Waxaan gacanta ku hayaa buug ciwaankiisu yahay Toban Hadaf Gadaashood. Waxaan ku muujin rabaa fikradda ah in guusha iyo barwaaqoobidda Soomaalida la helayo haddii la xaqiijiyo tobankaas hadaf. Alle ha ii sahlo soo-saaristiisa.

2. Isku fillaansho dhaqaale: Waa in wax-soo-saarka dhulka, beeraha, xoolaha nool, badaha iyo warshadahaba la tacab-geliyo si la isugu fillaado, gaar ahaan dhinaca quutal-daruuriga.
3. Madax-bannaani dhaqan: Waa in horumar kasta lagu saleeyo dhaqanka Soomaaliyeed iyo diinta Islaamka. Lama arag umad horumartay ayada oo ay is-diidan yihiin dhaqankooda iyo horumarka ay rabaan. Looma baahna in dhaqan lasoo ergisto ee waxaa loo baahan yahay in aqoon lasoo guursado.
4. Madax-bannaani siyaasadeed: Waa in aayo-ka-talinta umadda Soomaaliyeed aan loo dabo fadhiisan shisheeye, cadaawena iskaba daa hadalkiisa.
5. Xasillooni guud iyo madax-bannaani nabadgelyo: Waa in la helo ciidan ummadeed oo tababarkiisa, qalabayntiisa iyo dhaqaalihiisuba ka madax-bannaan yihiin farogelin shisheeye. Waa in nabad-sugidda gudaha iyo debedduba noqdaan kuwo madax-bannaan oo aanay shuqul ku lahayn quwado shisheeye. Waa in la higsado heer qofku dareemo xasillooni.
6. Madax-bannaani distoor: Waa in xeerarka iyo sharciyada umaddu yeelanaysaa noqdaan kuwo aan laga soo waaridin meelo kale ee si buuxda looga qaato shareecada Islaamka isla markaana la waafajiyo duruufaha iyo dhaqanka umadda iyo casriga la marayo. Sidoo kale waa in sharciga iyo xeerku si siman uga sarreeyo dadweynaha.
7. Ka-xoroobidda iimaan-la’aanta ama musuqmaasuqa: Dadka Soomaaliyeed ee casrigan nool waxaa lagu ibtileeyey hunguri weyni, hunguri xumaan iyo iimaan-la’aan ilaa heer ay jid walba u mari karaan, dheef yar darteed. Haddii mushkiladdaa dawo loo helo goldaloolooyin badan ayaa awdmi doona.
8. Ka-xoroobidda qabiilka: Si qabyaaladda looga dawoobo waa in marka hore nadaamka qabiilka laga guuro. Inta ay Soomaalidu qabaa’il tahay, qabyaaladdu waa Ina-Daanweyne!
9. Ka-xoroobidda qaadka: Waa in maandooriyaha qaadka laga xoroobo ilaa la helayo Soomaali aan idilkeedba qayilin, qaadkuna ka caaggan yahay dhulalkooda, ganacsi ahaan iyo beerisba.
10. Midnimo dhinac walba ah: Waa in natiijada halganku noqdo midnimo buuxda oo shisheeyaha laga midaysan yahay loona midaysan yahay. Wakhtigan xaadirka ah

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

midnimo siyaasadeed iyo mid dawladnimo lagama dhigan karo yool dhow. Laakiin waa in laga shaqeeyo midnimo dhaqan iyo madaxbannaanida qof kasta, koox kasta iyo deegaan kasta oo Soomaaliyeed xitaa iyagu yaanay nadaam mideeya wada lahaane.

QAYBSHEYAAL IYO MIDEEYEYAAL

Sida ka muuqata hordhaca yar ee bogagga kore ku xusan, umadda Soomaaliyeed waxay leedahay meelo ama ilo quwadeed oo haddii ay ka cabto ay xoogaysan karto iskana caabbin karto cadaawe kasta. Sidoo kale waxaa jira meelo ay ka nugushahay oo laga wareemi karo ama laga burburin karo. Markaa ciddii rabta in la alkumo ummad Soomaaliyeed oo sharaf iyo xoog lagaga haybadaysto leh, waa inay ka faa'iidaystaan ilaha xoogaysiga, iskana jiraan ilaha burburka iyo nugaylka. Ciddii rabta inay u-hawlgasho ummad Soomaaliyeed oo cagaheeda ku taagan, waxaa u doorran saddex mid:

1. Qaran ku dhisan qowmiyad
2. Qaran ku dhisan qabiil
3. Qaran ku dhisan Islaamnimo

Qaran ku dhisan qabiil waa mid aan weligii lagu gaadhi karin horumar, nabad iyo xorriyad midna. Sababtoo ah, qabiilku waa unug wax kala qaybiya ee ma aha mid wax mideeya. Umadna waxaa looga baahan yahay midnimo. Mar kale, qabiil in qaran lagu dhisto waxaa Soomaalida la jecel ummadaha la colka ah ee raba inay kula dhaqmaan qaybi oo xukun.

Qaran ku dhisan qowmiyad, waa mid hirgeli kara haddii la heli karo caddaalad, dhaqaale iyo ammaan madax bannaan. Haddii caddaalad la waayo, suurtogal ma aha in Soomaalidu wax isla wadaagto inkasta oo loogu heeso "Soomaaliyeey toosoo, toosoo isku tiirsada eey." Maxaa yeelay waxaa hore loo yidhi, "Rag caddaalad waayaa sidii cawsha kala yaac." Yacnii haddii caddaalad la waayo, qabiilkii ayaa dabiici ah oo loo laabanayaa. Sidoo kale waxaa la hirgelin karaa qaran ku dhisan qowmiyad haddii dhaqaale la helo isla markaana caddaalad loo maamuli karo.

Qaran ku dhisan Islaamnimo ama qaran Soomaaliyeed oo Islaami ah, waa midka keli ah ee hirgelin kara ummad Soomaaliyeed oo sharaf iyo xoog leh. Sababtoo ah, Soomaalidu aad ayey u rumaysan tahay Islaamnimada, waxaana suurtogal ah inay naftooda iyo maalkooda ku difaacdaan qarankaas. Caddaaladda Islaamka waa ay ku kalsoon yihiin oo xitaa haddii xukunku gacanta ugu jiro cid aan isku qabiil la ahayn, waa loo hoggaansamayaa badiyaaba.

Laakiin Soomaali iyo qarannimo Islaam ku dhisan la isuma oggola. Yacnii beesha caalamka ee xilligan ayaan oggolayn. Waxaanan ku qanacsanahay, xitaa haddii boqolkiiba boqol Soomaalidu sidaas doortaan, in lagu soo duulayo oo aan loo oggolaan karin fursad ay u helaan qaran Islaamnimo ku salaysan.

Bal haddaba akhristow adiguba xalkii soo hel. Weliba aan kuugu celiyee, Islaamku waa quwad midayn karta oo xoogayn karta Soomaalida. Qabiilkuna waa gol-jilic laga burburin karo oo kala kaxayn karta Soomaalida. Qowmiyadduna waa kolba kii ay labadaas u dhawaato. Haddii ay Islaamnimo u dhawaato rajo ayaa jirta, haddiise ay qabiilka u dhawaato quus keli ah ugu talo gal.

TIXRAACYO

1. Diiwaanka Gabayadii Sayidka – Aw Jaamac Cumar Ciise
2. Hal Aan Tabayey: Baal-Taariikheedkii iyo Gabayadii Xaaji Aadan Afqallooc –

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Maxamed Baashe X. Xasan
3. Gabayadii Cismaan Keenadiid – Yaasiin Cismaan Keenadiid
4. Geeddi-Socodkii Yuusuf Xaaji Aadan Qabille – Saynab Yuusuf Xaaji Aadan
5. www.hoygasuugaanta.com
6. www.doollo.com
7. www.toggaherer.com
8. www.somalitalk.com
9. Cajalado maqal iyo muuqaalba leh oo ay duubeen abwaanno kala duwan.
10. Soomaali Weyn: Dhalashadeedii iyo Dhabarjabkeedii – Dktr. Saadiq Enow
11. Culuumta Maansada – Siciid Maxamuud Gaheyr
12. Xog ururin iyo ogaal toos ah.

AAN OOYEE ALBAABKA II XIDHA
Maxamed Xirsi Guuleed “Cabdi-Bashiir”

Buuggani waa taariikh, suugaan, siyaasad iyo waddaniyad kolba sidii aad u akhrido. Wuxuu ku milicsiinayaa taariikh dhaweyd oo gumaysteyaal ku habsadeen umadda Soomaaliyeed iyo siyaabihii looga falceliyey iyo jawaabtii gumaystayaasha ee falcelintaas. Waa suugaan ay tiriyeen geesiyaal dhiidhiyey oo ay kuwani kamid ahaayeen:

Rajulka kaafur ah ee rugtaan yimid
Sidii rasuul Rabbi nooma soo dirin
Mana rabnoo naga reed bax waa niri.
– Sheekh Axmed Gabyow, 1891

Idinkaa dalkaba lehee, dawlad maad u noqotaan
Illeen doqoni calaf maleh, dubaax maxaa ka baylahay.
– Sayid Maxamed Cabdille Xasan, 1900-1920

Kol haddii dhulkeenii xadkaas, dhereran loo yeelay
Oo moodhikaar lagu dhibtiray, wada dhabbaynaayo
Dhallaan weeye kii haybiyaa, dhaqasho xoolaade.
– Muxumed Aw Cabdi Xaashi, 1939

AAN OOYEE ALBAABKA II XIDHA waa jeedal weli ku laba dhacaya naannida damiirka qofka Soomaaliyeed. Nus qarni in ka badan ka hor, ayuu Maxamed Ismaaciil “Barkhadcas” shaabuuggaas isla dul taagey oo la dhacay demmanaantii maanka Soomaalidii la gumaysanayey. Karbaashkaas mid la mid ah ayuu, mar kale maantana, 54 sannadood ka dib, qoraaga buuggani inagu oogayaa. Tebinta dhacdooyinka taariikheed ka sokow, wuxuu buuggani ka kooban yahay suugaan naqwo ah oo dareenka hurda-jiifka ka kicinaysa, sahanna u ah aragti qawmi ah oo cokaniyo dhis qaran oo Alle-yaqaan ah.
– Maxamed Baashe Xaaji Xasan

Buuggani waa qayb ka mid ah sooyaalka ummaddan maanta kala daadsan iyo halgankii ay soo martay oo loo cuskaday suugaanta oo ah diiwaanka kaliya ee loo laabmo haddii la rabo in wax la qoro. Maanta oo kale buuggani waxa uu hiil u yahay

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

dhallinyarada Soomaalida ee nasiib u wayday in dugsiyada ay ku bartaan sooyaalkoodii dhabta ahaa ee awowyaashood iyo dalkooduba soo mareen.
– Cabdalla Xaaji Cismaan, qoraaga buugga Xeer Ciise

Suugaan mug wayn oo laga dheehanayo hal-abuur cufkiisu buuxo weeyaan. Alle ha u wada naxariisto raggaas, waa fikradahoodii iyo aragtidii ay dejiyeen sababta ay Soomaali ku guuleysatey.
– Dktr. Saadiq Enow

ISBN: 978-91-976661-5-7

@SOMALIBOOKS